Baaq Xuquuqal Insaanka ee Caalamiga

Waxa Soo Diyaariyay Xafiiska Komishinka
Xuquuqal Insaanka Ee Ittobiiya

Sane 2005 (E.C)
Addis Ababa

© Baaq Xuquuqal Insaanka ee Caalamiga
Waxa Soo Diyaariyay Xafiiska Komishinka
Xuquuqal Insaanka Ee Ittobiiya
(2005 E.C)

Turjune: cabdi axmed Garad
(Jigjiga university)
Maxmed Ibrahim Xussen
(Jigjiga University)

Tifatire: cabdi Aadan xussen
(Human Rights Promotion Expert)

Farriinta Komishineerka Guud

Dastuurka Dimooqraadiga Federaalka Itoobiya waxa uu dhigaya shuruuc si ballaadhan oo qoto dheer u illaalinaysa xuquqaadka bini'aadmiga islamarkaasna dhigaya in heshiisyada calamiga ah ee Itoobiya saxeexday ee laxiriiray xuquuqaha bin'iaadmigu ay noqdaan kuwo ka mid ah xeerasha dalka u yaalla. Sido kalena Dastuurku dhigayo si loo illaaliyo xuquqahaas in la asaaso ha'yado fuliya illaalintooda. Sidaas awgeed, Dastuurku waxa uu yahay dukumeenti sal u ah nidaamka lagu illaalinayo xuquuqahaas. Intaas waxa dheer in Dastuurku uu dhigayo shuruucdiisa laxiriirta xuquuqahaas ee Dastuurkan dhaxdiisa loo turjumo si waafaqsan heshiisyadi iyo istiraajiyooyinka caalamiga ah ee laxiriiray xuquuqahaas ee Itoobiya saxeexday.

Si hadaba xuquuqahaas heshiisyada sare dhigayaan si ballaadhan loo fahmo iyado awoodaha iyo waajibaadada komishinka xuquuqaha bini'aadmiga ee Itoobiya ay ka mid tahay in heshiisyadaas lagu soo turjumo oo lagu soo daabaco luqadaha dalka lagaga hadlo. Haseyeeshe, su'aalaha heshiisyadaasi kuwamay yihiin , maxayse dhigayaan waxa si ballaadhan dood uga dhax taagan tahay aqoon yahanka sharciyadeed, garsooreyaasha iyo xirfadleyaasha sharciyada .Sidaas awgeedna illaa hadda wax xal ah looma helin su'aalahaas oo jawaabo isku mid ah mahelin Gaar ahaan su'aalaha ka imanaya xagga maxkamadaha, marmarka qaarkood waxay tahay waxa loogu soo turjumi laayahay heshiisyadan luqadaha dalka iyo mararkalo ay soo dhaweeyaan su'aasha aha maxaa loogu soo daabici laayay wargayska sharciyada ee Negarit Gazeta. Sidaas awgeedna shuruucda heshiisyadani dhigayaan ficil ahaan doorka ay ku leeyihiin geedisocodka maxkamadeed waxay noqotay mid aad u yar.

Inkasto sidaas tahay , Maxkamada Guud ee Federaalka Fadhigeeda Dib u eegista inkasto la odhan Karin si buuxda ayaa loo hirgaliyay waxay go'aan ka soo saartay arrintan si maxkamadaha dalku u adeegsadaan.Xitta wakhtigi kasoo danbeeyay go'aankaas illaa hada lama dhihi karo khilaafyadi way tirtirmeen.

Si hadaba xal loogu helo doodahaas sare ee laxiriira heshiisyada caalami ee xuquuqaha bini'aadmiga, Komishinka Xuquuqaha bini'aadmiga ee Itoobiya waxa uu diyaariyay kulan fikir iswaydaarsi ah oo looga wada xaajoodo arintan sanadkii 2003, halkaasoo la iskugu yeedhay garsooreyaasha iyo xubnaha kale ay khusayso arrintan. Wakhtigaas waxa lasoo dhaweeyay fikiro ah sababta loogu soo turjumin heshiisyadan luqadaha dalka lagag hadlo iyo sababaha ah waxa loo baahin waayay.

Iyado awoodaha iyo masuuliyada uu siiyay bayaanki lagu asaasay Komishinka ay ka mid tahay turjumista heshiisyadan caalami ee Itoobiya saxeexday iyo ku daabacidooda luqadaha dalka,haseyeeshe, Golaha Xildhibaanada Shacabka uma arkin muhiim in heshiisyadaas inta la turjumo lagu soo daabaco Negaarit Gazeta. Haseyeeshe, waxa uu komishinku u arkay inay muhiim tahay in heshiisyadan lagu soo turjumo luqadaha dalka islamarkaasna la daabaco si loogu addeegsado goobaha waxbarashada, maxkamadaha iyo sharci yaqaanada iyo dhamaan muwaadiniinta.

Sidaas awgeed, heshiisyada Itoobiya saxeexday iyo kuwa illaalinta gaarka ay siisay Ururka Qaramada midoobay iyo Midowga Afrika ee laxiriira Xuquuqaha Bini'aadmiga ee ugu waawayn in la daabaco oo la baahiyo inay tahay arrin muhimad gaar ah la siiyo. Iyadoo

arrintaas laga duulayo, Baaqii Guud ee xuquuqaha aadamiga, Heshiiskii Caalamiga ahaa ee xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan, heshiiski caalamiga ahaa ee xuquuqaha siyaasadeed iyo shakhsiyadeed, Iyadoo arrintaas laga duulayo, Baaqii Guud ee xuquuqaha aadamiga, Heshiiski Caalamiga ahaa ee xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan, heshiiskii caalamiga ahaa ee xuquuqaha siyaasadeed iyo shakhsiyadeed, Heshiiski Caalamiga ahaa ee tirtirida dhamaan takoorista dhanka ka ah haweenka, Heshiiska caalamiga ahaa ee ka hortagaya ciqaabaha xun xun, cadaadiska si aadami ka baxsanida u haynta, Heshiiska caalamiga ee kahortagida xasuuqa, Axdiga Africa ee xuquuqaha shakhsiyaadka iyo dadyowga, Axdiga Afrika ee xuquuqaha Caruurta, heshiiski caalamiga ee xuquuqda dadka naafaha ah in lagu turjumo oo lagu soo daabaco luqadaha.

Komishinku mustaqbalka waxa uu gartay in lagu soo turjumo heshiisyadan caalami luqadaha kale dalka. Haddase waxaan ku jirna sidii loo daabici laha kuwi hore loo turjumay oo loo adeegsado si haboon iyado loo fududaynaayo in si ballaadhan loo baahiyo siday uga faaidaystaan qaybaha ay khusayso iyo shacabkuba.

TIRUNEH ZENA (AMBASADAR)

Komishineerka Guud ee Komishinka Xuquuqaha aadamiga ee Itoobiya

Ciinwan **Booga**

A. Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqaha Binaiaadamk……1

Ba. Axdiga Cidhibtirka Dhamaan Qaababka Takoorida Khadhanka ah Haweenka…….....…..15

Ta. Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqaha Dadka naafadaah……..47

Ja. Axdiga Xuquuqoha Caruurta……122

Kh. Axdiga Calamiga ah Cidhibtrka Dhamaan Noocyada Midab-Takoorka……178

BAAQA CAALAMICA AH EE XUQUUQAHA BINI'AADAMKA.

Gogol –dhig

Maadaama aqoonsiga karaamada kulamaan iyo xuquuqaha lama taabtaanka ah ee loo siman yahay ee dhamaan xubnaha qoyska biniaadamka ay tahay aasaaska xoriyada, cadaalada iyo Nabadgeliyada Aduunka;

Maadaama tixgelin la'aanta iyo quudhsiga xuquuqaha bini'aadamku ay keenaan falal waxshinimo ah kuwaasoo ka cadhaysiinaya garashada aadamaha iyo degenaanshaha aduunka kaasoo ay tahay in bini'aadamku ay, ku raaxeystaan xoriyada hadalka iyo caqiidada iyo xoriyada ka xoroobida cabsida iyo baahida ayaa lagu bayaamiyay inay tahay damiirka ugu sareeya ee guud ahaan dadka.

Maadaama ay muhiim tahay, hadii aan bini'aadamka lagu qasbin inuu iska caabinta kali-talisnimada iyo cadaadiska, u adeegsado talaabada ugu danbaysa, in xuquuqaha bini,aadamka ay tahay in lagu ilaaliyo nidaamka sharciga.
Maadaama ay muhiim tahay in kor loo qaado horumarinta xidhidhka saaxiibtimo ee ka dhexeynaya wadamada.

Maadaama dadyowga Qaramada Midoobay ay mar labaad dib ugu xaqiijiyeen Axdiga dhexdiisa kalsoonidooda ku aadan xuquuqaha aasaasiga ah ee biniaadamka, karaamada iyo qiimaha qofka biniaadamka ah iyo xuquuqaha siman ee raga iyo haweenka, ayna go'aansadeen kor u qaadista horumarka bulsheed iyo darajooyin nololeed oo ka wanaagsan oo xoriyad balaadhan leh.

Maadaama Dawladaha Xubnaha ka ah ay balan ku qaadeen iyagoo kaashanaya Qaramada Midoobayinay gaashaan kor u qaadista xushmeynta caalamiga ah iyo u hogaansanaanta xuquuqaha bini,aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.

Maadaama fahamka guud ee laga midaysan yahay ee xuquuqahan iyo xoriyaadkan ay tahay ahmiyada ugu weyn ee si buuxda loogu xaqiijinayo balan qaadkan.

HADABA, SIDAASI DARTED, GOLAHA LOO DHAN YAHAY

Wuxuu bayaaminayaa Baaqan caalamiga ah ee xuquuqaha Bini,aadamka inay yihiin darajo guud ahaan ay gaadhayaan dhamaan dadyowga iyo dhamaan wadamada, iyadoo shaqsi

kasta iyo unug kasta oo bulshada ah. Maskaxda si joogta ah ugu haynaya Baaqan waa inay baris ahaan iyo waxbarsho ahaan ugu dadaalaan kor u qaadista xushmeynta xuquuqahan iyo xoriyaadkan iyo talaabooyin midha dhal ah oo heer wadan iyo caalamiba, si loo sugo aqoonsigooda dhabta ah iyo caalaminamadooda iyo u hogaansanaanta dadyowga dawladaha xubnaha ka ah iyo dadyowga ku dhex sugan deegaanada ay iyagu ka arimiyaan.

Qodobka 1

Dhamaan biniaadamku wuxuu ku dhashay xoriyad wuuna u siman yahay karaamada iyo xuquuqaha waxaa lagu galaday garasho iyo sababayn, waana inuu midba midka kale kula dhaqmo damiir walaalnimo.

Qodobka 2

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyaadka lagu xusay baaqan, iyadoo aysan jirin wax kala soocid ah sida; qollo, jinsi, luuqad, diin, siyaasad ama aragti kale qowmiyad ama bulshada uu kasoo jeedo, hanti, dhalasho ama xaalad kale.

Intaas waxaa dheer, waa inaan lagu kala soocin arimo siyaasadeed, xadeed ama meeqaamka uu caalamka kaga jiro wadanka ama dhulka uu qofkaasi u dhashay, in uu xor yahay, maxmiyad, uusan ismaamal lahayn ama caqabad kale oo madax-banaaniyeed.

Qodobka 3

Qof kasta wuxuu leeyahay xaqa nolosha, xoriyada iyo badbaadada qofka.

Qodobka 4

Qofna looma haysan karo in la adoonsada ama laqu shaqeysto. adoonsiga iyo ka ganacsiga dadka qaababkooda oo dhan waa la mamnuucay.

Qodobka 5

qofna laguma sameyn karo jidh-dil, ama loolama dhaqmi karo si cadowtinimo qaab xun ama hab-dhaqan ama ciqaab quudhsi ah.

Qodobka 6

Qof kasta wuxuu leeyahay xaqa in goob kasta shaciga hortiisa loo aqoonsado qof ahaan.

Qodobka 7

dhamaan dadku sharciga hortiisa way a siman yihiin waxayna si aan kala sooc lahayn xaq ugu leeyihiin in si siman looga ilaaliyo wixii kala faquuqid ah iyadoo lagu xad-qudbayo baaqan iyo wax kasta oo kicinaya kala fuquuqitaan.

Qodobka 8

Qof kasta waxa uu leeyahay xaqa ah inuu ka helo maxkamadaha dalka ee awooda u leh, magdhow ku haboon xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqaha aasaasiga ah ee lagu siiyay dastuurka ama sharciga.

Qodobka 9

qofna laguma sameyn karo xadhig, haysasho ama masaafurin sharciga ka baxsan.

Qodobka 10

Qof kasta wuxuu si siman oo dhameystiran xaq ugu leeyahay in maxkamad madax- banaan oo dhex-dhexaad ah ay dhegeysi furan oo cadaalad ah u sameyso. marka laga go'aan gaadhayo xuquuqihiisa iyo waajiaad yadiisa iyo eedayn kasta oo isaga ka dhan ah.

Qodobka 11

1. Qof kasta oo lagu soo oogo danbi ciqaab ah wuxuu xaq u leeyahay in loo arko in uusan danbi lahayn ilaa ay maxkamad hab sharciga waafaqday ugu cadeyso in uu danbiile yahay iyadoo uu helay dhamaan arimaha lagama maarmaanka u ah si uu isu difaaco.
2. Qofna looma qabsan danbi ciqaab ah oo ka dhashay ficil ama ka baaqsasho, kaas oo aan danbi ku ahayn sharciga dalka ama kan caalamiga ah, wakhtiga falkaas ama ka baaqsigaas la sameeyay. Lagumana soo rogi karo ciqaab ka culus mida lagu mutaysanayay danbigaas wakhtigii la galay.

Qodobka 12

Qofna laguma sameyn karo fara gelin sharciga ka baxsan oo ku wajahan arimaha isaga gaarka u ah, qoyskiisa, gurigiisa ama adeega isgaadhsiinta u ah, lamana weerari karo sumcada iyo sharaftiisa. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo ilaalin sharciyeed oo ku wajahan faragelinta ama weerarada noocan ah.

Qodobka 13

1. Qof kasta wuxuu leeyahay xoriyada dhaq-dhaqaaqa iyo degenaanshaha gudaha xadadka wadanka.
2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ka tago wadan kasta, oo uu ka mid yahay wadankiisu, uuna kusoo noqon karo wadankiisa.

Qodobka 14

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu magan geliyo ka raadsado wadamada kale kuna raaxaysto si uu uga badbaado dacwad lagu qaado.
2. Xuquuqdan looma adeegsan karo dacwadaha ka dhasha danbiyada ka baxsan kuwa siyaasadeed, ama falal lid ku ah ujeedooyinka iyo mabaadiida Qaramada Midoobay.

Qodobka 15

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo muwaadinimo.
2. Qofna si sharciga ka baxan loogama qaadikaro muwaadinimadiisa lagamana hor istaagi karo xaqa uu u leeyahay inuu muwaadinimadiisa bedelikaro.

Qodobka 16

1. Raga iyo dumarka qaan-gaadhka ah, si aan lahayn xad qolonimo, dhalasho ama diimeed, waxay xaq u leeyihiin inay guursadaan, oo ay qoys yeeshaan. Waxay xuquuqo siman u leeyihiin guursashada, inta lagu guda jiro xidhiidka guurka(la isqabo) iyo kala tegis-tiisaba.
2. Guurka waxaa lagu fulin karaa oo keliyo agolaansho buuxdo oo xor ah ee lamaanaha isguursanaya.
3. Qoysku waa midow aasaasi dabiici ah ee bulshada waxaana xaq u leeyahay in ay ilaaliyaan bulshada iyo dawladuba.

Qodobka 17

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho hanti gooni ah iyo sidoo kale in uu la yeesho cid kale.
2. Qofna si sharciga ka baxsan loogama qaadi karo hantidiisa.

Qodobka 18

qof walba wuxuu xaq u leeyahay xoriyada fikarka, aragtida iyo diinta, xuquuqdan waxaa ka mid ah xoriyada inuu bedeli

karo diintiisa ama caqiidadiisa iyo xoriyada uu keli ahaan ama bulsho ahaan si fagaare ah ama gaar ah ugu meel mariyo diintiisa ama caqiidadiisa barashadeeda, ku dhaqankeeda cibaadeysiga iyo u hogaansanaanta.

Qodobka 19

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xoriyada aragtida iyo hadalka xuquuqdan waxaa ka mid ah xoriyada in uu aragtiyo qaadan karo iyadoo aysan jirin faragelin uuna raadiyo, helana uuna la wadaago xogaha iyo fikradaha la isugu gudbinayo war-baahinta iyada oo aan xuduudo loo kala eegayanin.

Qodobka 20

1. Qof kasta waxaa xaq u leeyahay xoriyada inuu ku qeyb galo isu soo bax nabadgeliyo iyo urur ka mid noqosho.
2. Qofna laguma qasbi karo in uu urur kamid noqdo.

Qodobka 21

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeyb qaato arimaha dawlada dalkiisa, si toos ah ama isagoo u sii maraya wakiilo uu si xor ah u doortay.

2. Qof kata wuxuu xaq u leeyahay inuu si sinaan ah u helo adeega dawlada ee wadankiisa.
3. Rabitaanka dadku waa inay aasaas u tahay awooda dawlada. Arrintan waa in lagu muujiyo doorashooyin xilli la qabto kuwaas oo guud ahaan si siman looga qeyb galo loona fuliyo hab cod qarsoodi ah ama hanaan la mid ah oo cod bixin xor ah.

Qodobka 22

Qof kasta, xubin bulsho ahaan, wuxuu xaq u leeyahay helida amniga bulshada wuxuuna mudan yahay in lagu xaqiijiyo dadaalka wadanka iyo iskaashiga caalamiga ah iyadoo laga duulayo dhismaha iyo kheyraadyada uu dal kasta leeyahay, xuquuqaha dhaqan-dhaqaale iyo kuwa bulshadeed ee aan sinaba looga saari karin karaamadiisa iyo horumarinta xorta ah ee shaqsiyadiisa.

Qodobka 23

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu shaqo helo kana shaqeeyo shaqo uu si xor ah u doortay. Kuna shaqeeyo xaalado sugan ku haboon shaqada lagana ilaaliyo shaqo la'aanta.

2. Qof kasta, si aan kala soocid lahayn, wuxuu xaq u leeyahay ajuuro la mid ah shaqada uu hayo oo kale.
3. Qof kasta oo shaqeeya wuxuu xaq u leeyahay inuu helo ajuuro sugan oo ku haboon xaqiijinta inay u qalanto isaga iyo qoyskiisa jiritaanka karaamada bini,aadanka lagana kabo nidaamyada kale ee bulshadeed, hadii ay lagama maarmaan noqoto.
4. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu sameysto kana mid noqdo urrurada ganacsiga si uu ugu ilaashado danihiisa.

Qodobka 24

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo nasasho iyo xilli raaxaysi oo ay ka mid tahay saacado shaqo oo xadidan suurtagalna ah iyo fasaxyo xillile ah oo ajuuro la siinayo.

Qodobka 25

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay heer nololeed ku haboon caafimaadka iyo fayo-qabka naftiisa iyo qoyskiisa, oo ay ku jiraan, cunto, dhar, hoy iyo daryeel caafimaad iyo adeegyada bulshada ee lagama maarmaanka ah iyo xuquuqda damaanadeed ee

xaalada shaqo la'aanta; xanuunka, naafada, geerida, gabowga ama duruufaha kale nolosh ku adag,ee awoodiisa ka baxsan.

2. Hooyada iyo ilmuhu waxay xaq u leeyihiin daryeel iyo taageero gaar ah. Dhamaan caruurta, hadii ay meher ama meher la'aan ku dhasheen, waa inay helaan ilaalin bulshadeed si isku mid ah.

Qodobka 26

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho. Waxbarashadu waa inay noqoto mid bilaash ah, ugu yaraan heerarka hoose ee aasaasiga ah. Waxbarshada hoose waa mid qasab ku ah qof kasta. Waxbarashada xirfada iyo farsamada waa inay noqdaan kuwo guud ahaan la heli karo, iyadoo waxbarashada sare ay tahay in dhamaan si siman looga faa'iideysto hab waxtar leh.
2. Waxbarashadu waa inay ku wajahnaato horumarin dhameystiran ee bini, aadminimada iyo xoojinta xurmeynta xuquuqaha bini aadamka iyo xoriyaadka, aasaasiga ah. Waa in ay kobciso is-fahamka, dulqaadka iyo saaxiibtinimada ka dhaxaysa

wadamada, qolada am kooxaha diimeed, ayna balaadhiso shaqooyinka Qaramada Midoobay ay ku sugayso nabada.

3. Waalidka ayaa xaqa agu horeeya u leh inay doortaan nooca waxbarasho ee la siinayo caruurtooda.

Qodobka 27

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah oga geyb qaato nolol-dhaqameedka bulshada, ka faa,iideysto fanka iyo inuu la wadaago horumarka sayniska iyo midhihiisaba.
2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in loo ilaaliyo danaha maadiga ah iyo kuwo macnawiga ah ee ka dhalanaya wax soo saarka sayniseed, suugaaneed ama faneed ee uu isagu alifay.

Qodobka 28

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nidaam bulsheed iyo mid caalami ah oo xuquuqaha iyo xoriyaadka lagu xusay baaqan lagu xaqiijin karo.

Qodobka 29

1. Qof kasta waxaa waajibaad ka saaran yahay bulshada inuu gaar ahaan sida ugu suurta galsan oo xor ah si buuxda ugu hormariyo shaqsiyadiisa.
2. Isticmaalada xuquuqihiisa iyo xoriyaadkiisa, qof kasta wuxuu u hogaan sanaanayaa oo kaliya xadadka uu sharcigu go'aamiyay ee looga dan leeyahay in lagu sugo aqoonsiga iyo xurmaynta xuquuqaha iyo xoriyaadka dadka kale iyo meel marinta shuraadaha mooralka, kala danbaynta iyo wanaaga guud ee bulsho dimoqraadi ah.
3. Xuquuqahan iyo xoriyaadkan sinaba looguma adeegsan karo hab ka hor imanaya ujeedooyinka iyo mabaadiida Qaramada Midoobay.

Qodobka 30

Baaqan looma turjumi karo inuu si dadban xuquuq ugu siinayo dawlad, koox ama shaqsi gaar ah inuu ku lug yeesho shaqo gaar ah ama uu fuliyo fal gaar ah oo loogu talagalay bur-burinta xuquuqaha iyo xoriyaadka lagu xusay baaqan dhexdiisa.

Axdiga Cidhibtirka
Dhamaan Qaababka Takoorida Ka Dhanka Ah Haweenka

Axdigu wuxuu faahfaahinayaa kana dhigayaa qaab heshiis dhinacyo badan ka dhaxeeya qodobadii baaqa cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka. Waxaa lagu aasaasayaa aalad caalami ah oo lagu hirgelinayo qodobadiisa oo bar-bar socota kuwa loo aasaasay hirgelinta AXDIGA CAALAMIGA AH EE XUQUUQDA SIYAASADEED IYO KUWA MADANIGA AH EE HAWEENKA oo Ka Kooban 18 xubnood oo awood loo siiyay xalinta ismaan dhaafyada ka dhexeeya Dawladaha ee ku saabsan u hogaansanaanta Axdiga, waxayna helayaan oo ay baadhayaan xogta ay ka helaan dawladaha talaabooyinka ay qaadeen si loo gaadho ujeedooyinka. Axdigan-xigmada ka danbaysa Axdigan waa in takoorida ka dhanka ah haweenka ay lidi ku tahay sharafta bani'aadamka ayna caqabad ku tahay xaqiiqsashada buuxda ee waxtarada haweenka, sidaas darted, xuquuqda haweenka inay si siman ula wadaagaan xaaladaha nolosha la hormariyay waa in la kobciyo lana ilaaliyo.

Axdigan waxaa meel mariyay kulanka loo dhan yahay ee Qarmada Midoobay 18-ka December 1979 (Bayaan 34/180) wuxuuna dhaqan galay 3-da September 1981, Wuxuana u dhigan yahay sidan soo Socoda:-

Dawladaha Ka Qeyb Galay Axdigan,

Iyagoo xusuusan in Axdiga Qaramada Midoobay uu dib u xaqujinayo aa minsanaanta xuquuqaha aasaasiga ah ee bini'aadamka, sharafta, iyo qiimaha qofka iyo xuquuqaha siman ee raga iyo Haweenka;

Iyagoo xusuusan in Baaqa Caalamiga ah ee xuquuqaha Biniaadamka uu xaqiijinayo mabda'a in aan sinaba loo ogolaan karin takoorida uuna bayaaminayo in dhamaan bani'aadamku uu ku dhashay xornimo iyo sharaf iskumid ah iyo xuquuqo siman iyo in qof kasta uu mudan yahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyaadka ku xusan, iyadoo aysan jirin kala soocid nooc kasta oo ay tahay, oo ay ka mid tahay kala soocid ku saleysan jinjiga.

Iyagoo xusuusan in Dawladaha ka qayb galaya Axdiyada caalamiga ah ee xuquuqaha bini'aadamka uu waajibaad ka saaran yahay xaqiijinta xuquuq siman oo raga iyo haweenku

u leeyihiin xuquuqaha dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka, madaniga iyo siyaasada dhamaantoodba.

Iyagoo tixeliay Axdiyada caalamigaha ee lagu galay magaca Qaramada Midoobay iyo hay'adaha gaarka ah ee kor uqaadaya sinaanta xuquuqaha raga iyo haweenka.

Iyagoo xusuusan sidoo kale bayaanada, baaqyada iyo tallo soo jeedinada ay qaadatay qaramada midoobay iyo hay'adaha gaarka ah ee kor uqaadaya sinaanta xuquuqaha raga iyo haweenka.

Iyagoo ka warqaba, si kastaba ha ahaa , in iyadoo ay jiraan heshiisyadaas kala gedisan, hadana ay sii jirto takoorid balaadhan oo ka dhan ah haweenka.

Iyagoo garwaaqsan in Takoorida ka dhanka ah haweenka ay meel ka dhac ku tahay mabaadiida u sinaanta xuquuqaha iyo xushmeynta sharafta bini'aadamka, waxay caqabad ku tahay ka qeyb galka haweenka si la mid ah raga, arimaha siyaasada, bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka ee dalalkooda, waxay curyaamisaa koritaanka badhaadhaha bulshada iyo qoyska,

waxayna adkaysaa horumarka dhimaystiran ee waxtarnimada haweenka ee adeega dalalkooda iyo hawlaha Aadaminimada.

Iyagoo ka warqaba in duruufaha haweenka saboolka ah ay inta ugu yar heli karaan. Cunto, caafimaad, waxbarasho, tababar iyo fursado shaqo iyo weliba baahiyaha kale.

Iyagoo ka warqaba in aasaasida nidaamka cusub ee dhaqaalaha caalamiga ah ee ku saleysan sinaanta iyo cadaalada uu wax muuqda ka tari doono kor uqaadista sinaanshaha raga iyo haweenka.

Iyagoo adkaynaya in cidhibtirka midab kala sooca, dhamaan qaababka jinsi naceybka, takoorida, gumeysiga, gardarada, qabsashada, haysashada dalkale, muquuninta iyo faragelinta arimaha gudaha ee Dawladuhu ay muhiim u tahay in si buuxda loogu naaloodo xuquuqaha raga iyo haweenka, iyo xoojinta nabada iyo degenaashaha caalamka, dabcinta cakirnaanta caalamiga ah, iskaashiga isu dheelitiran ee dawladaha dhexmara iyadoo aan la eegaynin nidaamyadooda bulsheed iyo dhaqaale, hub-ka dhigis guud

oo dhameystiran, gaar ahaan hubka sida ba'an wax dilla (Nuclear) oo si adag oo midho dhal ah loola tacaalo si heer caalami ah, xaqiijinta mabaadiida cadaalada sinaanta iyo kawada faa'iideysiga xidhiidhada ka dhexeeya dalalka, iyo xaqiijinta xuquuqda dadka ku hoos jira muquunin shisheeye iyo gumeysi iyo haysashada dal kale oo dibada kaga yimid inay iyagu aayahooda ka tashadaan oo ay madax-banaani gaadhaan iyo sidoo kale xushmeynta madax-banaanida iyo mid ahaanshaha dhuleed ee wadanka; inay kor uqaadayaan horumarka bulshadeed ayna keenayso inay wax ku soo kordhiso gaadhista sinaanshaha raga iyo haweenka oo dhameystiran.

Iyagoo ka warqaba in horumarka dhimaystiran ee wadan, wanaaga aduunka iyo nabadeyntu ay u baahan yihiin ka qeyb galka ugu sareeya ee haween ka oo si la mid raga uga qeyb qaata dhinac kasta.

Iyagoo Maskaxda ku haya doorka weyn ee haweenka kaga jiraan nolosha qoyska iyo horumarka bulshada, iyadoo aan weli si buuxda loo xaqiiqsanin ahmiyada bulshadeed ee hooyanimada iyo kaalinta labada waalid ay ku leeyihiin

qoyska iyo korinta caruurta iyo ku baraarugsanaanta in doorka haweenka ee taran doonku uusan sal u noqonin takoorida laakiin uu yahay in barbaarinta caruurtu ay u baahan tahay masuuliyad ka dhexeysa raga iyo haweenka iyo guud ahaan bulshada.

Iyagoo ku baraarugsan in bedelida kaalinta la caadeystay ee raga iyo weliba doorka ay haweenka ku leeyihiin bulshada dhexdeeda iyo qoyskaba loo baahan, yahay in lagu gaadho sinaansho buuxa oo raga iyo haweenka ah.

Iyagoo ay ka go'an tahay hirgelinta mabaadiida ku xusan Baaqa cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka iyadoo taas laga duulayana la qaato talaabooyinka looga baahan yahay cidhibtirka takoorida noocan ah dhamaan qaababkeeda iyo ku dhaqankeeda.

Waxay Ku Heshiiyeen Sidan Soo Socota –

QEYBTA – I

Qodobka 1-

Ujeedada Axdigan, jumlada "Takoorida ka dhanka ah haweenka" waxaa loola jeedaa kala soocid, ka reebid ama

xeyn-daab kasta oo ku saleysan jinsiga kaasoo leh saameyn ama ujeedo wax u dhimaysa ama tirtiraysa aqoonsiga, ka faaiideysiga ama isticmaalka haweenka ee xuquuqaha biniiaadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee dhinacyada siyaasada, dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka iyo madaniga, iyadoo aan la eegaynin xaaladahooda guur, inay jirto sinaansha raga iyo haweenka.

Qodobka 2-

Dawladaha ka qeyb galaya waxay canbaarayn usoo jeedinayaan takoorida ka dhanka ah haweenka qaab kasta oo ay tahay, kuna heshiiyeen inay raacaan siyaasad lagu cidhibtirayo takoorida ka dhanka ah haweenka, iyadoo la adeegsanayo aalad kasta oo ku haboon iyo inayna dib u dhac ku imaninba, si arintaas loo fuliyana waxay qaadanayaan:-

B) Inay ku daraan Dastuuradooda iyo sharciyadooda kale ee ku haboon, Mabda'a sinaanshaha raga iyo haweenka, hadii uusan horey ugu jirin iyo inay sharci ahaan iyo qaabka kale ee ku haboon ku dhaqanka dhabta ah ee mabda'an;

E) Inay meel mariyaan talaabooyin sharciyeed oo ku haboon iyo kuwo kaleba, oo ay ku jiraan cunaqabateyno,

mamnuucyo dhamaan takoorida ka dhanka ah haweenka, meelaha ay ku haboon tahay.

J) Inay dejiyaan ilaalin sharci oo xuquuqaha haweenku ula siman yihiin raga iyo in lagu xaqiijiyo maxkamadaha wadanka ee awooda u leh iyo machadayada kale ee dawlada ee ilaalita dhabta ah ee haweenka fal kasta oo takoorid ku ah.

X) Inay ka fogaadaan ku lug yeelashada falal dhaqan kasta oo takoorid ka dhan ah haweenka ayna xaqiijiyaan in hay'adaha iyo machadyada dawladu ay tahay in u dhaqmaan hab waafaqsan waajibaadkan.

KH) Inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon oo ay ka mid yihiin sharci sameyn, wax ka bedelid ama tirtirida sharciyadii horey u jiray, xeerarka, dhaqanada iyo caadooyinka keenaya takoorida ka dhanka ah haweenka.

D) Inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee ay ku cidhibtirayaan takoorida ka dhan ka ah haweenka ee ka yimaada qofka, xafiis, ama wakaalad.

R) Inay nasakhaan dhamaan qodobada xeerka ciqaabta dalka ee keenaya takoorida ka dhanka ah haweenka.

Qodobka 3-

Dawladaha ka qeyb galay waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee dhinac kasta ah, gaar ahaan dhinacyada, siyaasada, bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka, oo, ay ka mid yihiin sharciyo lagu, xaqiijinayo horumarka iyo kor u qaadista haweenka, iyadoo looga gol leeyahay in loo damaanad qaado isticmaalida iyo ku raaxeysiga xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah oo ku saleysan la sinaanshaha raga.

Qodobka 4-

1- Qaadista talabooyinka gaarka ah ee ku meel gaadhka ah ee dawladu uga dan leeyihiin dar-dar gelinta sinaanshaha raga iyo hawenka waa inaan loo qaadan inay yihiin takoorid sida lagu qeexay Axdigan. Laakiin waa inayna sinaba u keenin natiijo ah sinaan la'aan ama darajooyin kala tagsan, talaabooyinkan waa in la joojiyo marka ujeedooyinkii usinaanta fursada iyo la dhaqanka la gaadho.

2- Qaadista talaabooyin ka gaarka ah ee ay dawladuhu ugu dan leeyihiin ilaalinta hooyada, oo ay kujiraan talaabooyinka ku jira Axdigan, waa inaan loo arkin takooritaan.

Qodobka 5-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon :-

B) Inay wax ka bedelaan hab-dhaqanka bulshadeed iyo dhaqan ahaan ee raga iyo haweenka si loo gaadho cidhibtirka waxyeelooyinka, dhaqamada iyo dhamaan caadooyinka kale ee ku saleysan aragtida kala hooseynta ama kala sareynta ee labada jinsi midkood ama kaalimaha ay kala leeyihiin raga iyo haweenku.

E) Inay xaqiijiyaan in waxbarashada qoyska ay ka mid tahay fahamka haboon ee hooyanimadu, shaqo bulshadeed, iyo aqoonsiga masuuliyada ka dhexeysa raga iyo haweenka ee korinta iyo horumarinta caruurtooda, waana in loo fahmo in danta caruurta ay tahay mida tixgelinta ugu horeysa la siinayo xaalado kasta oo lagu jiro.

Qodobka 6-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyin ka ku haboon, oo ay ka, mid yihiin, sharciyo lagu joojin ayo nooc kasta oo safrinta haweenka ah iyo ugu shaqeysiga galmada laga macaasho ee haweenka.

QEYBTA –II

Qodobka 7-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon si loo cidhibtiro takoorida ka dhanka ah haweenka ee nolosha siyaasadeed iyo dawladeed ee dalka, iyo si door ah, waa in loo xaqiijiyo haweenka inay raga ula siman yihiin, xuquuqda :-

B) Inay cod ka dhiibtaan dhamaan doorashooyinka aftida dadweynaha iyo in loo dooran karo dhamaan hay'adaha doorasho furan loo galo.

E) Inay ka qeyb qaataan dejinta siyaasada dawlada iyo fulinteeda iyo inay qabtaan xilka xafiis dawladeed ayna fuliyaan dhamaan hawlaha dawlada ee heerarka dawlada.

J) Inay ka qeyb qaataan ururada aan dawliga ahayn hay'adaha ku shaqada leh nolosha siyaasadeed iyo mida dawladeed ee Dalka.

Qodobka 8-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhanaan talaabooyinka ku haboon inay u xaqiijiyaan haweenka iyagoo

la siman raga oo aan waxba lagu takooraynin, helida fursad ay dawladahooda ugu matalaan heer caalami ah ayna ka qeyb galaan shaqada ururada caalamiga ah.

Qodobka 9-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay siiyaan haweenka xuquuqo la siman kuwa raga oo ay qaataan, bedelaan ama ay haystaan dhalashadooda. Gaar ahaan waa inay xaqiijiyaan in guursashada nin shisheeye ah ama dhalasho bedalid ninka intaay is qabaan aysan bedelin dhalashada, ka dhigin dal la'aan ama aysan ku qasbin dhalashada ninka.
2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u siiyaan haweenka xuquuqo la siman raga marka ay timaado dhalshada caruurtooda.

QEYBTA –III

Qodobka 10-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon in la cidhibtiro takoorida ka dhanka ah haweenka si loogu xaqiijiyo iyaga xuquuqo la siman raga

dhinaca waxbarashada iyo gaar ahaan in la xaqiijiyo, iyadoo laga duulayo sinaanta raga iyo haweenka :-

B) Xaalado isku mid ah oo shaqo iyo farsamo, daraasado, iyo baadhitaanka shahaadada. Dibloomka ee kuliyadaha waxbarasho ee dhamaan heerarkeeda miyiga iyo weliba magaa looyinka ka jira. Sinaantan waa in la xaqiijiyo xilliga waxbarasho ee dugsiga ka hor, mida guud, farsamada, xirfada iyo tan farsamada sare iyo weliba tababarka farsamada la xidhiidha.

E) Helitaanka manhaj isku mid ah, lmtixaano isku mid ah, shaqaalaha barista oo leh takhasusyo isku derajo ah, iyo dhismayaasha dugsiga iyo qalab isku tayo ah;

J) cidhibtirka aragtida soo jireenka ah ee doorka raga iyo haweenka dhamaan heerarka iyo noocyada waxbarashada iyadoo la dhiiri gelinayo wax isla barashada iyo noocyada kale ee waxbarasha ee gacan ka geysanaysa in ujeedadan la gaadho iyo gaar ahaan dib u eegista buugaagta wax laga barto iyo barnaa

mij yada dug siga iyo iswaafajinta qaababka barista.

X) Helitaanka fursado isku mid ah ee ka faa'iideysiga waxbarashada dibada iyo deeqaha waxbarasho.

KH) Helitaanka fursado isku mid ah oo ku aadan, barnaamijyada waxbarashada joogtada ah oo ay ka mid yihiin barnaamijyada waxbarashada dadka waaweyn iyo kuwa shaqaada la garab wado, gaar ahaan kuwa ku wajahan hoos u dhigida farqiga waxbarashada oo ka dhex jira raga iyo haweenka.

D) Hoos udhigida heerka ardayda dhedig ee waxbarashada ka hadhaya iyo sameynta barnaamijyo loogu talagalay gabdhaha iyo haweenka dugsiga meel dhexe kaga tago.

R) Helitaanka fursado isku mid ah oo ay si firfircoon uga qeyb galan ciyaaraha iyo waxbarashada jidheed.

S) Helitaanka xogta waxbarashada gaarka ah ee ka caawinaysa xaqiijinta caafimaadka iyo

wanaaga qoysaska oo ay ka mid tahay xogta iyo tallada qorsheynta qoyska.

Qodobka 11-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka ee dhinaca shaqaaleyanta si loo xaqiijiyo iyadoo laga duulayo sinaanta raga iyo haweenka, xuquuqo isku mid ah, gaar ahaan:-

B) Xuquuqda shaqadu inay tahay mid aan laga taaban karin dhamaan bini'aadamka.

E) Xuquuqda fursado shaqaaleyn oo isku mid ah, oo ay ka mid yihiin, shuruudo isku mid ah oo xulasho arrimaha shaqaaleynta ah.

J) Xuquuqda doorashada xorta ah ee xirfada iyo shaqaaleynta, xaqa dalacaada, sugnaanta shaqada, iyo dhamaan faa'iidooyinka iyo shuruudaha addeega, iyo xaqa tababar farsamo iyo dib n tababarida, oo ay ku jiraah, u carbinta shaqada, tababar farsamo oo casri ah iyo tababar joogto ah.

X) Xuquuqda ujuuro isku mid ah, oo ay ku jiraan faa'iidooyin iyo in sisiman loola dhaqmo xaalada shaqada qiimaha siman leh iyo weliba sinaanta xilliga qiimeynta tayada shaqada.

KH) Xuquuqda damaanad qaadka bulshada, gaar ahaan xaaladaha hawl-gabka, shaqo la'aanta, bukaanka, gabowga iyo awood la'aanta kale ee shaqada iyo weliba xaqa fasaxa ajuurada leh.

D) Xuquuqda 'maalinta caafimaadka iyo badbaadada duruufaha shaqada, oo ay ka mid yihiin badbaadinta hawsha wax soo rida danbe ee mustaqbalka.

2- Si looga hortaga takoorida ka dhanka ah haweenka ee la xidhiidha guurka ama hooyadimada iyo si loo xaqiijiyo xuquuqdooda taabagalka ah ee shaqada. Dawladaha ka qeyb galaya, waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon:-

B) Mamnuucida shaqo ka qaadista sababo fasaxa uurka ama dhalmada la xidhiidha iyo takoorka shaqo ka qoodista ku saleysan xaalada guurka, iyadoo ciqaabo logu mudanayo haday dhacdo.

T) Siinta fasaxa dhalmada oo a juuro leh ama faa'iidooyin bulsho oo u dhigma iyadoo aan laga qaadi karina shaqadii hore, isyaanada ama gunooyinka.

J) Dhiiri gehinta shuruuda adeegyada bulshada caawin ee lagama maarmaanka ah si ay waalidkaa awood ugu yeeshaan iswaafajinta waajibaadyada qoyska iyo masuuliyadaha shaqada iyo ka qeyb qaadashada nolosha dadweynaha, gaar ahaah, kor uqaadista xarumaha iyo horumarinta goobaha daryeelka caruurta.

X) U fidinta ilaalin gaar ah haweenka xilliga uurka ay leeyihiin laga ilaalinayo noocyada shaqada ee la cadeeyay inay dhibaato ku keenayaan.

3- Ilaalin sharciyeed oo la xidhiidha xaaladaha ku xusan qodobkan waa in dib u eegis xilli leh lagu sameeyo, iyadoo lala eegayo aqoonta cilmiga iyo tiknoo lajiyada waana in dib loo habeeyo, la nasakho ama la balaadhiyo hadba sida lagama maarmaan loo arko.

Qodobka 12-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon cidhibtirka

takoorka ka dhanka ah haweenka ee dhinaca daryeelka caafimaadka si loo xaqiijiyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka oo ay ku jiraan kuwa la xidhiidha qorsheynta qoyska oo ku saleysan sinaanta raga iyo haweenka.

2- Iyadoo aan waxba laga soo qaadaynin shuruuda faraqa(1) ee Qodobkan. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u xaqiijiyaan haweenka adeegyada ku haboon marka ay uurka leeyihiin mudada ka horeysa dhalmada adeeg lacag la'aan ah iyo weliba nafaqeyn ku filan inta ay uurka leeyihiin.

Qodobka 13-

Dawladaha ka qayb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka ee dhinacyada kale nolosha dhaqaale iyo bulshadeed si loo xaqiijiyo xuquuqaha isku midka ah ee sinaanta raga iyo haweenka, gaar ahaan:-

B) Xuquuqda faa'iidooyinka qoyska;

T) Xuquuqda Deymaha Bangiga, Amaahda hantida, iyo noocyada kale ee deynta maaliyadeed.

J) Xuquuqda ka qeyb qaadashada hawlaha tamashleynta, ciyaaraha iyo dhamaan arimaha nolol-dhaqameedka.

Qodobka 14-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ku xisaabtamaan dhibaatooyinka gaarka ah ee soo wajaha haweenka miyiga iyo doorarka muhiimka ah ee haweenka miyigu ka qaataan dhaqaalaha qoysaskooda, oo ay ku jiraan shaqooyinkooda aan lacag ahaan lagu qiimeynin ee dhaqaalaha wax ka taraya waana inay qaadaan dhaamaan talaabooyinka ku haboon xaqiijinta ku dabakhida shuruudaha Axdigan haweenka ku sugan goobaha miyiga ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qoadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka ku sugan goobaha miyiga ah si loo xaqiijiyo inay ka qeyb qaataan kana faa'iideystaan horumarinta miyiga iyo gaar ahaan inay u xaqiijiyaan haweenka si la siman raga xuquuqda :-

   B) Ka qeyb galka dar-dar gelinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta ee dhamaan heerarka kala duwan.

   E) Helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka oo ku filan, oo ay ka mid yihiin xogta, la talinta iyo adeegyada qorsheynta qoyska.

J) Inay si toos ah uga faa'iideystaan barnaamijyada damaanad qaadka bulshada.

X) Inay helaan dhamaan noocyada tababarka iyo waxbarashada tooska ah iyo mida aan toos ka ahayn, oo ay ku jiraan kuwa faa'iido u leh dhamaan bulshada iyo adeegyada fidinta si loo kordiyo kartidooda farsamo.

KH) Inay isu abaabulaan kooxo is taageersanaya iyo iskaashatooyin si ay u helaan fursado dhaqaale oo siman ee shaqaaleyn ama inay iskood u shaqeystaan.

D) Inay ka qeyb qaataan dhamaan shaqooyinka bulshada

R) Inay helaan amaahda iyo deymaha beeraha, adeegyada suuq-geynta, tiknoolojiyada ku haboon iyo la dhaqanka siman ragga ee dhulka iyo dibu-habeynta iyo weliba qorsheyaasha dib u dejinta dhulka

S) Inay ku raaxeystaan xaalado ku habbon oo nololeed, gaar ahaan hoyga, nadaafada, korontada iyo biyaha gaadiidka iyo isgaadhsiinta.

QEYBTA IV

Qodobka 15-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u sugaan haweenka sinaanta raga ee sharciga hortiisa.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u sugaan haweenka arimaha madaniga ah, awood sharciyeed la mid ah mida raga iyo fursado la mid ah isticmaalka awoodaas. Gaar ahaan, waa inay siiyaan haweenka xuquuqo la siman oo ay ku galaan heshiisyada ayna ku maamulaan hantida isla markaana sinaan ay helaan dhamaan heerarka habka maxkamadaha hortooda;

3- Dawladaha ka qeyb galaya waxay ku heshiiyeen in dhamaan heshiisyada iyo aaladaha madaniga ah ee saameyn sharci leh kuwaasoo xadidaya awooda sharciyeed ee haweenka, waa in loo arko in asyan waxba ka jirin oo aan sharci ahayn.

4- Dawladaha ka qeyb galay waa inay u sugaan raga iyo haweenka xuquuqo isku mid ah oo la xidhiidha dhaq-dhaqaaqa dadka iyo xoryada ay ku doorahayaan goobaha ay degenaanshahooda ka dhiganayaan.

Qodobka 16-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka ee dhamaan arimaha la xidhiidha guurka iyo xidhiidhida qoyska, gaar ahaana ay xaqiijiyaan, iyadoo lagu saleynayo sinaanta raga iyo haweemka:-

B) Xaq la mid ah oo ay ku guursadaan

E) Xaq la siman oo ay six ah u doortaan qofka ay guurka la galayaan kuna guursadaan rabitaankooda oo ay u madax bahaan yihiin.

J) Xuquuqo iyo Masuuliyado la mid ah inta uu xidhiidhka guurku jiro iyo kala tegitaan kaba.

X) Xuquuqo iyo masuuliyado siman oo waalidnimo ee arimaha la xidhiidha caruurtooda iyadoo aan la eegaynin xaalada guurka. Dhamaan xaaladaha, danaha caruurta waa in mudnaanta ugu horeysa la siiyaa.

KH) Xuquuqo siman oo ay kaga go'aan gaadhayaan tirada iyo inta ay kala weynaanayaan caruurtoo du ayna helaan xogta, waxbarashada iyo aaladaha u sahlaya adeegsiga xuquuqahan.

D) Xuquuqo iyo masuuliyado la mid ah ee ku aadan ilaaliyenimada, haynta iyo korsashada caruurta

ama xarumo isku mid ah marka sharciga dalku fasaxayo arintan; dhamaan xaaladaha waa in danaha caruurta mudnaanta ugu horeysa siiyaa.

R) Xuquuq shaqsiyeed oo isku mid ah oo nin iyo marwo ahaan, oo ay ka mid tahay xaqa doorashada magaca qoyska, xirfada iyo shaqada.

S) Xuquuqo isku mid ah oo labada lamaane ay u leeyihiin yeelashada, kasbashada, maareynta, maamulka ku tagrifalka iyo bixinta hantida, lacag iyo lacag la'aanba.

2- Doonanaanshaha iyo guurka caruurtu waa inayna yeelanin saameyn sharci iyo dhamaan talaabada lagama maarmaanka ah, oo ay ku jirto mid sharciyeed, waa in la qaado xusida da'da ugu hooseysa ee guurka lana diiwaan geliyo guurka iyadoo qasab laga dhigayo diiwaan – gelinta.

QEYBTA V

Qodobka 17-

1- Si loo ogaado horumarka laga sameeyay hirgelinta Axdigan waa in la aasaaso Guddiga cidhibtirka takoorida ka dhanka ah haweenka(Oo hada kadib loogu yeedhi doono, Guddiga)oo ka kooban, xilliga dhaqan galka Axdigan sideed iyo toban iyo kadib

markay ansixiyaan ama ay qaataan shan iyo sodon dawladood, saddex iyo labaatan khabiir oo damiir fiican iyo karti aqooneed u leh arimaha lagu xusay Axdigan. Khabirada waa inay soo xulaan dawlada ka qeyb galaya waana inay ku shaqeeyaan awoodooda shaqsi ahaaneed, waa in tixgelin la siiyo in si cadaalad ah loogu qeybiyo deegaanada iyo wakiilada noocyada ilbaxnimada iyo weliba nidaamyada sharciyeed ee dalka.

2- Xubnaha Guddiga waa in lagu doorto cod qarsoodi ah iyadoo laga duulayo liiska shaqsiyaadka ay dawladuhu soo xuleen Dawlad kasta waxay soo xulanaysaa hal qof oo muwaadiniinteeda ka mid ah.

3- Doorashada ugu horeysa waa in laqabto mudo lix bilood gudahood ah taariikhda dhaqan galka Axdigan. Ugu yaraan saddex bilood ka hor taarikhda doorasho kasta, waa in xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu warqad u diro Dawladaha ka qeyb galaya kana dalbo inay soo gudbiyaan xulashadooda mudo labba bilood gudahooda, xoghayaha guud waa inuu diyaariyo liska shaqsiyaadka lasoo xulay oo xaraf ahaan u kala horeeya, muujinayana dalalka soo xulay, waana inuu u gudbuyo Dawladaha ka qeyb galaya.

4- Doorashada xubnaha Guddiga waxaa lagu qabanayaa Xarunta Qaramada Midoobay, iyadoo uu u furayo xoghayaha Guud kulan ay yeeshaan Dawladaha ka qeyb galaya. Kulankaas oo saddex meelood labbo meelood ku qabsoomaya, Shaqsiyaadka loo doorto Guddiga waxay noqonayaan kuwa hela tirada ugu badan codadka iyo aqlabiyada coddka wakiilada dawladaha kasoo qeyb galay ee codka dhiibtay.

5- Xubnaha Guddiga waa in loo doorto muddo afar sanadood ah-Hase yeeshee, Mudada sagaal Xubhood oo logu doortay doorashada ugu horeysa waxay ku dhamaanaysaa labba sano. Shir-gudoonka Guddiga waa inuu waxyar ka dib doorashada ugu horeysa uu doorto magacyada sagaalkan xubnood.

6- Doorashada shanta xubnood ee dheeriga ah waa in loo qabto hab waafaqsan shuruudaha farqadaha (2,3,iyo 4) ee Qodobkan, taasoo daba socota ansixinta ama qaadashada shan iyo sodonaad. Mudada labo xubnood oo lagu doortay qaabkan waxay ku dhamaanaysaa labaa sanadood, magacyada labadan xubnood waxaa dooranaya shir-gadoonka Guddiga.

7- Buuxinta banaynta xubinimo. Dawlada uu khabiirkeedu meesha ka baxay, waa inay soo maga

cowdo khabiir kale iyadoo loo baahanayo ansixinta Guddiga.

8- Xubnaha Guddigu waa inay helaan ajuuro laga bixinayo kheyraadka Qaramada Midoobay, iyadoo qaababka iyo shuruudaha lagu go'aaminayo kulanka loo dhanyahay tixgelina la siinayo ahmiyada masuuliyadaha Guddiga.

9- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu siiyo Guddiga Shaqaalaha iyo agabka lagama maarmaahka u ah inay si haboon ugutaan shaqooyinka Guddiga ee ku xusan Axdigan.

Qodobka 18-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay u soo gudbinayaan xoghayaha Guud, si uu u gaadhsiiyo Guddiga, warbixin ku saabsan talaabooyinka sharciyeed, garsoor, maamul ama mid kaleba ee ay qaadeen si ay dhaqan gal uga dhigaan shuruudaha Axdigan iyo horumarka laga sameeyay arimahaan:-

B) Hal sanno gudihii, ka dib dhaqan gelinta wadanka.

E) Markaa ka dib, ugu yaraan afar sanno oo kasta iyo markastaa oo uu Guddigu ka dalbado.

2- Warbixinada waa in lagu xuso fursadaha iyo caqabadaha saameynta ku yeeshay heerka fulinta waajibaadyada ku xusan Axdigan.

Qodobka 19-

1- Guddigu waa inuu sameysto Xeerarkiisa habka shaqo.
2- Guddigu waa inuu doorto saraakiishiisa mudo labo sano ah.

Qodobka 20-

1- Guddigu waa inuu caadi ahaan shiro muddo aan ka badnayn labbo todobaad sanadkiiba si au u falanqeeyaan warbixinada loogu soo gudbiyay hab waafaqsan Qodobka 18 ee Axdigan.
2- Shirarka Guddiga waa in caadi ahaan lagu qabto xarumaha Qaramada Midoobay ama goobta kale ee ku haboon sida uu go'aamiyo Guddigu.

Qodobka 21-

1- Guddigu waa inuu isagoo sii marinaya Golaha arimaha Bulshada iyo Dhaqaalaha, u gudbiyo warbixin sanadle ah kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan shaqooyin kooda iyo soo jeedino iyo talooyin guud oo ku saleysan baadhitaanka warbixinada iyo xogta laga helay Dawladaha ka qeyb galaya. Soo jeedintan iyo talooyinkan guud waa in lagu daro warbixinta Guddiga oo ay weheliso fikirada Dawladaha, hadii ay jiraan.

2- Xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay waa inuu gaadhsiiyo warbixinaha guddiga si uu ugu wargeliyo komishinka xaaladaha Haweenka.

Qodobka 22-

Wakaaladaha ku shaqada leh waxay xaq u leeyihiin inay wakiil ku yeeshaan hawsha lagu hirgelinayo shuruudaha ku xusan Axdigan inta ka khuseysa shaqadooda. Gudigu wuu ka dalban karaa wakaa'alaha ku shaqada leh inay soo gudbiyaan warbixinada ku saabsan hirgelinta Axdiga ilaa inta ay shaqadooda kala xidhiidho.

QEYBTA VI

Qodobka 23-

Axdigani waa inuusan wax udhimin shuruudaha aadka ugu haboon ka midho dhalinta sinaanta raga iyo haweenka ee laga heli karo:-

B) Sharciga Dawlad qeybka ah Axdigan, ama,

E) Axdi kasta oo caalami ah, ama heshiis dhaqan gal ka ah Dawladahaas.

Qodobka 24-

Dawladaha ka qeyb galaya waxay qaadayaan fulinta dhamaan talaabooy inka laga ma maarmaanka ah ee heer

wadan looguna talagalay in si buuxda loo xaqiijiyo xuquuqaha lagu aqoonsaday Axdigan dhexdiisa.

Qodobka 25-

1- Axdigan waa in loo furo inay saxiixaan dhamaan Dawladuhu.
2- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxuu ahaanayaa halka la dhigayo Axdigan.
3- Axdigan waxaa loo baahan, yahay in la ansixiyo- Qoraalada ansixinta waa in la dhigo xoghayaha Guud ee Qaramada midoobay xafiiskiisa.
4- Axdigan waa in loo furo qaadashada dhanaan Dawladaha Qaada shadu waa inay noqoto iyadoo la dhigayo qoraalka qaadashada xafiiska xoghayaha guud.

Qodobka 26-

1- Codsiga ku saabsan sixitaanka Axdigan waxaa sameyn kara Dawlad kasta xilligii la doono iyadoo qoraal lagu ogeysiinayo xoghayaha Guud.
2- Kullanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay waa inuu go'aan ka gaadho tala booyinka ay tahay in la qaado ee lagaga jawaabayo codsigan hadii ay hiraan.

Qodobka 27-

1- Axdigani wuxuu dhaqan galayaa maalinta sodonaad kadib taariikhda la dhigay xafiiska xoghayaha Guud qoraalka labaatanaad ee ansixinta ama qaadashada.

2- Dawlad kasta oo ansixinaysa ama qaadanaysa Axdigan wixii ka danbeeya dhigitaanka qoraalka labaatanaad ee ansixinta ama qaadashada, Axdigu wuxuu ka dhaqan galayaa maalinta sodonaad ka dib tartikhda ay dhigto qoralkeeda ansixinta ama qaadashada.

Qodobka 28-

1- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu gudoomo una qeybiyo dhamaan Dawladaha qoralka afeefta dib u dhigashada ee ay sameeyaan Dawladuhu markay ansixinayaan ama qaadanayaan

2- Afeefta dibu dhigasho ee aan la jaan qaadi Karin nuxurka iyo ujeedada Axdigan waa inaan la ogolaanin.

3- Afeefta dib u dhigashada waa laga noqon karaa wakhti kasta iyadoo sidaas lagu wargelinayo xoghayaha Guud oo isaguna ku wargelinaya arintaaas dhamaan Dawladaha wargelinta noocan ah waxay dhaqan gal noqonaysaa taariikhda la gudoomay.

Qodobka 29-

1- Muran kasta oo dhexmara laba ama wax ka badan ee Dawladaha ka qeyb galaya, kaasoo ku saabsan turjumida Axdigan kuna xalisan kariwaaya wada xaajood, waa in loo gudbiyo dhex-dhexaadiye, marka uu codsado wadan iyago ka mid ah. Hadii lixbilood gudahood oo kabilaa banaysa taariikhda codsiga dhex-dhexaadinta ay Dawladuhu heshiis ka gaadhi waayaan ururka dhex- dhexaadinta, mid ka mid ah dawladahaas ayaa muranka u gudbin kara Maxkamadda caalamiga ah, isagoo adeegsanaya codsi waafaqsan xeerka maxka mada.

2- Dawlad kasta marka ay saxiixayso, ama ansixinayso ama ay, qaadanayso Axdigan, Waxay ku dhawaaqi kartaa inayna u hogaansanayn farqada (1) ee Qodobkan. Dawladaha kale waa inayna u hogaansamin iyaguna farqadaas marka ay timaado Dawlada kasta ee samaysa afeeftan oo kale.

3- Dawlad kasta oo sameysa afeefta waafaqsan farqada (2) ee Qodobkan, waa ay ka noqon kartaa afeeftaas wakhti kasta iyadoo ku wargelinaysa xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 30-

Axdigan qoraalka Carabiga, Shiinaha,ingiriska, Faransiiska, Ruushka iyo isbaanishka, oo rasmi ahaan siman, waa in la dhigo xafiiska Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Saxiixyada hoosta ku cad ayaa ka maray kacaya in cid loo awood siiyay ay saxiixday Axdigan.

AXDIGA QARAMADA MIDOOBAY EE XUQUUQAHA DADKA NAAFADA AH

Gogol – dhig

Dawladaha Ka Qeyb Galaya Axdigan,

(B) Iyagoo Xusuusanaya Mabaadiida lagu bayaamiyay Axdiga Qaramada Midoobay kaasoo aqoonsan karaamada ku lamaan iyo qiimaha iyo xuquuqaha lama taabtaanka ah ee ay u siman yihiin dhamaan xubnaha qoyska bini'aadamka inay yihiin aasaaska xoriyada, Cadaalada iyo Nabad geliyada Adduuuka.

(T) Iyagoo aqoonsan in Qaramada Midoobay ay Baaqa Caalamiga ah ee xuquuqaha Biniaadamka iyo Axdiyada Caalamiga ah Xuquuqaha Biniaadamka ku bayaamisay heshiiskan ku gaadhay inuu qof kasta xaq u leeyahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyaadka halkaas lagu xusay iyadoo aysan jirin wax kala soo cid ah nooc kasta oo ay tahay.

(J) Iyagoo dib u xaqiijinaya caalaminimada, kala qeybsan la'aanta, isku-tiirsanaanta iyo isku xidhnaanshaha dhamaan xuquuqaha bini'iaadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah iyo baahida ay u qabaan dadka naafada ah in loo damaanad qaado inay si buuxda oo aan midab

takoor lahayn ugu naaloodaan xuquuqahaas iyo xoriyaadkaas.

(X) Iyagoo Xusuusan Axdiga Caalamiga ah ee xuquuqaha dhaqaalaha bulshada iyo dhaqanka, Axdiga Caalamiga ah ee xuquuqaha Madaniga ah iyo kuwa siyaasadeed, Axdiga Calamiga ah ee cidhib-tirka dhamaan qaababka Midabtakoorka. Axdiga cidhib-tirka dhamaan qaababka Takoorida ka dhanka ah Haweenka. Axdiga mamnuucaya Jidh-dilka iyo Dhaqamada ama Ciqaabta kale ee cadowtinimada, si xun ula dhaqanka ama quudhsiga. Axdiga xuquuqaha caruurta iyo Axdiga Caalamiga ah ee ilaalinta Xuquuqaha dhamaan shaqaalaha muhaajiriinta ah iyo Xubnaha Qoysaskooda.

(KH) Iyagoo aqoonsan inay Naafanimadu tahay fikrad soo if baxday iyo inay naafanimadu ka dhalato is dhexgalka dadka laxaadka la' iyo caqabadaha aragtiyeed iyo deegaameed ee ka hor joogsada inay si buuxda oo wax ku ool ah ugu la qeyb qaataan bulshada iyagoo la siman dadka kale.

(D) Iyagoo aqoonsan muhiimada mabaadiida iyo hab-raacyada siyaasada ku xusan Barnaamijka Adduunka ee talaabada khuseysa dadka naafada ah iyo darajada

xeerarka ula sinaanshaha fursadaha ee dadka naafada ah ay saameyn ugu yeelanayaan kor u qaadista, qaabeynta iyo qiimeynta siyaasadaha, qorsheyaasha, barnaamijyada iyo talaabooyinka heer wadan, goboleed iyo caalami si loo kordhiyo ula Simida fursadaha ee dadka naafada ah.

(R) Iyagoo falanqeynaya muhiimada ay leedahay in arrimaha naafadu ay laf-dhabar u noqdaan oo lagu daro istaraatiijiyadaha ku wajahan Horumar waara sidii loo gaadhi lahaa.

(S) Iyagoo Sidoo kale aqoonsan in takoorida ka dhanka ah qof kasta oo naafo ah ay xad-gudub ku tahay karaamada ku lamaan iyo qiimaha qofka bini'aadamka ah.

(SH) Iyagoo aqoonsan kala duwanaanshaha dadka naafada ah.

(DH) Iyagoo aqoonsan baahida loo qabo in la kobciyo lana ilaaliyo xuquuqaha bini'aadamka ee dhamaan dadka naafada ah oo ay ka mid yihiin kuwa u baahan taakuleynta deg-dega ah oo dheeri ah.

(C) Iyagoo tixgelinaya in inkastoo ay jiraan aalado tiro badan iyo balan-qaadyo kala duwan, hadana dadka naafada ah ay weli la kulmaan caqabado sidii ay ugala qeyb qaadan

lahaayeen bulshada iyagoo ah xubno la siman iyo xad-qudubyo ka dhan ah xuquuqahooda bini'aadanimo oo ka jira dhamaan daafaha Adduunka.

(G) Iyagoo aqoonsan ahmiyada iskaashiga caalamiga ah ee horumarinta xaaladaha nololeed ee dadka naafada ah ee wadan kasta, gaar ahaan wadamada soo koraya.

(F) Iyagoo aqoonsan jiritaanka qiimaha leh iyo kaalimaha wax ku oolka ah ee ay dadka naafada ahi ka qaataan guud ahaan horumarka iyo kala duwanaanshaha bulshooyinkooda iyo inay kor u qaadista si buuxda u adeegsiga dadka naafada ahi xuquuqahooda bini aadanimo iyo xoriyaadkooda aasaasiga ah iyo si buuxda uga qeyb galka dadka naafada ah inay keenayso sare u qaadista dareenkooda lahaansho iyo horusocidyada waxtarka u leh horumarinta dhaqan dhaqaale, iyo bini'aadanimo ee bulshada iyo dabargoynta saboolnimada.

(Q) Iyagoo aqoonsan muhiimada ay dadka naafada ah u leedahay madax-banaanidooda shaqsiyeed iyo isku filaanshaha oo ay ka mid yihiin xoriyada ay ku doorayaan masirkooda.

(K) Iyagoo tixgalinaya in dadka naafada ah ay tahay inay helaan fursad ay si fir-fircooni leh ugu lug yeeshaan geedi-socodyada lagaga go'aan gaadhayo siyaasadaha iyo barnamijyada ay Ka mid yihiin kuwa sida tooska ah iyaga u saameynaya.

(L) Iyagoo tixgelinaya xaaladaha qalafsan ee ay la kulmaan dadka naafada ah ee lagula kaco qaabab/noocyo tiro badan ama culus oo takoorid ah kuwaasoo ku saleysan Jinsiga, midabka, qolada, luuqada, diinta, siyaasada ama aragti kale, dhalashada, qowmiyada ama bulshada uu kasoo jeedo, hantida, da'da ama xaalado kale.

(M) Iyagoo aqoonsan in haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay inta badan la kulmaan khatarta ugu badan ee gudaha iyo dibadaba hoyga ay rabshadu ku jirto, dhaawaca ama meel ka dhaca, xaqiraada ama la dhaqanka lagu xaqirayo, si xun ula dhaqanka ama ku shaqeysiga.

(N) Iyagoo aqoonsan in caruurta naafada ah ay waajib tahay inay si buuxda ugu raaxeystaan dhamaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah iyagoo la siman caruurta kale, iyo iyagoo xusuusan waajibaadyada ka saaran dawladaha ka qeyb galaya Axdiga Xuquuqaha Caruurta.

(W) Iyagoo falanqeynaya baahida loo qabo in dhinaca jinsiga laga eego dhamaan dadaalada kor loogu qaadayo inay dadka naafada ahi si buuxda ugu raaxeystaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.

(H) Iyagoo faah-faahinaya xaqiiqda ah inay tiro badan oo dadka naafada ah ku nool yihiin xaalado saboolnimo, iyo iyadoo laga duulayo arintan, aaminsan baahida adag ee loo qabo in la furdaamiyo saameynta qalafsan ee saboolnimadu ku leedahay dadka naafada ah.

(Y) Iyagoo maskaxda ku haya in xaaladaha nabada iyo amaanka oo ku saleysan xushmeynta buuxda ee ujeedooyinka iyo mabaadiida ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay iyo u hogaansanaanta heshiisyada xuquuqda bini'aadamka inaan sinaba looga sooci karin ilaalinta buuxda ee dadka naafada ah, gaar ahaan xilliga ay socdaan iska hor imaadyada hubeysan iyo qabsashada/haysashada xoogaga shisheeye.

(A) Iyagoo aqoonsan muhiimada helitaanka jawiga jidheed, bulsheed, dhaqaale iyo dhaqameed ee caafimaadka iyo waxbarashada iyo xogta iyo isgaadhsiinta u awood siinaya dadka naafada ah inay si dhameystiran ugu

naaloodaan dhamaan xuquuqaha bini ’aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.

(E) Iyagoo xaqiiqsanaya inay shaqsiga waajibaadyo ka saaran yihiin shaqsiyaadyada kale iyo bulshada uu ku abtirsado, hadana ay masuuliyad ka saaran tahay ku dadaalida sidii kor loogu qaadi lahaa looguna hogaansamayo xuquuqaha lagu aqoonsaday Axdiyada caalamiga ah ee xuquuqaha Aadamaha.

(I) Iyago ku qanacsan in qoysku uu yahay unuga koox dabiici ah oo aasaasi ah ee bulshada uuna mudan yahay inay ilaaliyaan bulshada iyo dawladuba, iyo inay dadka naafada ah iyo xubnaha qoysaskoodu ay tahay inay helaan ilaalinta lagama maarmaanka ah iyo taakuleynta haboon si ay qoysasku awood ugu yeeshaan fulinta doorka ay ku leeyihiin adeegsiga buuxa ee ay si siman dadka naafada ah ugu naaloonayaan xuquuqaha ay leeyihiin.

(O) Iyagoo ku qanacsan in Axdi faahfaahsan oo caalami ah kobcinayo isla markaana lagu ilaalinayo xuquuqaha iyo karaamada dadka naafada ah, uu wax weyn ka tari doono kasoo kabashada khasaarooyinka bulshada la xidhiidha ee ay la kulman dadka naafada ah, iyadoo kor

loo qaadayo ka qeyb galkooda arimaha madaniga, siyaasada, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka oo fursadaha loo siman yahay.

WAXAY KU HESHIIYEEN SIDAN SOO SOCOTA : -

Qodobka 1:- Ujeedada

Ujeedada Axdigan waa kor u qaadista, ilaalinta iyo xaqiijinta inay dadka naafada ah si dhameystiran oo la siman kuwa kale ay ugu naaloodaan dhamaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah iyo in la kobciyo xushmeynta karaamadooda.

Dadka naafada ah waxaa ka mid ah kuwa jidh ahaan, maskax ahaan, caqli ahaan ama dareemayaasha kala dhiman yihiin kuna sugan xaaladaas wakhti dheer kuwaasoo ay dhibaato ka haysato inay si buuxda oo wax ka ool ah uga qeyb qaataan una dhexgalaan bulshada iyagoo la siman kuwa kale.

Qodobka 2:- Qeexitaano

Ujeedooyinka Axdigan :-

"Isgaadhsiin" Waxaa loo la jeedaa cadeymaha la taaban karo iyo tiknoolajiyadaha isgaadhsiineed ee maqalka iyo

muuqaalka waxyaabaha lagu helo, daabacadaha haboon, kuwa la duubay iyagoo luuqadahoodu ay cad yiciin lana fahmi karo si bini'aadanimo ah taasoo marwalba isbedel xawli ah ku socda hababkaas oo ay kawada muuqdaan dhamaan xirfadaha iyo qaababka isgaadhiineed

"Luuqad" Waxaa loola jeedaa luuqadaha lagu hadlo iyo calaamadaha(midaarka)iyo qaababka kale luuqadaha hadalka ka baxsan.

"Takoorida Ku Saleysan Naafanimada"Waxaa loola jeedaa farqi kasta, ku reebida ama xanibaado ku saleysan naafanimada taasoo leh ujeedo ama saameyn kala dhantaaalaysa ama burinaysa aqoonsiga, ku naaloonta ama isticmaalka si la siman kuwa kale ee dhamaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee dhinacyada siyaasada, dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka madaniga ama kuwa kale. Waxaa ka mid ah nooc kasta oo takoorid ah oo ay ku jirto u diidista fududeynta macquulka ah.

"Fududeynta Macquulka ah" Waxaa loola jeedaa wax ka bedelida iyo habaynta lagama maarmaanka ah ee ku haboon, taasoo aan keensanaynin culeys aan lagu talagelin ama aan u dhigmin, marka loo baahdo xaalada gaarka ah si loogu xaqiijiyo dadka naafada ah ku raaxeysiga ama isticmaalida la

siman mida dadka kale ee ku aadan dhamaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.

" Naqshad laga wada siman yahay" Waxaa loola jeedaa naqshada alaabada, jawiga/deegaanka, barnaamijyada iyo adeegyada ay tahay inay isticmaali karayaan dhamaen dadku ilaa iyo halka ugu weyn ee suurta galka ah iyadoo aysan jirin baahi loo qabo in lala qabsado ama naqshad takhasus u baahan. Naqshada laga wada siman yahay waa inaysan meesha ka saarin aaladaha taakuleynta ee loogu tala galay koox dad ah oo gaar ah kuwaas oo ah kuwa naafada ah marka arintan loo baahdo.

Qodobka 3:- Mabaadiida Guud

Mabaadiida Axdigani Waxay noqonayaan:-

(B) Xushmeynta karaamada, madax banaanida shaqsiga oo ay ka mid tahay xoriyada uu qofku masiirkiisa ku go'aansanayo iyo xor ahaanshaha dadka.

(T) Midab takoor la'aan.

(J) Ka mid ahaanshaha iyo ka qeyb qaadashada bulshada si dhameystiran oo waxtar leh.

(X) Xushmeynta kala duwanaanshaha iyo ogolaanshaha dadka naafada ah inay qeyb ka yihin bini'aadamka kala gedisan iyo bini'aadanimada.

(KH) U Sinaanshaha fursada

(D) Helitaanka Waxyaabaha aasaasiga ah

(R) Sinaanshaha Ragga iyo Haweenka

(S) Xushmeynta awoodaha soo kordhaya ee caruurta naafada ah iyo xushmeynta xuquuqda caruurta naafada ah inay ilaashadaan haybtooda.

Qodobka 4:- Waajibaadyo Guud

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxaa waajib ku ah inay xaqiijiyaan oo ay kor u qaadaan meel marinta buuxda ee dhamaan xuquuqaha biniaadamka iyo xori yaadka aasaasiga ah ee guud ahaan dadka naafada ah iyadoo aan lagu sameynaynin takoorid noocii ay doonto ha noqotee taasoo loo daliishanayo naafanimada. Si hadaba ujeedadan loo gaadho Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan:-

(B) Dejinta dhamaan talaabooyinka ku haboon ee sharciyeed, maamul iyo kuwo kaleba oo lagu hirgelinayo xuquuqaha lagu aqoonsaday Axdigan.

(T) Meel marinta dhamaan talaabooyinka ku haboon oo ay ka mid yihiin soo saarista sharci, wax ka bedelid ama tirtirida sharciyadii, xeerarkii, dhaqamada iyo caadooyinkii sii jiray ee sababta u ahaa takoorida ka dhanka ah dadka naafada ah.

(J) Ku Xisaabtanka ilaalinta iyo kor u qaadista xuquuqaha bini'aadamka ee dadka naafada ah marka ay timaado dhamaan siyaasadaha iyo barnaamijyada la meel marinayo.

(X) Ka waantowga inay ku lug yeeshaan wax ficil ama hab-dhaqan ah oo ka hor imanaya Axdigan iyo inay xaqiijiyaan in laamaha dawlada iyo machadyadu ay u dhaqmaan hab waafaqsan Axdigan.

(KH) Dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu cidhibtirayo takoorida ku saleysan naafanimada ee ay sameeyaan shaqsiyaad, urur/hay'ad ama shirkadaha gaarka loo leeyahay.

(D) Hirgelinta ama kobcinta daraasada iyo horumarinta alaabada caalami ahaan loogu talagalay, addeegy ada, qalabka iyo agabyada ay

dadka naafada ah u baahan yihiin sida lagu qeexay qodobka 2aad Axdigan, kuwaasoo looga baahan yahay in sida ugu yar ee suurtagalka ah loola qabsado laguna helo qiimaha ugu yar islamarkaana daboolaya baahiyaha gaarka ah ee ay dadka naafada ah u qabaan, in kor loo qaado helitaankooda iyo isticmaalkooda, lana kobciyo naqshad laga siman yahay marka la hormarinayo darajooyinka iyo hab-raacyada.

(R) Kor u qaadista daraasada iyo horumarinta helitaanka iyo adeegsiga tiknoolajiyado cusub oo ay ku jiraan tiknoolajiyadaha xogta iyo isgaadhsiinta kaalmooyinka wareega, aalado iyo tiknoolajiyada taakuleynta ah ee ku haboon dadka naafada ah iyadoo mudnaanta la siinayo tiknoolajiyadaha qiimo ahaan la awoodi karayo.

(S) Gaadhsiinta xogta ku saabsan taakuleynta dhaq-dhaqaaqyada, aaladaha iyo tiknoolajiyadaha taageeraya dadka naafada ah iyo sidoo kale noocyada kale ee taakuleynta, caawinta, adeegyada iyo agabyada.

(SH) Kor u qaadista tababarka xeel-dheerayaasha iyo shaqaalaha kala shaqeynaya dadka naafada ah xuquuqaha lagu aqoon saday Axdigan si ay sida ugu wanaagsan ugu fidiyaan taageerada iyo adeegyada ay damaanad qaadayaan xuquuqahaasi.

2- Marka la eego xuquuqaha dhaqaale, bulsheed iyo dhaqameed, dawlad kasta waxaa saaran inay qaado talaabooyin ilaa iyo inta ugu sareysa ee kheyraadkeeda ay heli karto iyo hadii loo baahdo, heerarka iskaashiga caalamiga ah ee ku wajahan kamidho dhalinta wax ku oolka ah ee kaga dhabaynta buuxda ee xuquuqahan, iyadoo aan waxba loo dhimaynin waajibaadyada ku xusan Axdigan ee sida ugu dhakhsaha badan loo dhaqan gelinayo iyadoo laga duulayo sharciga caalamiga ah.

3- Diyaarinta iyo hirgelinta sharciga iyo siyaasadaha lagu hirelinayo Axdigan iyo geed-socodyada kale ee go'aan qaadashada ku saabsan arrimaha saameynaya dadka naafada ah, Dawladaha ka qeyb galaya waa in ay si qoto dheer ula tashadaan oo ay si firfircooni leh ugu lug yeeshaan dadka naafada ah, oo ay ku jiraan

caruurta naafada ah iyadoo lala kaashanayo ururadooda wakiilka ka ah.

4- Arrimaha lagu xusay Axdigan waa inayna wax u dhiman qodobaba aadka ugu haboon xaqiijinta xuquuquha dadka naafada ah kuwaasoo laga yaabo inay ku jiraan sharciga dawlad qeyb ka ah Axdigan ama sharciga caalamiga ah oo dhaqan gal ka ah dawladaas.

   Waa inaysan jirin wax xayiraad ah ama ka sare marid ah oo ku timaada mid ka mid ah xuquuqaha biniaadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee uu aqoonsaday ama ka jira gudaha dawlad qeyb ka ah Axdigan iyadoo la raacayo sharciga, Axdiyada, xeerarka ama dhaqamada iyadoo loo arkayo inuusan Axdigani aqoonsanin ama uu u aqoonsanayo darajo ka hooseysa xuquuqahan ama xoriyaadkan.

5- Qodobada Axdigani waa inay ku fidaan dhamaan qeybaha dawladaha federaalka ah iyadoo aysan lahayn wax xad ah ama kasoo hadhaya oo laga reebayo.

Qodobka 5:- Sinaanta iyo Midab –Takoor la'aanta.

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan in dhamaan dadku ay u siman yihiin sharciga hortiisa ayna xaq u leeyihiin iyadoo aan lakala takooraynin, ilaalinta isku midka ah iyo faa'iidooyinka siman ee sharciga.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay mamnuucaan dhamaan takoorida ku saleysan naafanimada ayna u damaanad qaadaan dadka naafada ah ilaalin sharciyeed oo siman waxtarna ah taasoo ka dhan ah takoorida ku saleysan sababaha oo dhan.

3- Si kor loogu qaado sinaanta loona cidhibtiro takoorida, dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xaqiijinayo in fududeyn macquul ah la sameeyay.

4- Talaabooyin gaar ah oo lagama maarmaan u ah dar-dar gelinta ama gaadhitaanka sinaanta dadka naafada ah. Waa inaan loo qaadanin ama loo arkin takoorida ku xusan shuruudaha Axdigan.

Qodobka 6 :- Haweenka Naafada ah

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan in haweenka iyo gabdhaha naafada ah ay la kulmaan

takoorid dhinacyo badan leh, si hadaba arintan loo wajaho waa inay qaadaan talaabooyin lagu xaqiijinayo inay si buuxda oo la siman dadka kale ugu raaxeystaan dhamaan xuquuqaha bininaadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xaqiijinayo horumarka, kor uqaadista iyo kobcinta awooda haweenka iyadoo loo damaanad qaadayo isticmaalka iyo ku raaxeysiga xuquuqaha biniaadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee ku xusan Axdigan.

Qodobka 7:- Caruurta Naafada ah.

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah xaqiijinta ay si buuxda ugu raaxeysanayaan caruurta naafada ah dhamaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah iyagoo la siman caruurta kale.

2- Dhamaan talaabooyinka khuseynaya caruurta naafada ah, waa in mudnaanta ugu sareysa la siiyo danaha caruurta ee ugu wanaagsan.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in caruurta naafada ah ay helaan xuquuqda ay isku muujin lahaayeen, iyadoo fikradahooda la siinayo ahmiyad waafaqsan da'dooda iyo qaan-gaadhnimadooda iyagoo la siman caruurta kale, waana in loo fidiyo taakuleyn ku haboon da'da iyo naafanimada si loo sugo xuquuqdaas.

Qodobka 8:- Wacyi – Gellinta

1- Dawlada ka qeyb galaya waxay Masuuliyad ka saaran tahay inay fuliyaan talaabooyin deg-deg ah, waxtarna ah oo ku haboon :-

(B) Kor u qaadista wacyiga bulshada oo ay ku jirto heer qoys, laguna wacyi geliyo arimaha dadka naafada ah lana hormariyo xushmeynta xaquuqaha iyo karaamada dadka naafada ah.

(T) Baabi'inta dhaqamada gefafka, xadgudubyada iyo kawa xun-xun ee ku saabsan dadka naafada ah, kuwaasoo ay ku jiraan kuwa ku salaysan jinsiga iyo da'da ee dhamaan dhinacyada nolosha.

(J) Kor u qaadista baraaruga ku aadan kartida iyo waxtarka dadka naafada ah.

2- Tallaabooyinka lagu hirgelinayo arintan waxaa ka mid ah :-

(B) Hindisida iyo joogtaynta ololayaal wacyi gelia dadweyne oo waxtar leh looguna tala galay :-

(i) Ka shaqeynta in la ogolaado laguna qanco xuquuqaha dadka naafada ah.

(ii) Kor uqaadista aragtiyaha wanaagsan ee laga qabo iyo wacyi-gelin bulsheed oo balaadhan oo ku wajahan dadka naafada ah.

(iii) Kor u qaadista aqoonsiga xirfadaha, faaiidooyinka iyo kartida dadka naafada ah, iyo kaalimahooda ay ku leeyihiin goobta shaqada iyo suuqa cududa shaqaalaha.

(T) Horumarinta heerarka nidaamka waxbarashada dhamaantood, oo ay kamid yihiin dhamaan caruurta da'doodu hoosayso, aragtida xushmeynta xuquuqaha dadka naafada ah.

(J) Dhiirigelinta dhamaan unugyada warbaahinta inay ula xidhiidhaan dadka naafada ah hab waafaqsan ujeedada Axdigan.

(X) Kor u qaadista barnaamijyada tababarka wacyi gelinta u ku saabsan dadka naafada ah iyo xuquuqaha dadka naafada ah;

Qodobka 9 :- Helintaanka /Adeegsiga

1- Si ay awood ugu yeeshaan dadka naafada ah inay si madax banaan u noolaadaan oo ay si buuxda oga qeyb qaataan dhamaan arimaha nolosha, Dawladaha ka qayb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon in loo xaqiijiyo dadka naafada ah helitaan la siman dadka kale, inay helaan deegaan/jawi, gaadiidka, xogta iyo isgaadhiinta oo ay ka mid yihiin tiknoolajiyadaha xogta iyo isgaadhsiinta iyo nidaamyada, iyo qalabyada kale iyo adeegyada ka dhaxeeya ama loo fidiyo dadweynaha ku sugan goobaha miyiga iyo magaaladaba. Tallaabooyinkan, waa inay ka mid noqoto muujinta iyo cidhibtirida caqabadaha iyo xeyn-daabyada ka dhanka ah helitaanka /Addeegsigan, waa in lagu fuliyo hawlaha horey u sii jiray sida:-

(B) Dhismayaasha, wadooyinka, gaadiidka iyo adeegyada kale ee gudaha iyo dibada oo ay ku jiraan dugsiyada, guryaha, addeegyada caafimaadka iyo goobaha shaqada;

(T) Xogta, isgaadhsiinta, iyo addeegyada kale oo ay ku jiraan addeegyada korontada iyo addeegyada deg-dega ah;

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay sidoo kale ka qaadaan talaabooyinka ku haboon:-

(B) Horumarinta, soo saarista iyo dabagalka dhaqan-gelinta darajooyinka iyo hab-raacyada ugu hooseeya ee helitaanka qalabyada iyo adeegyada ka dhaxeeya ama loo fidiyo dadweynaha.

(T) Xaqiijinta in hay'adaha gaarka loo leeyahay ee qalabka iyo adeegyada uu u fidiya dadweynaha ay ku xisaabtamaan dhamaan xaaladaha ay ku helayaan /Adeegsanayaan dadka naafada ah.

(J) Fidinta bahwadaagta tababar ku saabsan arrimaha helitaanka adeegsiga soo wajaha dadka naafada ah.

(X) Ku sameynta dhismayaasha iyo qalabyada kale ee dadweynaha ka dhaxeeya, calaamado tilmaamayaal ah oo si fudud loo akhriyi karo qaabab la fahmayana leh.

(KH) Suurta gelinta qaababka taakuleynta tooska ah, iyo fududeynta, oo ay ku jiraan tilmaamaha,

calaamadaha akhriska iyo xeeladaha takhasuska, iyo turjumaanda luuqada loo adeegsanayo adeegsiga dhismayaasha iyo adeegyada kabe ee dadweynaha ka dhaxeeya.

(D) Kor u qaadista qaababka kale ee taageerada ah ee ku haboon iyo caawinta dadka naafada ah si loo xaqiijiyo helitaankooda xogta ku saabsan.

(R) Kor u qaadista helitaanka tiknoolahiyadaha cusub ee isgaadhsiinta iyo xogta iyo nidaamyada oo ay ku jirtos habakada internetka, ee dadka naafada ah.

(S) Kor u qaadista naqshada horumarinta, soo saarista iyo qeybinta/gaadhsinta xogta iyo isgaadhsiinta tiknoolajiyaadaha iyo nidaamyada xilliga ugu horeya, sidaas darted, tiknoolajiyadahan iyo nidaamyadan ay noqadaan kuwo lagu heli karo qiime yar.

Qodobka 10 :- Xaqa Nolasha

Dawladaha ka qeyb galaya waxay mar labaad dib u xaqiijinayaan inuu qof kasta oo bini'aadam ah uu xuquuq ku lamaan u leeyahay inuu noolaado,waana inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah

xaqiijinta inay si natiijo leh ugu raaxaystaan dadka naafada ah iyagoo ula siman dadka kale.

Qodobka 11 :- xaaladaha, Khatarta ah iyo Hawlaha deg-dega ah ee Bini'aadanimo.

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah, iyagoo ka duulaya waajibaadyadooda ku xusan sharciga caalamiga,ah, oo uu ka mid yahay sharciga caalamiga ee bini'aadanimada iyo sharciga caalaamiga ah ee xuquuqda bini'aadamka, kuwaasoo lagu xaqiijinayo ilaalinta iyo badbaadinta dadka naafada ah marka ay jiraan xaaladaha khatarta ah oo ay ka mid yihiin xaaladaha iska hor imaadyada hubaysan, masiibooyinka bini'aadanimo iyo marka ay dhacaan masiibooyinka dabiiciga ah.

Qodobka 12:- Aqoonsiga Siman ee Sharciga Hortiisa

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay dib u xaqiijinayaan in dadka naafada ah ay xaq u leeyihiin in meel kasta looga aqoonsado qofnimo sharciga hortiisa.
2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan in dadka naafada ah ay ku raaxeystaan awood

sharciyeed iyagoo ula siman dadka kale dhamaan dhinacyada nolosha.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaaboyinka ku haboon oo ay ugu fidinayaan dadka naafada ah helitaanka caawimada u baahan karash si ay u adeegsadaan awoodahooda sharciyeed.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in dhamaan talaabooyinka la xidhiidha adeegsiga awooda sharciyeed in loo sameeyay difaacyo ku haboon oo waxtar leh si looga hortago meel ka dhac iyadoo la tixraacayo sharciga caalamiga ah ee xuquuqaha bini'aadamka. Difaacyadan waa inay xaqiijiyaan in talaabooyinka la xidhidha adeegsiga awooda sharciyeed ay xushmeynayaan xuquuqaha, rabitaanka iyo kala doorashada qofka kana madax banaan yihiin isku dhaca danaha iyo kasbshada aan haboonayn, ay u dhigman kuna fiican yihiin duruufaha qofka, la fuliyo wakhtiga ugu gaaban ee suurtagalka ah ayna tahay in dib u eegis joogta ah sameeyso hay'ad awood u leh oo madax banaan, isla markaana dhex-dhexaad ah ama hay'ad garsoor.

Difaacyadu waa inay u dhigmaan heerka ay talaabooyinka, noocan ah u saameynayaan xuquuqaha iyo danaha qofka.

5- Iyadoo la raacayo shuruudaha ku xusan qodobkan, dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee waxtarka leh si loo xaqiijiyo xuquuqaha ay ula siman yihiin dadka naafada ahi inay yeeshaan ama ay dhaxlaan hanti, maamulaan arrimahooda maaliyadeed ayna si dadka kale la siman u helaan amaahyada bangiga, rahmadaha iyo qaababka kale ee deymaha maaliyadeed waana in la xaqiijiyo in dadka naafada ah aan si sharciga ka baxsan looga qaadin hantidooda.

Qodobka 13:- Helitaanka Cadaalada;

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan helitaanka waxtarka leh oo cadaaladeed ee dadka naafada ah iyagoo ula siman dadka kale, oo ay ka mid yihi in in iyadoo la marayo shuruuda xeerka habka iyo fududeynta ku haboon da'da, si loo meel mariyo doorkooda dhabta ah ee ay si toos ah iyo si dadbanba oga qeyb galayaan, oo ay ku jirto maragyo

ahaan ee dhamaan dacwadaha sharciyeed, oo ay ku jiraan marxaladaha baadhista iyo kuwa kale ee dhegeysiga hore.

2- Si looga gacan siiyo xaqiijinta helitaanka dhabta ah ee cadaaladeed ee dadka naafada ah, dawladaha ka qeyb galaya waa inay kor u qaadaan tababarka ku haboon ee dadka ka shaqeynaya nidaamka maamulka cadaalada, oo ay ku jiraan booliska iyo shaqaalaha xabsiyada.

Qodobka 14 :- Xoriyada iyo Amniga Qofka

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in dadka naafada ah, iyagoo ula siman dadka kale :-

(B) Ay ku raaxeystaan xuquuqda xoriyada iyo amaanka qofka

(T) Aan laga xayuubin xoriyadooda si ka baxsan sharciga ama xad-dhaaf ah iyo in xoriyad ka qaadistu ay waafaqsan tahay sharciga iyo in jiritaanka naafanimada aan marnaba sabab looga dhigan xoriyad ka qaadista.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa in ay xaqiijiyaan, hadii ay jiraan dad naafo ah oo xoriyadooda laga qaaday inta laga guda jiro geedi-socod kasta, inay si

la siman dadka kale xaq ugu leeyihiin damaanad qaadyada hab waafaqsan sharciga caalamiga ah ee xuquuqaha bini'aadamka – waana in loola dhaqmo qaab waafaqsan ujeedooyinka iyo mabaadiida Axdigan, oo ay ku jirto shuruuda fududeynta suurta galka ah.

Qodobka 15 :- Xor ka Noqoshada Jidh-dilka, La Dhaqan ka ama ciqaabta Cadowtinimada, Yasida ama Si xun ula Dhaqanka kale .

1- Qofna laguma sameyn karo jidh-dil ama ciqaab ama si xun ula dhaqan cadowtinimo ah ama si yasitaan ah. Gaar ahaan qofna laguma fulin karo isagoo aan bixinin ogolaanshihiisa xorta ah, tijaabo cilmiyeed ama daaweyn la xidhiidha.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa in ay qaadaan talaabooyinka ku haboon ee sharciyeed, maamul, garsoor ama kuwo kale, si looga hortago in jidhi-dil ama ciqaab ama si xun ula dhaqan kale oo cadowtinimo, ama yasitaan, ah, lagu sameynin dadka naafada ah iyagoo la siman dadka kale.

Qodobka 16 :- Xor ka no qoshada ku shaqeysiga, Rabshada iyo xad-gudubka.

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa in ay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee sharciyeed, maamul, bulshadeed, waxbarasho iyo kuwo kale, si looga ilaaliyo dadka naafada ah dhamaan noocyada ku shaqeysiga, rabshada iyo xad-gudubka ka dhaca gudaha iyo dibada hoyga, oo ay ku jiraan kuwa jinsiga ku saleysan.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay sidoo kale qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon, si looga hortago dhamaan noocyada ku shaqeysiga, rabshada iyo xad-gudubka iyadoo lagu xaqiijinayo qaababka ku haboon ee taageerada jinsiga iyo da'da xaasaasi ahaan, iyo caawinta dadka naafada ah iyo qoysaskooda iyo dadka daryeelka u fidiya, oo ay ku jiraan arimaha xogta iyo waxbarashada ku saabsan sida looga fogaado, aqoonsado iyo looga warbixiyo tusaalayaasha ku shaqeysiga, rabshada iyo xad-gulubka. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in adeegyada ilaalinta ay da' ahaan, jinsi ahaan iyo naafo ahaanba ay xaasaasi yihiin.

3- Si looga hortago inay dhacaan dhamaan noocyada ku shaqeysiga, rabshada iyo xad-gudubka. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in dhamaan adeegyada iyo barnaamijyada loogu tala galay inay uu adeegaan dadka naafada ah ay si sax ah u daba galaan hay'ado u awood leh.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee kasoo kabashada jidheed, xasuuseed, maskaxeed, dibu-dejinta iyo dib-ula midowga bulshada (Dhexgalka) ee dadka naafada ah kuwaasoo dhibanayaal u noqday nooc kasta oo ku shaqeysi, rabshad ama xad-gudub ah, oo ay ku jiraan adeegsiga shuruudaha adeegyada ilaalinta. Dib-usoo kabashadan iyo dib-u dhexgalka waa inay ka dhacaan deegaan /jawi ku fiican caafimaadka, ladnaanta, xushmada, karaamada iyo madax banaanida qofka iyo in lagu xisaabtamo baahiyaha gaarka ee jinsiga iyo da'da la hal maala.

5- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay diyaariyaan sharci iyo siyaasado waxtar leh, oo ay ku jiraan sharci iyo siyaasado ku wajahan haweenka iyo caruurta si loo xaqiijiyo in tusaalayaasha ku shaqeysiga,

rabshada iyo xad-gudubka ka dhanka ah dadka naafada ah laga war helo, la baadho iyo markay haboon tahay dacwad lagu oogo cida sameysay.

Qodobka 17 :- Ilaalinta Dhameystirnaanta Qofka

Qof kasta oo naafo ah wuxuu xaq u leeyahay in la xushmeeyo dhameystirnaanshihiisa jidheed iyo tan maskaxeed, isagoo ula siman dadka kale.

Qodobka 18 :- Xoriyada Dhaqdhaqaaqa iyo Dhalashada

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xuquuqaha dadka naafada ah u leeyihiin xoriyada dhaq-dhaqaaqa, xoriyada inay xushaan degenaanshahooda, iyo dhalashada ay yeelanayaan, iyagoo ula siman dadka kale, oo ay ku jiraan in la xaqiijiyo inay dadka naafada ah:-

(B) Xaq u leeyihiin inay helaan ayna bedeshaan dhalashada iyo inaan si sharciga ka baxsan looga qaadin dhalashadooda ama sabab la xidhiidhe naafanimadooda.

(T) Aan laga qaadin/xayuubin awoodooda inay yeelan karaan, heli karaan iyo adeegsashada

waraaqaha dhalashada, ama waraaqaha kale ee aqoonsiga ama ka faa'iideysiga geedi-socodyada la xidhiidha sida dalwadaha muhaajirnimada, ee looga baahan karo fududeynta isticmaalka xuquuqda xoriyada dhaq-dhaqaaqaa iyadoo sabab looga dhigayo naafanimada.

(J) Ay xor u yihiin ka tegida wadan kasta oo uu ka mid yahay wadankoodu.

(X) Aan si sharciga ka baxsan looga qaadin xuquuqda soo gelitaanka wadankooda, iyadoo sabab looga dhigayo naafanimadooda.

2- Caruurta naafada ah waa in la diiwaan geliyo isla wakhtiga ay dhashaan kadib waxayna xaq u leeyihiin in magac loo bixiyo laga bilaabo dhalashada, xaqa inay yeeshaan dhalasho iyo ilaa iyo inta suurta galka ah inay aqoonsadaan ayna daryeel ka helaan waalidkooda.

Qodobka 19 :- Gooni uu Noolaanshaha iyo Ku Tirsanaanta Bulshada

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xuquuqda dadka naafada ah ee la siman dadka kale, inay ku dhex noolaadaan bulshada ay iyagu xushaan, waana in la qaado

talaabooyin ku haboon oo waxtar leh si loo fududeeyo inay si buuxda ugu raaxaystaan dadka naafada ah xuquuqdan iyo ka tirsanaantooda iyo ka qeyb galkooda buuxa ee bulshada, oo ay ku jiraan xaqiijinta in :-

(B) Dadka naafada ah ay fursad u helaan in ay xushaan goobta uu degenaan shahoodu noqonayo iyo meesha iyo cidda ay la noolanayaan iyagoo la siman dadka kale, waana inaan waajib lagaga dhigin inay ku noolaadaan aagag gaar ah.

(T) Dadka naafada ah in ay helaan adeegyada bulshada lagu caawinayo iyo kuwa hoyga gudihiisa laga helo ee goobaha ay degen yihiin, oo ay ku jiraan taakuleynta qofka lagama maarmaanka u ah in laga caawiyo nolosha iyo ku tirsanaanta bulshada lagana hortago ka faquuqida ama ka go'doominta bulshada inteeda kale.

(J) Adeegyada iyo qalabyada bulshada ee loogu talagalay guud ahaan dadweynaha inay u heli karaan si la siman dadka kale ayna jawaab u noqon caan baahiyaha dadka naafada ah.

Qodobka 20 :- Dhaq – dhaqaaqa Shaqsiyeed

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyin waxtar leh si loo xaqiijiyo dhaq-dhaqaaqa shaqsiyeed ilaa iyo inta ugu sareysa ee suurta galka ah ee gooni isu taaga dadka naafada ah, oo ay ku jiraan:-

(B) Fududeynta dhaq-dhaqaaqa shaqsiyeed ee dadka naafada ah ee xaalada iyo wakhtiga rabitaankooda ah iyo in ay qiime ay awoodi karaan ku helaan.

(T) Fududeynta helitaanka tiknoolojiyadaha taakuleynta ah, adaladaha, qalabka dhaq-dhaqaaqa ka caawinaya oo tayo leh iyo qaababka taakuleynta tooska ah iyo kaabayaasha, oo ay ku jiraan suurta galinta in lagu heli karo qiime macquul ah.

(J) U fidinta tababar la xidhiidha xirfadaha dhaq-dhaqaaqa oo la siiyo dadka naafada ah iyo shaqaale takhasus leh oo la shaqeynaya dadka naafada ah.

(X) Dhiiri gelinta shirkada soo saara qalabyada dhaq-dhaqaaqa, aaladaha iyo tiknoolajiyadaha

taakuleynta ah inay ku xisaabtamaan dhamaan qeybaha dhaq-dhaqaaqa ee dadka naafada ah.

Qodobka 21 :- Xoriyada Hadalka iyo Fikirka iyo Helida Xogta

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xaqiijinayo in dadka naafada ah ay isticmaali karaan xuquuqda xoriyada hadalka iyo fikirka, oo ay ku jiraan xoriyada inay raadiyaan, helaan ayna ku gudbiyaan xogta iyo ra'yiga iyagoo ula siman dadka kale una adeegsanaya dhamaan noocyada isgaadhsiinta ee ay door bidaan iyagu, sida lagu qeexay Qodobka 2 ee Axdigan, oo ay ku jiraan :-

(B) Gaadhsiinta xogta loogu tala galay guud ahaan dadweynaha, dadka naafada ah lagu gaadhsiiyo nidaamyo ay ku heli karaan iyo tiknoolajiyado ku haboon noocyada kala duwan ee naafanimada, ee xilliga ugu haboon iyadoo aan qiime dheeri ah lagu soo rogin.

(T) Ogolaanshaha iyo fududeynta adeegsiga luuqadaha calaamada (Midaar) iyo isgaadhsiinta ka gedisan mida tooska ah iyo dhamaan aaladaha kale ee la heli karo, hababka iyo

nidaamyada isgaadhisiinta ay iyagu door bidaan dadka naafada ah oo xidhiidho rasmi ah leh.

(J) Ku boorinta Shirkadaha gaarka loo leeyahay ee adeegyada u fidiya guud ahaan dadweynaha oo ay ka mid yihiin kuwa adeegsada shabakada internteka, inay u gudbiyaan xogta iyo adeegyada nidaamyo ay ku heli karaan, kuna isticmaali karaan dadka naafada ah.

(X) Ku dhiiri gelinta warbaahinta, oo ay ka mid yihiin kuwa xogta ku gudbiya shabakada interntka, inay adeegyadooda ka dhigaan kuwo ay heli karaan dadka naafada ah.

(KH) Aqoonsiga iyo kor uqaadista isticmaalka luuqadaha calaamada ah (Midaarka).

Qodobka 22 :- Xushmeynta Arimaha Gaarka ah

1- Majirayo qof naafo ah, meeshuu doonaba ha deganaadee ama sidii uu doonaba ha u noolaadee, oo lagu sameyn karo si sharciga ka baxsan oo xad-dhaaf ah loo fara geliyo arimihiisa gaarka u ah, qoyskiisa, hoygiisa ama isgaadhsiinta xidhiidhka ama noocyada kale ee isgaadhsiinta ama weeraro sharci daro ah lagu qaado sharaftiisa iyo sumcadiisa. Dadka naafada ah waxay xaq u

leeyihiin inay helaan ilaalinta sharciyeed ee ka dhanka ah faragelinta iyo weerarada noocan ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ilaaliyaan arimaha gaarka u ah shaqsiyada, caafimaadka iyo xogta dibu – dejinta ee dadka naafada ah si la siman dadka kale.

Qodobka 23 :- Xushmeynta Hoyga iyo Qoyska

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon ee waxtarka ah si loo cidhibtiro takoorka ka dhanka ah dadka naafada ah ee dhamaan arimaha ku saabsan guurka, qoyska, waalidnimada iyo xidhiidhada si loo xaqiijiyo in :-

(B) Xuquuqda dhamaan dadka naafada ah ee gaadhay da'da guurku ay u guursadaan una sameystaan qoys ku saleysan ogolaansho buuxa oo xor ah ee lamaanaha is guursanaya la aqoonsaday.

(T) Xuquuqaha dadka naafada ah inay go'aan xor ah oo masuuliyad ku dheehan tahay ka gaadhaan tirada iyo inta ay kala waynaanayaan caruurtoodu iyo inay helaan xogta da'da ku haboon. Waxbarashda taranka iyo qorsheynta qoyska waa in la aqonsado, iyo in aaladaha lagama maarmaanka u

ah ay awood u yeeshaan adeegsiga xaquuqahan in loo fidiyay.

(J) Dadka naafada ah, oo ay ku jiraan caruurta, ay haystaan tarankooda iyagoo la siman dadka kale.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan xuquuqaha iyo masuuliyadaha dadka naafada ah ee ilaaliyanimada sharciyeed, daryeelanimada, korinta caruurta iyo machadyada la midka ah. Marka ay fikradahan ku jiraan sharciga dalka, xaaladaha dhamaantood, waa in mudnaanta la siiyo danaha caruurta. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay siiyaan taageerada ku haboon dadka naafada ah markay fulinayaan masuuliyadahooda korinta caruurta la xidhiidha.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in caruurta naafada ah ay xuquuqo la siman kuwa kale u leeyahay nolosha qoyska. Si loo xaqiijiyo xuquuqahan loogana hortago qarinta, tuurintaanka, xaqiraada iyo takoorida caruurta naafada ah. Dawladaha ka qeyb galaya waxay masuuliyad ka saaran tahay inay u fidiyaan adeegyada, xogta iyo taageerada haboon oo deg-deg ah ee caraurta naafada ah iyo qoysaskooda.

4- Dawladaha Ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in caruurta inaan laga kaxeynin waalidkood iyagoo aan raali ka ahayn, hadii aan hay'adaha awooda u leh oo dibu eegis garsoor raacaya ay go'aamiyan mooyee, iyadoo laga duulayo sharciga iyo hababka khuseeya, in kala kaxeyntani ay lagama maarmaan u tahay danaha ugu wanaagsan ee caruurta. Marnaba ilmaha waa in aan laga kaxeynin waalidka iyadoo sabab looga dhigayo naafanimada ilmaha ama midka mid ah ama labada waalidba.

5- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dadaal kasta oo ay ugu fidinayaan daryeel ka baxsan oo qoyska baladhan dhexdiisa ah iyo hadii lagu guul- dareysto taas, bulshada dhexdeeda, marka aysan qoysku awoodi karin inay daryeelaan ilmaha naafada ah.

Qodobka 24 :- Waxbarashada

1-Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xuquuqda dadka naafada ah u leeyihiin waxbarashada. Si loo xaqiijiyo xuquuqdan oo aan kala soocid lahayn iyo iyadoo ku salaysan fursad loo siman yahay. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan nidaamka waxbarasho loo dhan yahay

dhamaan heerarka iyo barasho cimri daa im ah oo ku wajahan :-

(B) Horumarinta buuxda ee faa'iidada bini'aadamka, dareen karaameyn iyo is – qiimeyn iyo adkaynta xushmeynta xuquuqaha bini'aadamka, xoriyaadka aasaasiga ah iyo kala duwanaanshaha bini'aadamka.

(T) Horumarka ay dadka naafada ah ku hormarinayaan shaqsiyadooda, hibadooda iyo hal-abuurkooda iyo sidoo kale awoodaha jidhkooda iyo maskaxdooda hadba inta uu karaankoodu dhan yahay.

(J) Ka saacidida dadka naafada ah sidii ay firfircooni uga qeyb qaadan lahaayeen arimaha bulsho xor ah.

2- Si loo xaqiijiyo xuquuqdan. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in :-

(B) Dadka naafada ah aan laga saarin nidaamka waxbarashada guud iyadoo sabab looga dhigayo naafanimada iyo in caruurta naafada ah aan laga reebin waxbarashada hoose ee bilaashka iyo

qasabka ah, ama waxbarashada dugsiga sare iyadoo sabab looga dhigayo naafanimada.

(T) Dadka naafada ah waa inay heli karaan waxbarashada hoose oo bilaash ah, tayana leh oo ay qeyb ka yihiin iyo waxbarashada dugsiga sare ee bulshada ay ku dhex nool yihiin iyagoo ula siman dadka kale.

(J) Qalabaynta suurta galka ah ee baahiyaha shaqsiga oo loo fidiyo.

(X) Dadka naafada ah ay helaan gar-gaarka ay uga baahan yihiin nidaamka waxbarashada guud. Si loo fududeeyo waxbarashadooda waxtarka leh.

(KH) Loo fidiyay talaabooyin gar-gaar shaqsiyeed oo waxtar u leh jawi kor u qaadaya horumarka waxbarasho iyo kan bulshadeedba oo waafaqsan yoolka ka qeyb gelinta dhamaystiran.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay awood u siiyaan dadka naafada ah inay bartaan xirfadaha horumarinta nolosha iyo bulshada, si loo fududeeyo ka qeyb galkooda buuxa lana siman kuwa kale ee waxbarashada iyo xubno ka ahaanshaha bulshada. Si tan looga midho dhaliyo.

Dawladaha ka qeyb galaya-waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon, oo ay ku jiraan:-

(B) Fududeynta barashada qoraalada gaarka ah, muuqaalada iyo qaababka gaarka ah, faham ka aaladaha iyo hababka isgaadhiinta iyo wargelinta iyo xirfadaha dhaq-dhaqaaqa iyo fududeynta taageerada midaarka iyo af-garashada lagu xidhiidho.

(T) Fududeynta barashada luuqada fara ka hadalka (Midaarka) iyo kor u qaadista hayb sooca luuqadeed ee bulshada dhagoolayaasha ah.

(J) Xaqiijinta in waxbarashada dadka iyo gaar ahaan caruurta indhaha la; dhagaha la, ama indhaha iyo dhagnhaba la, lagu bixiyo luuqadaha ugu haboon iyo jawiga kor uqaadaya horumarka waxbarasho iyo kan bulsheedba.

4- Si gacan looga siiyo xaqiijinta xuquuqdan, Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaaboyinka ku haboon oo ay ku shaqaaleynayaan macalimiin, ay ka mid yihiin macalimiin naafo ah oo ku takhasusay luuqada fara kahadalka (Midaarka)iyo tababarista khabiiro iyo shaqaale ka hawl gala dhamaan heerarka waxbarashada.

Tababarkan noocan ah waa inuu koobayo wacyiga naafanimada iyo adeegsiga haboon ee qaababka, aaladaha, iyo hababka isgaadhsiinta, farsamooyinka waxbarasho iyo agabka taageeraya dadka naafada ah.

5- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in dadka naafada ah ay awood u leeyihiin helitaanka waxbarashada hoose, tababarka farsamada, waxbarashada dadka waawayn iyo barashada aan xilliga lahayn iyadoo aysan jirin wax kala soocid ah ayna ula siman yihiin dadka kale. Si arintan loo, fuliyo. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in qalabeynta suurta galka ah loo sameeyay dadka naafada ah.

Qodobka 25 :- Caafimaadka

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan in dadka naafada ah ay xaq u leeyihiin ku raaxeysiga heerka ugu sareeya ee caafimaadka la heli karo iyadoo aan lagu soocaynin sabab ku saleysan naafanimada. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo inay dadka naafada ah helaan adeegyo caafimaad oo jinsiga xaasaasi u ah, oo ay ku jiraan, dibu-dejin

la xidhiidha caafimaadka. Gaar ahaan, Dawladaha ka qeyb galaya waa inay :-

(B) U fidiyaan dadka naafada ah barnaamijyo iyo daryeel caafimaad baaxad ahaan, tayo ahaan iyo darejo bilaash ah ama la awoodi karo dhaqaale ahaan sida loogu fidiyo dadka kale, oo ay ku jiraan qeybaha caafimaadka habka taranka iyo galmada la xidhiidha iyo barnaamijyada ku saabsan caafimaadka dadweynaha.

(T) U fidiyaan adeegyada caafimaad ee ay u baahan yihiin dadka naafada ah ee gaarka ah sababo naafanimadooda la xidhiidha. Oo ay ku jiraan, adeegyada digniinta hore iyo gurmadka ee loogu tala galay hoos u dhigida iyo ka hortaga naafanimo dheeraad ah oo soo wajaha caruurta iyo dadka waaweyn.

(J) U fidiyaan adeegyadan caafimaad oo laga helo goobta ugu dhow ee ugu suurta galsan bulshadooda, oo ay ku jiraan goobaha miyiga ah.

(X) Ka dalbadaan xeel – dheerayaasha caafimaadku inay u fidiyaan dadka naafada ah daryeel tayadiisu la mid tahay tan dadka kale, oo ay ku

jiraan ogolaansho xor ah oo ku saleysan wargelin, kor u qaadista wacyi gelinta xuquuqaha bini'aadamka, karaamada, gooni isu taagadi baahiyaha dadka naafada ah iyadoo la adeegsanayo tababaro iyo soo saarista xeerarka anshaxa ee daryeelka caafimaadka xarumaha dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

(KH) Mamnuucaan takoorida ka dhanka ah dadka naafada ah ee dhinaca caymiska caafimaadka, iyo caymiska nolosha marka caymisyada noocan ah uu fasaxayo sharciga dalka, kaasoo loogu fidinayo hab cadaalad ah oo suurta gal ah.

(D) Ka hortagaan oo diiditaan wixii takoorid ah ee adeegyoda iyo daryeelka caafimaadka ama culimada iyo daryeelayaasha kaasoo ku saleysan sabab naafanimada la xidhiidha.

Qodobka 26 :- Dejinta iyo Dibu – Dejinta

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyin ku haboon oo waxtarna ah, oo ay ku jiraan taageero gacan saar ah, si ay awood ugu yeeshaan dadka naafada ah inay gaadhaan kuna sugnaadaan isku filaanshaha ugu sareeya, awooda jidheed, maskaxeed,

bulshadeed iyo farsamo oo buuxda iyo si dhamaystiran ugu mid ahaanshaha iyo ka qeyb qaadashada dhamaan xaaladaha nolosha. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay abaabulaan, xoojiyaan ayna fidiyaan adeegyada dejinta iyo dibu-dejinta oo faah-faahsan iyo barnaamijyo la xidhiidha, gaar ahaan, dhinacyada adeegyada caafimaadka, shaqaaleynta, waxbarashada iyo kuwa bulshada, una qaabayso si ay adeegyadan iyo barnaamijyadani :-

(B) Ugu bilowdaan sida ugu horeysa ee suurta galka ah ayna ku saleysnaadaan daraasaad dhinacyo badan leh oo baahiyaha shaqsiga iyo adkaanshaha.

(T) Ay gacan ka geystaan ka qeyb qaadashada iyo ka mid ahaanshaha bulshada iyo dhamaan arimaha bulshada, ay mutadawac yihiin ayna ka heli karaan dadka naafada ah halka ugu dhow ee ugu suurta galsan ee bulshadooda ah oo ay ku jiraan goobaha miyiga ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay kor uqoodaan helitaanka, aqoonta iyo adeegsiga tiknoolajiyada iyo aaladaha taakuleynta ah ee loogu tala galay dadka

naafada ah hadba siday ula xidhiidhaan dejinta iyo dibu- dejinta.

Qodobka 27:- Shaqada iyo Shaqaaleynta

1-Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xaqa ay dadka naafada ah u leeyihiin inay shaqeeyaan iyagoo la siman dadka kale, tan waxaa ka mid ah, xaqa helida fursada ku noolaashaha shaqo uu si xor ah u doortay ama laga ogol yahay suuqa cudada shaqaalaha iyo jaawi shaqo oo u furan, ku jiraan ayna heli karaan dadka naafada ah. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay difaacaan ayna kor u qaadaan ka midho dhelinta xaqa shaqada, oo ay ku jiraan kuwa ay lasoo deristo naafanimo inta lagu guda jiro qaab socodka shaqaaleynta, iyadoo la qaadayo talaabooyin ku haboon, oo ay ka mid yihiin, sharci soo saaris, lagu fulinayo:-

(B) Mamnnucida takoorida ku saleysan naafanimada ee khuseeya dhamaan arimaha noocyada shaqaaleynta, oo ay ku jiraan shuruudaha qaadashada, meelaynta iyo joogtanimada shaqada, dalacsiinta iyo duruufo shaqo oo

badbaado ahaan iyo caafimaad ahaanba lagu shaqeeyo.

(T) Ilaalinta xuquuqaha dadka naafada ah si ay ula siman yihiin dadka kale, shaqo xaalado wanaagsan iyo haboonaansho leh inay ka shaqeeyaan oo ay ku jiraan, fursadaha siman iyo ajuuro isku mid ah ee shaqada isku baaxada ah/is le'eg, duruufo shaqo oo caafimaad ahaan iyo amni ahaanba haboon, oo ay ku jiraan ka ilaalinta in lagu tacadiyo iyo mag-dhow inay ka helaan xad-gudubyada.

(J) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay awoodi karaan isticmaalida xuquuqa ururada shaqaalaha iyo kuwa ganacsiga ee ay iyagu leeyihiin.

(X) Inay awoodi karaan dadka naafada ah inay si waxtar leh u heli karaan barnaamijyada farsamada guud iyo hab raaca tababarka, adeegyada rakibida iyo tababarada joogtada ah iyo kuwa xilliga leh.

(KH) Kor u qaadista fursadaha shaqaalenyta iyo dalacsiinta dadka naafada ah ee suuqa shaqaalaha gudihiisa iyo sidoo kale ka

taageerida raadinta, helida, haysashada iyo ku noqoshada shaqada.

(D) Kor uqaadista fursadaha shaqo abuurashada, shirkado gaar loo leeyahay, horumarinta iskaashatooyinka iyo bilaabida ganacsi uu qofku iskii u leeyahay.

(R) Ka shaqaaleynta dadka naafada ah laamaha dawlada dhexdooda.

(S) Kor u qaadista shaqaaleynta dadka naafada ah ee shirkadaha gaarka loo leeyahay iyadoo loo marayo siyaasado iyo talaabooyin ku haboon, kuwaasoo ay ku jiri karaan barnaamijyo kasoo kabasho ah, gunooyin iyo talaabooyin kale.

(SH) Xaqiijinta in qalabaynta suurta galka ah loogu sameeyay dadka naafada ah goobta shaqada.

(DH) Kor uqaadista inay dadka naafada ah ka helaan suuqa shaqaalaha ee furan khibrad shaqo.

(C) Kor u qaadista dibu dejinta farsamo iyo takhasus, ku sugnaan shaqo iyo barnaamijyada shaqo ku laabashada dadka naafada ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in dadka naafada ah aan loo haysanin adoonsasho ama in lagu shaqeysto lagana ilaaliyo shaqada qasabka ah iyagoo la siman dadka kale.

Qodobka 28 :- Darajo Ku Filan Oo Nololeed Iyo Ilaalinta Bulshadeed.

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xaquuqda dadka naafada ah inay helaan darajo ku filan oo nololeed iyaga iyo qoysaskooda, oo ay ku jiraan, cunto, dhar iyo hoy ku filan iyo hagaajinta joogtada ah ee xaaladaha nololeed, waana inay qaadaan talaabooyinka ku haboon si loo ilaaliyo korna looga qaado ka midho dhalinta xuquuqda iyadoo aysan jirin wax kala soocid ah oo ku salaysan naafanimada.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan xuquuqda dadka naafada ah ee ilaalinta bulsheed iyo ku raaxeysiga xuquuqdaas oo aan lahayn wax kala soocid ah oo ku saleysan naafanimada, waana inay qaadaan talaabooyinka ku haboon si loo ilaaliyo korna loogu qaado ka midho dhalinta xuquuqdan, oo ay ku jiraan talaabooyin :-

(B) Lagu xaqiijinayo helitaanka la siman ee dadka naafada ah inay helaan adeegyada biyaha nadiifta ah, iyo xaqiijinta helitaanka adeegyada ku haboon lana awoodi karo qiime ahaan, aaladaha iyo taakuleynta kale ee ku saabsan baahiyaha naafada.

(T) Lagu xaqiijinayo helitaanka dadka naafada ah barnaamijyada ilaalinta bulshada iyo kuwa dhimista saboolnimada, gaar ahaan, haweenka, gabdhaha iyo dadka da'da ah ee naafada ah.

(J) Lagu xaqiijinayo helitaanka dadka naafada ah iyo qoysaskooda ee ku nool xaalado saboolnimo. Inay taageero ka helaan dawlada oo u fidinaysa kharashyada ku wajahan naafada. Oo ay ku jiraan, tababar, latalin, taageero maaliyad iyo daryeelka guud.

(X) Lagu xaqiijinayo helitaanka dadka naafada ah ee barnaamijyada guriyeynta dawlada.

(KH) Lagu xaqiijinayo helitaanka siman ee dadka naafada ah inay ula sinaadaan dadka kale, faa'iidooyinka iyo barnaamijada hawl-gabka

Qodabka 29 :- Ka Qeybagalka Dhaq-Dhaqaaqyada Siyaasadeed Iyo Kuwa Dadweyne

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u damaanad qaado dadka naafada ah xuquuqaha siyaasadeed iyo fursada, ku raaxeysigooda iyagoo ula siman dadka kale, waana inay masuulka noqdaan :-

(B) Xaqiijinta in dadka naafada ah inay si firfircoon oo dhameystiran uga qeyb gali karaan, dhaq-dhaqaaqyada siyaasadeed iyo kuwa dadweyne, iyagoo ula siman dadka kale, si toos ah ama iyagoo wakiilo ay si xor ah u doorteen u matalayaan, oo ay ku jirto, xuquuqda iyo fursada dadka naafada ah ay wax ku dooran karaan laguna dooran karo, gaar ahaan :-

I. Iyadoo la xaqiijinayo in hababka cod bixinta, qalabka iyo adeegyada doorashada ay ku haboon yihiin, la heli karo ayna yihiin kuwo si fudud loo fahmi karo loona isticmaali karo.

II. Iyadoo la ilaalinayo xuquuqda dadka naafada ah inay codka ku dhiibtaan hab qarsoodi ah doorashooyinka iyo aftida

dadweyne iyadoo aysan jirin wax cabsi gelin ah, iyo isu sharixida ama u tartamida doorashooyinka qabashada xafiis iyo qabashada dhamaan shaqoonyinka dawladeed ee dhamaan heerarka dawlada, iyadoo la fududeynayo adeegsiga tkinoolajiyadaha cusub ee taageeraya marka loo baahdo.

III. Iyadoo la damaanad qaadayo inay dadka naafada ah si xor ah u muujiyaan rabitaankooda markaa ay wax dooranayaan, si arintan loo meel mariyana, marka ay codsadaan, waa in loo ogolaado inan shaqsi ay soo xushaan uu ka taageero codbixinta marka ay lagama maarmaan tahay.

(T) Kor u qaadista jawi ay dadka naafada ah si buuxda oo firfircoon uga qeyb qaadan karaan hirgelinta arimaha bulshada, iyadoo aysan jirin wax kala soocid ah ayna la siman yihiin dadka kale, la dhiiri geliyo ka qeyb galkooda arimaha bulshada, oo ay ku jiraan:-

I. Ka qeyb qaadashada ururada iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee ku aadan dhaq-dhaqaaqyada

siyaasadeed iyo kuwa dadweyne ee wadanka iyo hawlaha iyo maamulka ururada siyaasadeed.

II. Sameynta iyo ku biirida ururada dadka naafada ah si ay ugu matalaan dadka naafada ah, heerarka caalami, wadan, gobol iyo deegaan ahaaneed.

Qodobka 30 :- Ka Qeyb Galka Dhaq-Dhaqaaqyada Dhaqanka, Madadaalada Iyo Kuwa Ciyaaraha.

1- Dawladaha ka qeyb galay waa inay aqoonsadaan xuquuqda dadka naafada ah inay ka qeyb galaan dhaq-dhaqaaqyada dhaqan ka, iyagoo ula siman dadka kale, waana inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay:-

(B) Ku raaxeystaan helitaanka qalabyada dhaqameed oo qaabab haboon leh.

(T) Ku raaxeystaan helitaanka barnaamijyada telefishinka filimada, golaha iyo hawlaha kale ee dhaqanka oo qaabab ku haboon leh.

(J) Ku raaxeystaan helitanka goobo ama adeegyo dhaqanka lagu soo bandhigo sida golayaasha caweyska. Madxafyada, sineemooyin, laaybareeriyada iyo adeegyada dalxiiska iyo sidoo

kale hadba inta suurta galka ah inay ku raaxeystaan tegida tuulooyinka iyo goobaha ahmiyada u leh dhaqanka dalka.

2- Dawladaha ka qeyb galay waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon ee awood u siinaya dadka naafada ah helida fursad ay ku hormariyaan kagana faa'iideystaan hal-abuurkooda, fanka iyo garaadka maskaxeed, oo aan ku koobnaanin faa'iidooyinkooda kaliya laakin sidoo kale ay bulshadu ka macaashto.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon, ee lagu xaqiijinayo in sharciyada lagu ilaalinayo hantida garaadka maskaxeed ayna ahayn caqabad takoorid ah ama aan suurtagal ahayn inay dadka naafada ah adeegsadan karash, iyadoo la raacayo sharciga caalamiga ah.

4- Dadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin, iyagoo la siman dadka kale, aqoonsiga iyo caawinta hayb-sooca gaarka ah ee dhaqankooda iyo luuqadooda, oo ay ku jiraan luuqadaha fara ka hadalka (Midaarka) iyo dhaqanka dhagoolayaasha.

5- Si ay awood ugu yeeshaan dadka naafada ah inay si siman uga qeyb galaan hawlaha madadaalada iyo ciyaaraha, iyagoo la siman dadka kale, Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon :-

(B) Dhiri gelinta iyo kor u qaadista ka qeyb galka dadka naafada ah hawlaha muhiimka ah ee ciyaaraha dhamaan heerarka ay leeyiniin, ilaa iyo xadka ugu sareeya ee suurtagalka ah.

(T) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay fursad ugu helaan abaabulka, horumarinta iyo ka qeyb gelida hawlaha ciyaaraha iyo madadaalada naafada gaarka u ah, si looga midho dhaliyo, waa in lagu dhiiri geliyo tusaalaha, tababarka iyo kheyraadka ku haboon.

(J) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay tegi karaan goobaha ciyaaraha, madadaalada iyo dalxiiska.

(X) Xaqiijinta in caruurta naafada ah ay la siman yihiin caruurta kale ka qeyb qaadashada hawlaha madadalada, tamashlaha, iyo ciyaaraha, oo ay ku jiraan hawlaha nidaamka dugsiga.

(KH) Xaqiijinta in dadka naafada ah ay heli karaan adeegyada ay fuliyaan kuwa ku shaqada leh diyaarinta hawlaha madadaalada tamashlaha iyo ciyaaraha.

Qodobka 31 :- Xogta Iyo Xog Uruurinta

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay masuuliyad ka saran tahay uruurinta xogta ku haboon, oo ay ku jiraan, xogta daraasada iyo istaatikiska si ay u awoodaan dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha lagu dhaqan gelinayo Axdigan. Geedi-Socodka uruurinta iyo haynta xogta waa inay :-

(B) Waafaqsan yihiin ilaalinta sharciga la dejiyay, oo ay ku jiraan, sharciga xog ilaalinta, dhowrsanaanta, iyo xushmeynta arimaha gaarka u ah dadka naafada ah;

(T) Waafaqsan yihiin xeerarka caalamiga ee la isla ogolyahay ee ilaalinta xuquuqaha bini aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah iyo mabaadiida anshaxa uruurinta iyo adeegsiga xogta istatikiska.

2- Xota lagu soo ururriyay hab waafaqsan Qodobkan, waa in la isku cel-celiyo sida ay ugu haboon tahay loona adeegsado inay gacan ka geysato ukuur gelida

heerka hirgelinta waajibaadyada dawladaha ka qeyb galaya ee lagu xusay Axdigan, iyo in la isla muujiyo lana wajaho caqabadaha ay la kulmaan xuquuqahooda.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan masuuliyada gudbinta xogahan istaatikiskan iyo xaqiijinta inay heli karaan dadka naafada ah iyo kuwa kale.

Qodobka 32 :- Iskaashiga Caalamiga Ah

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay aqoonsadaan muhiimada iskaashiga caalamiga ah iyo kor u qaadistiisa, taageerada uu ka geysto dadaalada dalku kaga midho dhalinayo ujeedooyinka Axdigan, waana inay qaadaan talaabooyin ku haboon oo waxtar u leh arinta oo dhex mara dawladaha iyo inay kawada shaqeeyaan ururada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee ku haboon iyo bulshada rayidka ah, gaar ahaan, urarada dadka naafada ah. Talaabooyinkan ugu yaraan waa ina ay ku jiraan :-

(B) Xaqiijinta in iskaashiga caalamiga ah, oo ay ku jiraan, barnaamijyada horumarinta caalamiga ah,

ay ku jiraan kana faa'iideysan karaan dadka naafada ah.

(T) Fududeynta iyo taageerada kobcinta awooda, oo ay ku jirto, isdhaafsiga iyo wadaagista xogta, waaya aragnimada, barnaamijyada tababarka iyo tusaalooyinka wanaagsan.

(J) Fududeynta iskaashiga cilmi-baadhista iyo helitaanka aqoonta cilmiga iyo farsamada.

(X) U fidinta taageero dhaqaale iyo mid farsamo, oo ay ku jirto, fududeynta helitaanka iyo wadaagista tiknoolajiyada la heli karo ee gacan ka geysan karta iyo isu gudbinta tiknoolajiyadaha.

2- Shuruudaha qodobkan waxba uma dhimayaan waajibaadyada dawlad kasta ka saaran fulinta waajibadyadeeda ku xusan Axdigan.

Qodobka 33 :- Hirgelinta Iyo Dabagalka Wadanka

1- Dawladaha ka qeyb galaya iyagoo ka duulaya nidaamyadooda ururka, waa inay u xilsaaraan hal urur ama wax ka badan oo dawlada ka tirsan, arimaha ku saabsan hirgelinta Axdigan, waana inay taxadar haboon siiyaan aasaasida ama sameynta hanaan iskaashi oo dawlada dhexdeeda laga abuuro

si uu u fududeeyo talaabada khuseysa ee qeybaha kale duwan iyo heerarka kala duwan.

2- Dawladaha ka qeyb galaya, iyagoo ka duulaya nidaamyadooda sharciyeed iyo maamul, waa inay yeeshaan, xoojiyaan, dejiyaan ama aasaasaan qaab-dhismeed dalka gudihiisa ah, oo uu ka mid yahay, hay'ado madax banaan,oo kor uqaada, maaliyada isla markaana dabagal ku sameeya hirgelinta Axdigan. Marka la aasaasayo ama loo xilsaarayo hay'adan oo kale. Dawladaha ka qeyb galay waa inay ku xisaabtamaan mabaadiida ku saabsan noocyada iyo shaqooyinka laamaha dawlada ee ilaalinta iyo kor uqaadista xuquuqaha bini'aadamka.

Qodobka 34 :- Guddiga Xuquuqaha Dadka Naafada Ah

1- Waxaa la aasaasayaa guddiga Xuquuqaha Dadka Naafada ah (hada ka dib loogu yeedhayo"Guddiga"). Kaasoo ay tahay inuu fuliyo shaqooyinka halkan lagu siiyay.

2- Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa, wakhtiga dhaqan galka Axdigan, laba iyo Toban khabiir. Kadib ansixinta ama qaadashada Lixdanaad ee Axdigan,

xubinimada Guddiga waxaa ku kordhaya Lix xubnood, taasoo gaadhaysa tirada ugu sareysa oo ah sideed iyo toban xubnood.

3- Xubnaha Guddigu waa inay ku shaqeeyaan awoodooda shaqsi ahaaneed ayna ahaadaan kuwo damiir sare leh iyo karti iyo waaya aragnimo la aqoonsan yahay u leh mawduuca uu ku saabsan yahay Axdigan. Marka ay soo magacaabayaan musharaxiintooda dawladaha ka qeyb galaya, waxaa looga baahan yahay inay tixgelin haboon siiyaan shuruuda ku xusan qodobka 4 qodob-hoosaadkiisa 3aad ee Axdigan .

4- Xubnaha Guddiga waa inay doortaan dawladaha ka qeyb galaya, iyadoo tixgelin la siinayo qeybinta cadaaalada ah ee juqraafi ahaan wakiilada ilbaxnimooyinka kala duwan iyo Nidaamyada sharciyeed ee waaweyn, wakiilada jinsiga oo isu dheelitiran iyo ka qeyb galka khabiiro naafo ah.

5- Xubnaha Guddiga waxaa lagu dooranayaa cod qarsoodi ah iyadoo laga duulayo liiska dadka ay soo magacaabeen dawladaha ka qeyb galaya shirka ay isugu yimaadaan. Shirarkaas oo sadex dalool laba

tirada dawladaha ka qeyb galaya uu shirku ku qabsoomayo, dadka loo doortay Guddigu waxay noqonayaan kuwa hela tirade ugu badan codadka iyo aqlibiyada buuxda ee codadka wakiilada dawladaha ka qeyb galaya ee shirka yimid isla markaana codka dhiibtay.

6- Doorashada ugu horeysa waa in la qabto mudo aan ka danbaynin lix bilood ka dib dhaqan galka Axdigan-ugu yaraan afar bilood ka hor doorasho kasta xoghaya ha Guud ee Qaramada Midoobaay, waa in uu warqad u udiro dawladaha ka qeyb galaya, lagu martiqaadayo inay soo gudiyaan magacaabista mudo labbo bilood gudahood ah. Xoghayaha Guud, waa inuu diyaariyaa liiska shaqsiyaadka lasoo magacaabay oo xaraf ahaan ukala horeeya, muujinayana dawlada soo magacowday, waana inuu u gudbiyo liiska dawladaha ka qeyb galay Axdigan.

7- Xubnaha Guddiga Waxaa loo dooranayaa Muddo afar sanadood ah. Mar kale ayaa dib loo soo dooran karaa. Hase yeeshee mudada shaqo ee lix ka mid ah xubnaha lagu doortay doorashada ugu horeysa waxay ku eg tahay dhamaadka labo sanadood. Isla

marka ay dhacdo doorashada ugu horeysa kadib, Magacyada lixdan xubnood waa inuu doorto shir-gudoonka kulanka lagu xusay qodob – hoosaadka (5) ee Qodobka.

8- Doorashada lixda xubnood ee dheeriga ah waa in la qabta xilliga doorashooyinka caadiga ah iyadoo la raacayo shuruudaha la xidhiidha ee qodobkan.

9- Hadii xubin ka tirsan Guddiga uu geeriyoodo ama is casilo ama lagu dhawaaqo in uusan gudan karin shaqadiisa sabab kasta ha keentee. Dawlada soo magacowday xubinka waa inay soo xulato khabiir kale oo buuxinaya shuruudaha iyo aqoonta looga baahan yahay shuruudaha la xidhiidha ee qodobkan, si uu shaqada u wado wixii ka hadhay mudada.

10- Guddigu waa inay sameystaan habka xeerarkooda shaqo.

11- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu siiyo shaqaalaha iyo qalabyada lagama maarmaanka u ah habsami u fullinta hawlaha guddiga ee ku xusan Axdigan waana inay qabtaan kulankooda ugu horeeya.

12- Iyadoo uu ansixinayo kulanka loo dhan yahay, xubnaha Guddiga ee lagu aasaasay Axdigan, waa inay ka helaan gunooyin kheyraadka Qaramada Midoobay iyadoo la go'aaminayo xilliga iyo shuruudaha, tixgelina la siinayo muhiimada masuuliyadaha guddiga.

13- Xubnaha Guddigu waxay xaq u leeyihiin adeegyada, karaamada iyo xasaanada ay leeyihiin khabiirada hawl-wabeenada ah ee Qaramada Midoobay sida lagu xusay qeybaha khuseeya ee Axidiga ka hadlaya karaamada iyo xasaanada Qaramada Midoobay.

Qodobka 35 :- Warbixinada Dawladaha

1- Dawlad kasta waa inay Guddiga u soo gudbiso warbixin faahfaahsan oo ku saabsan talaabooyinka la qaaday si loo fuliyo waajibaadyadeeda ku xusan Axdigan iyo dadaalada laga sameeyay, iyadoo la sii marinayo xoghayaha Guud, laba sanno gudahood ka dib dhaqan galka Axdigan.

2- Wixii intaas ka danbeeya. Dawladaha ka qeyb galaya, waa inay warbixino xidhiidh ah soo gudbiyaan ugu yaraan afartii sanaba hal mar iyo mar kasta oo Guddigu ka codsado warbixin dheeri ah.

3- Guddigu waa inuu go'aamiyo habraacyada looga baahan yahay arimaha ay warbixinadu koobayaan.

4- Dawlada usoo gudbisya Guddiga warbixinta ugu horeysa oo faah-faahsan, loogama baahna warbixinadeeda danbe, inay mar labaad ku celiso xogta ay horey u bixisay.

   Marka ay Dawladuhu warbixino u diyaarinayaan Guddiga waa inay raacaan geedi-socod furan oo cad-cadaan leh, ayna tixgelin haboon siiyaan shuruudo ku xusan qodobka 4 qodob-hoosaadkiisa (3) ee Axdigan.

5- Warbixinada waxaa lagu muujin karaa arimaha caawinaya ama caqabadha saameynta ku leh heerka fulinta waajibaadyada ku xusan Axdigan.

Qodobka 36 :- Qiimeynta Warbixinada

1- Warbixin kasta waxaa qiimeynaya Guddiga oo soo jeedin iyo talooyin guud ka bixinaya warbixinta, hadba siday ku haboon tahay, una qudbinaya Dawlada ay khuseyso. Dawladuhu jawaab way ka bixin karaan xogta ay rabaan una gudbinayaan Guddiga. Guddigu wuxuu waydiisan karaa Dawladaha inay xog dheeraad ah oo ku saabsan hirgelinta Axdigan soo qudbiyaan.

2- Hadii ay Dawladi si muuqata u buun –buuniso soo gudbinta warbixinta, Guddigu wuxuu ku wargelin karaa Dawladaas baahida loo qabo in baadhitaan lagu sameeyo hirgelinta Axdigan ee wadanka gudihiisa, iyadoo laga duulayo xog lagu kalsoon yahay oo uu Guddigu hayo. Hadii warbixinta loo baahan yahay aan lagu soo gudbinin sadex bilood gudahood laga bilaabo wargelinta. Guddigu waa inuu ka dalbado Dawlada ay khuseyso ka qeyb qaadashada baadhitaanka. Marka Dawlada ay khuseyso jawaab ka bixiso iyadoo soo gudbinaysa warbixintii loo baahnaa, shuruudaha qodob –hoosaadka (1) ee qodobkan ayaa lagu dabakhayaa.

3- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu suurta geliyo in dhamaan Dawladuhu ay heli karaan warbixinada.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay warbixinadooda si balaadhan u gaadhsiiyaan dadweynaha wadamadooda ayna fududeeyaan helitaanka soo jeedinada iyo faalooyinka guud ee la xidhiidha warbixinada.

5- Guddiga waa inuu sida ugu haboon ee ay ula muuqato ugu gudbiyo hay'adaha, Sanduuqyada iyo barnaamijyada Qaramada Midoobay ee ku shaqada leh iyo hay'adaha kale ee awooda u leh warbixinada ka yimid Dawladaha, si looga jawaabo codsiga ama baahida loo qabo talo farsamo ama taageero ee warbixinada lagu dhex sheegay, iyadoo la raacinayo indha indhaynta iyo talooyinka Guddiga, hadii ay jiraan.

Qodobka 37 :- Iskaashiga Ka Dhexeeya Dawladaha Iyo Guddiga

1- Dawlad kasta waa inay iskaashi la yeelato Guddiga kana caawiso xubnaha Guddiga fulinta awoodahooda.
2- Guddigu xidhiidhka uu la yeelanayo Dawladaha waa inuu tixgelin siiyo qaababka iyo aaladaha kor loogu qaadayo awoodaha dalka si loo hirgeliyo Axdigan, oo ay ku jirto, iskaashi, caalami ah.

Qodobka 38 :- Xidhiidhka Guddigan La Yeelanayo Hay'adaha Kale

Si loo dar-dar geliyo habsami u hirgelinta Axdigan, loona dhiiri geliyo iskaashiga caalamiga ah ee arimaha lagu xusay Axdigan :-

(B) Hay'adaha ku shaqada leh iyo laamaha kale ee Qaramada Midoobay waa inay wakiilo u matalaan qiimeynta hirgelinta shuruudaha Axdigan, wixii ka khuseeya xadka awooda hooda. Guddigu wuxuu weydiisan karaa hay; adaha ku shaqada leh iyo kuwa kale ee awooda u lehba inay talo khabiir ka siiyaan hirgelinta Axdigan meelaha hoos imanaya awoodahooda. Guddiga wuxuu weydiisan karaa hay'adaha ku shaqada leh iyo laamaha kale ee Qaramada Midoobay in ay warbixino kasoo siiyaan hirgelinta Axdigan. Meelaha hoos imanaya xadka shaqooyinkooda.

(T) Guddigu si uu u guto awoodihiisa, waa inuu la tashiyo la sameeyo-hadba sida ugu haboon, hay'adaha kale ee ka shaqeeya laguna aasaasay Axdiyada Caalamiga ah xuquuqaha bini'aadamka, si loo xaqiijiyo is-waafaqsanaanta hab-raacyada warbixintooda, soo jeedinada, iyo talooyinka guud iyo iska ilaalinta ku cel-celinta iyo isku dul dhaca shaqooyinkooda waxqabadka.

Qodobka 39 :- Warbixinta Guddiga

Guddigu waa in uu labadii sano ee kastaba warbixin siiyo kulanka loo dhan yahay iyo Golaha arimaha Bulshada iyo Dhaqaalaha, oo ku saabsan shaqooyinkiisa, wuxuuna sameyn karaa soo jeedino iyo talooyin guud oo ku saleysan qiimeynta warbixinada iyo xogta laga helay dawladaha ka qeyb galaya. Soo jeedinada iyo talooyinkan guud waa in lagu daro warbixinta guddiga dhexdeeda, iyadoo la raacinayo hadii ay jiraan talooyin ay bixinayaan dawladaha ka qeyb galaya.

Qodobka 40 :- Shirka Dawladaha ka Qeyb Galaya

1- Dawladaha ka qeyb waa inay si joogta ah ugu shiraan si looga wada hadlo arimaha la xidhiidha hirgelinta Axdigan.
2- Mudo aan ka danbaynin lix bilood ka dib dhaqan galka Axdigan shirka dawladaha waa inuu furaa xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay. Kulamada ka danbeeya waa inuu xoghayaha Guud uu furaa sanadkiiba hal mar ama xilliga ay go'aansadaan dawladaha ka qeyb galaya shirka.

Qodobka 41 :- Cidda Haynaysa Axdiga

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu noqdo cidda haynaysa Axdigan.

Qodobka 42 :- Saxiixa axdigani

waa inuu u furnaado saxiixida dhamaan dawladaha ka qeyb galay iyo urur goboleedyada, kuna saxiixaan xarunta Qaramada Midoobay ee New York Markay taariikhdu tahay 30 – Ka Maarso 2007 – da.

Qodobka 43 :- Ogolaanshaha u Hogaansamida

Axdigan waa inay ansixiyaan dawladaha saxiixay ayna ogolaansho rasmi ah ka dhiibtaan urur goboleedyada saxiixay. Waa inuu u furnaado qaadashada dawlada ama urur goboleedka aan horey u saxiixin Axidigan.

Qodobka 44 :- Ururo – Goboleedyada

1- "Urur Goboleed" Waxaa loola jeedaa urur ay dhisteen Dawlado Madax banaan oo isku gobol ah kaasoo dawladaha xubnaha ka ah ay u wareejiyeen awooda ku saabsan arimaha lagu xusay Axdigan. Ururada noocan ah waa inay xeerarkooda si rasmi ah ugu dhawaaqaan, ansixinta ama qaadashada,

baaxada awoodooda ee arimaha lagu xusay Axdigan. Wixii intaas ka danbeeya, waa inay ku wargeliyaan cidda haysa Axdigan wax ka bedelka baaxada awoodooda.

2- Axdigan dhexdiisa awoodaha lagu siiyay "Dawladaha ka qeyb galaya" Waa in lagu dabakho iyagana ururada noocan ah illaa iyo xadka awoodahoodu gaadhsiisan yihiin.

3- Ujeedooyinka Qodobka 45 qodob – hoosaadkiisa (1) iyo Qodobka 47 qodob – hoosaad yad iisa (2) iyo (3) qoraal kasta oo ay u dhigaan urur – goboleedyadu, lama tirsanayo.

4- Urur – goboleedyadu, arimaha ay awoodoodu daboolayso, way adeegsan karaan xaqa ay u leeyihiin inay cod ka dhiibtaan shirka dawladaha ka qeyb galaya, iyagoo yeelanaya tiro cod ah oo u dhiganta tirada dawladaha xubnaha ka ah ururka ee qeyb ka ah Axdigan. Ururada noocan ah, waa inayna adeegsan xuquuqda cod –bixinta hadii dawlada xubin ka ah ay adeegsatay xaqa codeynta, waana inayna dawladaha adeegsan xaqan hadii ururku uu adeegsaday.

Qodobka 45 :- Dhaqan –Galka

1- Axdigani Wuxuu dhaqan gal sharciyeed yeelanayaa maalinta sodonaad kadib dhigitaanka labaatanaad ee qoraalka ansixinta ama qaadashada.

2- Dawlad ama urur – goboleed kasta oo ansixinaya, si rasmi ah uu ogolaanaya ama qaadanaya Axdigan wixii ka danbeeya dhigitaanka qoralka labaatanaad, Axdigani wnxuu ka dhaqan galayaa dhinacooda maalinta sodonaad kadib markay dhigaan qoraalkooda arintan ku saabsan.

Qodobka 46 :- Afeef Dhigashada

1- Afeef dhigashooyinka aan la socon karin nuxurka iyo ujeedooyinka Axdigan waa mid aan la ogolaan Karin.

2- Afeef – dhigashooyinka waa laga noqon karaa wakhti kasta oo la damco

Qodobka 47 :- Dibu –Habeynada

1- Dawlad kasta oo qeyb ka ah Axdigan waxay soo jeedin kartaa wax ka bedel lagu sameeyo Axdigan una soo gudbinaysaa xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xoghayaha Guud waa in uu gaadhsiiyo wax ka bedel kasta oo lasoo jeediyay Dawladaha ka

qeyb galaya taasoo lagaga codsanayo inay soo sheegaan hadii ay door bidayaan shir ay isugu yimaadaan dawladaha ka qeyb galaya oo ujeedadiisu tahay falanqeynta iyo ka go'aan gaadhista soo jeedinada. Xaalada ay afar bilood gudahood oo ka bilaabanta gaadhsiintan, ugu yaraan sadex dalool hal neel ah oo dawladaha ka qeyb galaya ay door bidaan shirka, xoghayaha Guud waa inuu furaa shirka isagoo la kaashanaya Qaramada Midoobay. Wax ka bedel kasta oo ay isla qaataan aqlabiyada sadex dalool labba meelood ee dawladaha kasoo qeyb galay codkana ka dhiibtay waa inuu xoghayaha Guud u gudbiyaa kulanka loo dhan yahay si ay u ansixiyaan iyo kadib dhamaan dawladaha ka qeyb galaya si ay ogolaansho u bixiyaan.

2- Wax ka bedelida la isla qaatay laguna ansixiyaya hab waafaqsan Qodob-hoosaadka (1) ee Qodobkan, waxay dhaqan galaysaa maalinta sodonaad ka dib markay tirade qoraalada ogolaanshaha loo dhigay ay gaadho sadex dalool labba meelood tirade Dawladaha wakhtigii la isla qaatay wax ka bedelku wuxuu ka dhaqan galayaa Dawlada ka qeyb galaysa

maalinta sodonaad kadib markay dhigto qoraalkeeda ogolaanshaha. Wax ka bedelku wuxuu qabanayaa oo keliya Dawladaha ka qeyb galay ee ogoloaday.

3- Hadii Dawladaha ka qeyb galay ay sidaas go'aan loo dhan yahay ku qaataan, wax ka bedelka la isla qaatay laguna ansixiyay hab waafaqsan qodob-hoosaadka(1) ee qodobkan, kaasoo si gaar ah u khuseeya Qodobada 34,38,39,iyo 40, wuxuu ka dhaqan galayaa dhamaan Dawladaha ka qeyb galaya maalinta sodonaad ka dib markay tirada qoraalada ogolaanshaha loo dhigay ay gaadho sadex dalool labba meelood tirada Dawladaha ka qeyb galay isla qaadashada wax ka bedelka.

Qodobka 48 :- Ka Noqoshada

Dawlad qeyb ka ah waxay kaga noqon kartaa /bixi kartaa wargelin qoral ah oo ay u gudbinayso xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Ka noqoshadu waxay dhaqan galaysaa hal sano ka dib taariikhda ay soo gaadhay wargelintu xoghayaha Guud.

Qodobka 49 :- Qaab La Adeegsan Karo

Qoraalka Axdigan waa in laga dhigo qaabab la adeegsan karo oo la heli karo.

Qodobka 50 :- Qoraalada Asalka ah

Qoraalada Carabiga, Shiinaha, lngiriiska, Faransiiska, Ruushku iyo Isbaanishka ee Axdigan waxay noqonayaan kuwo asal ahaan siman. Iyadoo ay maragyo ka yihiin ergooyinka hoosta ku saxiixan ee sida sharciga ah ugu awoodsiiyeen Dawladahooda ay matalayaan, ayaa saxiixay Axdigan.

Bayaanka Ansixinta Axdiga Xuquuqaha Dadka Naafada ah

Maadaama, Axdiga Xuquuqaha Dadka Naafada uu isla qaaatay kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay maalinta **13aad** ee Disembar **2006**;

Maadaama, Aqalka Wakiilada Shacabka ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federalka Itoobiya uu ansixiyay Axdigan Faahigiisii uu yeeshay 1- da Juun 2010.

1- Cinwaan Gaaban

   Bayaanka waxaa loogu yeedhi karaa "Bayaanka Xuquuqaha Dadka Naafada ah. Bayanka Ansixinta Tirsi 676/2010".

2- Ansixinta Axdiga

Axdiga Xuquuqaha Dadka Naafada ah ee uu isla qaatay kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay 13-ka Disembar 2006, ayaa halkan lagu ansixiyay.

3- Awooda Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Waxaa halkan awood loogu siiyay inay qaado dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah hirgelinta Axdigan.

4- Taariikhda Dhaqan Galka
Bayaankani Wuxuu dhaqan galayaa taariikhda lagu soo daabaco wargeyska Negarit ee Federaalka.

Addis Ababa 11 – ka Juun 2010
Girma Woldegiorgis
Madaxweynaha Jamhuuriyada
Dimuqraadiga Federaalka
Itoobiya

AXDIGA XUQUUQAHA CARUURTA

Kullanka Loo Dhan Yahay ee Qaramada Midoobay

Dukuminti A/RE5144125(12 December 1989)

Lifaaqa la socda

Kullanka loo dhan yahay

Isagoo soo xiganaya bayaanadiisii hore, gaar ahaan bayaanada 33/166 q 20 –ka december 1978 iyo 43/112 ee 8-da december 1988, iyo kuwa komishinka xuquuqaha aadamaha iyo kuwa golaha arimaha dhaqaalaha iyo bulshada ee ku saabsan su,aasha axdiga xuquuqaha caruurta.

Iyadoo fiiro gaar ah la siinayo bayaanka komishinka xuquuqaha aadamaha 1989/57 ee 8-ed march 1989 kaasoo komishinka ku go'aansaday inuu ugu gudbiyo kullanka loo, dhan yahay axdiga qabyada ah ee xuquuqaha caruurta isagoo u sii marinaya golaha arrimaha dhaqaalaha iyo bulshada oo isaguna bayaan kasoo saaray kaasoo ah 1989/79 ee 24-ka may 1989.

Iyadoo markale la xusayo in xuquuaqaha caruurtu ay u baahan yihiin ilaalin ugaar ah laguna baaqayo in la sameeyo horumarin joogta ah oo ku wajahan xaalada caruurta ee aduunka oo dhan iyo sidoo kale horumarintooda iyo

waxbarashadooda oo xaalad nabadgeliyo iyo degenaansho leh.

Iyadoo si, qoto dheer loo tixgelinayo in qeybo badan oo aduunka ah xaalada caruurtu ay tahay mid qalafsan taaso ka dhalatay ku filaansho la'aanta duruufaha bulsheed, masiibooyin dabiici ah, iska horimaadyo hubeysan, ku shaqeysigu, aqoon la'aanta, gaajada iyo naafanimada, la isku qanciyay in talaabo degedeg ah oo, wax ku ool ah, heer wadan iyo heer caalami, lagu baaqo in la qoodo.

Iyadoo laga warqabo doorka muhiimka ah ee Sanduuqa Caruurta Qaramada Midoobay (unicef) iyo kan Qaramada Midoobay ee ay kar ugu qaadayso nolosha cauurta iyo horumarintooda.

Iyadoo lagu qancay in axdiga caalamiga ah ee xuquuquha caruurta ay qaramada midoobay ka dhigato hal-beega fulineed ee dhinaca xuquuqaha aadamaha taasoo kaalin wanaagsan ka qaadanaysa ilaalinta xuquuqaha caruurta xaqiijinaysana wanaagooda.

Iyadoo maskaxda lagu hayo in sanadka 1989 uu yahay sanad guurada sadex iyo tobnaad ee baaqa xuquuqaha caruurta iyo toban sano guurada sanadka caalamiga ah ee caruurta.

1. Golaha loo dhan yahay wuxuuu xusayaa inuu u bogay komishinka xuquuqaha aadamaha oo soo gunaanaday diyaarinta axdiga qabyada ah ee xuquuqaha caruunta.
2. Wuxuu ogolaaday, loona furay in la saxiixo, la ansixiyo iyo laguna dhaqmo axdiga xuquuqaha caruurta ee ku xusan lifaaqa bayaankan.
3. Waxaa loogu baaqayaa wadamada xubnaha ka ah inay u tixgeliyaan saxiixida iyo ansixinta axdiga arin mudnaan gaar ah leh ayna muujiyaan rajada ah in ay si dhakhsa leh u dhaqan gelinayaan.
4. Waxaa laga codsanayaa, xoghayaha guud inuu suurta geliyo dhamaan agabyada iyo taakuleynta lagama maarmaanka u ah gudbinta xogta axdiga.
5. Waxaa lagu marti qaadayaa ururada iyo hay'adaha Qaramada Midoobay, iyo sidoo kale ururada dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn, inay dardar getiyaan dadaaladooda ku wajahan gudbinta iyo faafinta xogta axdiga ayna kordhiyaan fahamkiisa.
6. Waaxaa laga codsanayaa xoghayaha guud in uu u gudbiyo kalfadhiga afartan iyo shannaad ee golaha

loo dhan yahay, warbixin ku saabsan xaalada axdiga xuquuqaha caruurta.

7. Waxaa la isku afgartay in warbixinta xoghayaha guud ee kalfadhiga afartan iyo shanaad loo tixgeliyo inay tahay xaalad loogu talagalay "hirgelinta axdiga xuquuqaha caruurta"

Kulanka 61aad

20 ka November 1989.

Lifaaqa

Axdiga Xuduuqaha Caruurta

Gogol – dhig

Dawladaha aka qeyb galaya axdigan :-

Iyadoo la tixgelinaya in, hab waafaqsan mabaadiida lagu bayaamiyay axdiga Qaramada Midoobay, aqoonsiga karaamada aan laga qaadi karin iyo u sinaanta xuquuqaha ee dhamaan xubnaha qoyska bini,aadamku ay aasaas u tahay xoriyada, cadaalada iyo nabadgeliyada aduunka.

Iyagoo maskaxda ku haya in dadyowga Qaramada Midoobay ay dib ugu xaqiijiyeen axdiga dhexdiisa aamin sanantooda xuquuqaha aasaasiga ah ee bini'aadanka iyo karaamada iyo qiimaha qofka bini'aadanka ah, ayay go'aansadeen in ay meel

mariyaan horumar bulsho iyo halbeegyo waxtar u leh nolosha oo xoriyad balaadhan leh.

Iyagoo aqoonsan in Qaramada Midoobay ay baaqa caalamiga ah ee xuquuqaha aadamaha, ku bayaamisay laguna heshiisay inuu-qof kosta xaq u leeyahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyaadka halkaas lagu xusay, iyadoo aysan jirin wax kala soo cid ah nooc kasta ay tahay sida qolo, midab, jinsi, luuqad, diin, siyaasad, ama aragti kale, dhalasho ama bulshada uu asal oga soo jeedo, hantida, ama xaalado kaleba.

Iyagoo xusuusan in Qaramada Midoobay ay ku dhex bayaamisay baaqa caalamiga ah ee xuquuqaha aadamaha in caruurnimadu ay mudan tahay daryeel iyo taakuleyn gaar ah.

Iyagoo ku qanacsan in qoyska oo ah unug bulsho oo aasaasi ah iyo jawiga dabiiciga ah ee koritaanka iyo badhaadhaha dhamaan xubnaha bulshada, gaar ahaan, caruurta ay tahay waajib in la siiyo ilaalinta lagama maarmaanka ah iyo taakuleyn si ay si buuxda dusha ugu ritaan masuuliyaadooda bulshada ka saaran.

Iyagoo garwaaqsan in ilmaha horumarka, caafimaadka qaba ee shaqsiyadiisu ay ku korayso jawi qoys, goobta farxadeed, jaceyl iyo is fahamsanaan.

Iyagoo tixgelinaya in ilmaha si dhameystiran loogu diyaariyo in uu nolol dadnimo kaga dhex noolaado bulshada, laguna bar-baariyo nuxurka mabaadiida lagu bayaamiyay axdiga Qaramada Midoobay, gaar ahaan damiirka, nabada, sharafta, dulqaadka, xoriyada, sinaanta iyo midnimada.

Iyagoo maskaxda ku haya in baahida loo qabo in la balaadhiyo daryeel gaar ah oo ilmaha la siiyo, lagu xusay baaqa Geneva ee xuquuqaha caruurta 1924, iyo baaqa xuquuqaha caruurta ee uu ansixiyay kulanka loo dhan yahay 20-ka november 1959, laguna aqoonsaday gudaha baaqa caalamiga ah ee xuquuqaha. aadamaha, axdiga caalamiga ee xuquuqaha madani iyo kuwa siyaasadeed (gaar ahaan qodobada 23 iyo 24), axdiga caalamiga ah ee xuquuqaha dhaqan-dhaqaale iyo bulshadeed(gaar ahaan qodobka 10) iyo xeerarka iyo hab-raacyada hay'adaha ku shaqada leh iyo ururada caalamiga ee danaynaya wanaaga caruurta.

iyagoo maskaxda ku haya in sida lagu xusay baaqa xuquuqaha caruurta, "ilmuhu, sabab jidhkiisa iyo maskaxdiisa oo aan qaan-gaadh ahayn, awgeed, wuxuu u baahan yahay ilaashimo, iyo daryeel, gaar ah, oo ay ka mid yihiin, ilaalin sharci oo haboon, intuuna dhalan iyo weliba dhalashada ka diba.

Iyagoo ka duulaya qodbada baaqa mabaadiida bulshadeed iyo sharciyeed ee la xidhiidha ilaalinta iyo horumarinta caruurta, iyadoo si gaar ah loo soo xiganayo xeerarka maamulka cadaalada da'yarta ee Qaramoda Midoobay (xeerasha Beijing) iyo baaqa ilaalinta haweenka iyo caruurta ee xaaladaha deg-dega ah iyo iska hor imaadyada hubaysan.

Iyagoo aqoonsan, in dhamaan dalalka aduunka ay jiraan caruur ku nool xaalado qalafsan, oo gaar ku ah iyo in caruurtaasi ay u baahan yihiin tixgelin gaar ah.

Iyagoo ku xisaabtamaya muhiimada caadooyinka iyo dhaqamada bulsho kasta u leedahay ilaalinta iyo horumarinta fayow ee ilmaha.

Iyagoo aqoonsan ahmiyada iskaashi caalami ah oo laga yeesho hagaajinta xaaladaha nolosha ee caruurta dalkasta, gaar ahaan dalalka soo koraya.

waxay ku heshiiyeen sidan soo socota:-

Qaybta 1aad

Qodobka 1-

Hadii uusan sharciga lagu dabakhayo ilmaha, qaan-gaadh-nimada u aqoonsanayn da'da ka hooseysa, ujeedooyinka axdigan, ilmo waxaa loola jeedaa qof kasta oo bini'aadam ah oo ka yar da'da sideed iyo toban jirka.

Qodabka 2-

1. Dawladaha ka qeyb galaya axdigan waa inay xushmeeyaan ayna xaqiijiyaan xuquuqaha uu axdigani siinaya caruurta ku dhaqan dalkooda iyadoo aan lagu sameynin wax kala soocid ah nooc kasta ha noqoto, isla markaana aan la eegaynin ilmaha ama waalidka, dhalay ama ilaaliyaha sharciga ah qolada, midabka, jinsiga, luuqada, diinta, siyaasada ama aragtida kale, wadanka, qowmiyada ama bulshada uu ka soo jeedo, hantida, naafanimada, dhalashada ama xooladaha, kale.
2. Dawladahaka qeyb galaya, waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xaqiijinayo in ilmaha laga ilaaliyay dhamaan nooc kasta oo midab takoor ah ama ciqaab ah oo loogu geysanayo xaalada, hawlaha, fikirada kasoo baxay ama caqiidada waalidiinta, ilaaliyayaasha sharciyeed ama xubnaha qoyska ilmaha.

Qodobka 3-

1. Dhamaan hawlaha khuseeya caruurta, ha fuliyaan hay'adaha dawliga ah ama kuwa aan dawliga ahayn, maxkamadaha sharciga, maamulada ama hay'adaha

sharci dejinta, waa in mudnaanta koowaad la siiyo meesha ay ku jirto danta ugu wanaagsan ee ilmaha.

2. Dawladaha ka qeyb galaya waxay xaqiijiqayaan ilaalinta ilmaha iyo daryeelka lagama maarmaanka u ah wanaagiisa, iyagoo ku xisaabtamaya xuquuqaha iyo waajibaadyada waalidka, ilaahyeyaasha sharciyeed, ama shaqsiyaadka kale ee sharci ahaan masuulka ka ah ilmaha, waana inay dawladuhu qaadaan dhamaan talaabooyinka sharciyeed iyo maamuleed ee ku haboon.
3. Dawladaha ka qeyb galaya, waa inay xaqiijiyaan in ururada, adeegyada iyo machadyada u xilsaaran daryeelka ama ilaalinta caruurta, ay waafaqsan yihiin heerarka ay u dejisay hay'ada u awooda leh, gaar ahaan meelaha ku aadan amniga, badbaadada, caafimaadka, tirade iyo ku haboonaansha shaqaalahooda iyo weliba dabagal awood leh.

Qodobka 4-

dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka haboon ee sharciyeed, maamul ama kuwa kale ee lagu hirgelinayo xuquuqaha lagu aqoonsaday axdigan. dhinaca xuquuqaha dhaqan-dhaqaale iyo kuwa bulshadeed

dawladaha ka qeyb galaya, waa inay qaadaan talaabooyinka ugu sareeya ee ilaalinta ay kheyraadka u heeli karaan, iyo marka loo baahdo ilaa iyo xadka iskaashiga caalamiga ah.

Qodobka 5-

Dawladaha ka qeyb galaya, waa inay xushmeeyaan masuuliyadaha, xuquuqaha iyo waajibaadyada waalidka ama meelaha qaarkood, xubnaha qoyska balaadhan ama bulshada sida uu yahay dhaqanka deegaanku, ilaaliyeyaasha sharciyeed ama dadka kale ee sharci ahaan masuul ka ah ilmaha, inuu siiya tilmaan iyo hagitaan ku haboon isla markaana la jaan qaadaysa awoodaha soo kordhaya ee ilmaha isagoo adeegsanaya xuquuqaha lagu aqoonsaday axdigan dhexdiisa.

Qodobka 6-

1. Dawladah ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin in ilmo kasta uu xaq u leeyahay inuu noolaado.
2. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan ilaalinta ay suurto gal tahay, badbaadada iyo horumarka ilmaha.

Qodobka 7-

1. Ilmaha waa in sida ugu dhakhsaha badan marka uu dhasho kadib loo diiwaan geliyo, wuxuuna yeelanayaa xuquuq in magac loo bixiyo laga bilaabo dhalashada, inuu helo muwaadinimo iyo hadba sida ugu suurta galsan inuu aqoonsado oo ay daryeelaan waalidkiisa.
2. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xagiijiyaan hirgelinta xuquuqahan hab waafaqsan sharciga wadamadooda iyo waajibaadyadooda ku xusan axdiyada caalamiga ah ee arintan la xidhiidha, gaar ahaan hadii ilmaha ay dhici karto inuusan wadan lahayn.

Qodobka 8-

1. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xushmeeyaan xaqa ilmuhu u leeyahay dhowrista hayb-soo ciisa, oo ay ka mid yihiin, dhalashada, magaca iyo xidhiidhada qoyska sida uu sharciga dhigayo, iyadoo aan lagu samayn karin faraglin sharciga ka baxsan.
2. Hadii ilmaha si sharciga ka baxsan looga xayuubiyo qeybo ka mid ah ama dhamaan calaamadaha hab soo ciisa, dawladaha ka qeyb galaya kulanka, waa inay u

fidiyaan taakuleynta iyo ilaalinta ku haboon si uu deg-deg ugu soo ceshado hayb-soo ciisa.

Qodobka 9-

1. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiijiyaan in ilmaha aan laga kaxeyn karin waalidiinta dhasha, iyagoon raali ka ahayn, marka laga reebo hadii ay hay'ad u awood leh, oo sharciga ka shaqeeysa ay go'aan waafaqsan sharciga iyo hababka ku haboon, ku gaadho in kala kaxeyntani ay lagama maarmaan u tahay danta ilmaha. Go'aanka noo can ah wuxuu lagama maarmaan noqonayaa xaalado gaar ah sida marka ay dhacdo in ilmaha ay ku xad-gudbaan ama xaqiraan waalidku ama marka waalidku laba goobood ku kala nool yihiin ayna muhiim tahay in go'aan laga gaadho meesha uu ilmuhu degenaanayo.
2. Dacwad kasta oo waafaqsan qodob-hoosaadka 1aad ee qodobkan, dhamaan dhinacyada danaynaya waa in la siiyo fursad ay kaga qeyb galaan dacwada, kuna soo gudbiyaan aragtidooda.
3. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xushmeeyaan xaqa ilmaha laga kaxeynayo mid ka mid ah ama labada waalidba, inuu sii jiro xidhiidhka shaqsiyeed

lana sameeyo xidhiidh toos ah labada waalidba kaasoo noqonaya mid joogta ah, marka laga reebo hadii ay wax u dhimayso danaha ilmaha.

4. Marka kala kaxeyntani ay ka dhalatay talaabo ay qaaday hay'ad dawli ah, sida qabasho, xadhig, caydhin, masaafurin ama dhimasho (ay ka mid tahay geerida ku timaada qofka, inta uu ku xidhan yahay goob dawladeed) lasoo derista mid ama labada waalid ee ilmaha, waa in dawladaha ka qeyb galaya, marka laga codsado ay siiyaan waalidka, ilmaha ama hadii loo baahdo qof kale oo qoyska ka mid ah xogta muhiimka ah ee ku aadan halka uu ku sugan yahay xubinka maqan, hadii xogtu aysan waxyeelo ku ahayn, wanaaga lmaha. Dawladaha ka qeyb galay waa inay sidoo kale xaqiijiyaan in soo gudbinta codsigani uusan saamayn guracan ku yeelanin dadka uu khuseeyo.

Qodobka 10-

1. Iyadoo laga duulayo waajibadka dawladaha ka qeyb galaya ee ku xusan qodobka 9aad qodob-hoosaadkiisa 1aad, codsiyadaha ilmaha ama waalidku ku codsanayaan in uu soo galo ama ka baxo

dalka si uu dib ugula midoobo qoyskiisa, waa inay dawladaha ka qeyb galaya ay u maareyso hab dabacsan, bini aadanimo iyo deg-degsiimo ku jirto. Sidoo kale dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqiiyiyaan in soo gudbinta codsiga noocan ah uusan saameyn guracan ku yeelanin codsadayaasha iyo xubnaha qoyskooda.

2. Ilmaha ay labadiisa waalid ku kala nool yihiin dalal kala duwan wuxuu xaq u leeyahay in uu xidhiidh joogta ah la sameeyo waalidka, duruufo gaar ah mooyee iyadoo laga duulayo waajibaada dawladaha ka qeyb galaya ee ku xusan qodobka 9aad qodob-hoosaadkiisa 1aad waa inay xushmeeyaan xaqa ilmaha ama waalidkiisa inay ka tagaan dalka ayna galaan dalkale oo uu ka mid yahay dalkooda- xaga ka tegitaanka dalkasta waa inaan lagu sameynin wax hor istaagid oo aan ka ahayn kuwa sharcigu qeexayo ee lagama maarmaanka u ah ilaalinta amniga qaranka, kaladanbaynta,caafimaadka dadka kale, ayna waafaqsan yihiin xuquuqaha kale ee lagu aqoonsaday axdigan.

Qodobka 11-

1. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyin ay ku joojinayaan bixinta iyo soo celin la'aanta sharci darada ah ee ilmaha dibada lagu geynayo.
2. Dawladaha ka qeyb galaya, si ay arintan u fulliyaan waa inay meel mariyaan heshiisyada labada dhinac ama dhinacyada badan ama heshiisyadii horey u sii jiray.

Qodobka 12-

1. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u xagiijiyaan ilmaha awoodi kara inuu qaabeeyo aragtidiisa, xaqa uu ku soo bandhigi karayo aragtiyadiisa si sax ah dhamaan arimaha saameynaya ilmaha, aragtiyadaha ilmaha waa in la siiyo miisaan ku haboon iyadoo laga duulayo da'da iyo qaan-gaadhnimada ilmaha.
2. Si loo gaadho ujeedadan, waa in ilmaha si gaar ah loogu fidiyo fursad lagu dhegeysanayo marka lagu guda jiro geedi-socodyada dacwadeed iyo maamul ee saameynaya ilmaha, si toos ah ama iyadoo wakiil loo sameynayo, ama hay'ada ku haboon iyadoo la

raacayo qaab waafaqsan sharciga habka ee dalka u yaala.

Qodobka 13 -

1- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay xoriyada hadalka fikirka xuquuqdan waxaa ka mid noqoyaysaa xoriyada raadinta, helida iyo gudbinta xogta iyo fikradaha nooc kasta, iyadoo aan la eegaynin xeyn-daabyada, haday qoraal, af ahaan ama daabacaad yihiin, qaab farshaxan ah ama warbaahin kale oo uu ilmuhu door biday.

2- isticamalka xuquuqdan waxaa loo yeeli karaa xeyn daabyo kooban, lakiin waa inay noqdaan keliya kuwo sharciga lagu xusay oo lagama maarmaan ah:-

   A. xushemynta xuquuqaha iyo sumcada dadka kale ama

   B. ilaalinta amniga qaranka ama kala danbaynta ama caaafimaadka dadweynaha ama damiirka dadka.

Qodobka 14 –

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xushmeeyaan xaqa ilmuhu u leeyahay fikirka, garashada iyo diinta.

2- dawladaha ka qeyb galaya waa inay xushmeeyaan xuquuqaha iyo waajibaadyada waalidiinta iyo marka ay jirto tan ilaaliyeyaasha sharciyeed, inay siiyaan tilmaamo ilmaha iyagoo ugu gudbinaya hab waafaqsan aqoontiisa soo kordhoysa ee ilmaha.

3- Xoriyada qofku u leeyahay diinta ama caqiidada uu qaadanayo waxaa lagu xakameyn karaa oo keliya xeyn-daabyada uu sharcigu dhigay ee lagama maarmaanka u ah ilaalinta amniga qaranka, kala danbaynta, caafimaadka, ama damiirka, ama xuquuquha iyo xoriyadaha aasaasiga ah ee dadka kale.

Qodobka 15-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xuquuqaha ilmuhu u leeyahay xoriyada urur iyo isu soo baxa nabad geliyada ah.

2- Ma jirayo wax xeyn-daabyo ah oo la saarayo isticmaalka xuquuqahan oo aan ka ahayn kuuwa lagu soo rogay hab waafaqsan sharciga oo logama maarmaan u ah bulsho dimoqraadi ah danaha amaanka qaranka ama badbaadada shacabka, kala danbaynta, ilaalinta caafimaadka dadweynaha ama

damiirka ama ilaalinta xuquuqaha iyo xoriyaadka dadka kale.

Qodobka 16-

1- Ilmaha waa inaan lagu sameyn faragelin sharciga ka baxsan ama aan loo baahnayn, arimihiisa gaarka ah, qoyskiisa, hoygiisa ama xidhiidhkiisa, waana inaan loo geysanin weeraro sharci daro ah sharaftiisa iyo sumcadiisa.
2- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay ilaalin sharciyeed oo ku aadan faragelintan iyo weeraradan

Qodobka 17-

Dawladaha ka qeyb galay iyagoo aqoonsan shaqada muhiimka ah ee ay qabato warbaahintu, waa inay xaqiijiyaan inuu ilmuhu xogaha gaarka ah ee loogu talagalay kor aqaadista waayahiisa bulsho, demiir iyo caafimaadka jidh iyo maskax ahaanba, ka heli karo ilo kala gedisan dalka iyo dibadaha ah si loo meel mariyo arintan dawladaha ka qeyb galaya waa inay:-

A. Dhiiri geliyaan in warbaahintu ay ilmaha caruurta u gudbiso xog iyo bandhigyo faaiido bulsho iyo dhaqan u leh oo waafaqsan nuxurka qodobka 29.

B. Dhiiri geliyaan iskaashiga caalamiga ah ee soo saarista, isweydaarsiga iyo isu gudbinta xogtan iyo bandhigyadan iyadoo la adeegsanayo ilo kala gedisan oo dhaqameed, wadan ahaan iyo caalami ahaanba.

C. Dhiiri geliyaan soo saarista iyo isu-gudbinta buugaagta caruurta.

D. Dhiiri geliyaan in warbaahintu tixgelin gaar ah siiso baahiyaha luuqadeed ee ilmaha kasoo jeeda kooxaha laga tirada badan yahay ama af gaar ah leh.

E. Dhiiri geliyaan horumaninta hab-raacyo ku haboon ilaalinta ilmaha laga ilaalinayo xogta iyo bandhiga dhaawacayo ama khatarta ku ah wanaagiisa, iyadoo maskaxda lagu hayo xaaladaha ku xusan qodobada 13 iyo 18.

Qodobka 18-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay adeegsadaan dadaalkooda ugu wanaagsan si ay u xaqiijiyaan aqoonsiga mabda'a labada waalid masuuliyado wadajir ah ka saaran yihiin korinta iyo horumarinta ilmaha, waalidka ama ilaaliyayaasha sharciyeed, waxaa saaran

masuuliyada ugu horeysa ee korinta iyo horumarinta ilmaha, danaha ugu wanaagsan ee ilmaha ayay mudnaantoodu noqonaysaa.

2- Si ay waalidinta oga soo baxaan una horumariyaan xuquuqaha lagu xusay axdigan waa in dawladaha ka qeyb galaya ay u fidiyaan taakuleynta haboon si ay u fuliyaan masuuliyadahooda korinta ilmaha ku aadan waana inay xaqiijiyaan horumarinta machadyada, kuliyadaha iyo adeegyada daryeelka caruurta.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagu xaqiijinayo in caruurta waalidkoodu shaqeeyo ay xaq u leeyihiin inay ka faaiideystaan adeegyada daryeelka caruurta ee sharciguna ogol yahay.

Qodobka 19-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka sharciyeed, maamul, bulshadeed, iyo waxbarasho ee ku haboon in ilmaha laga ilaaliyo nooc kasta oo xad-gudub jidheed ah ama maskaxeed, waxyeelo dhaawac, ama faraxumayn, xaqiraad, si xun ula dhaqan ama ku shaqeysi, ay ka mid yihiin, fara xumeyn galmo, inta ay ku sugan

yihiin daryeelka waalidka, ilaaliyeyaasha sharciyeed ama qof kasta oo kale oo ay yahay inuu daryeelo ilmaha.

2- Talaabooyinka ilaalinta ah, waa inay ka mid ahaadaan habab wax ku ool ah oo lagu aasasayo barnaamijyo bulsho oo taageerada lagama maarmaanka ah siiya caruunta iyo kuwa daryeelaya iyaga iyo sidoo kale inay ka mid yihiin qaabab kale oo ka hortag ah iyo muujinta, ka warbixinta, gudbinta, baadhista, daaweynta iyo la socodka qaababka si xun ula dhaqanka caruurta iyo markay ku haboon tahay ka qeyb gelinta hanaanka garsoor.

Qodobka 20-

1- Ilmaha si joogta ah ama si ku meel gaadh ah looga kaxeeyo deegaanka qoyskiisu ku sugan yahay ama aysan danihiisa ku jirin inuu kusii sugnaado deegaankaas, waxaa uu xaq u leeyahay ilaalin gaar ah iyo taakuleyn ay dawladu siiso.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay iyagoo ka duulaya sharciyadahooda dalka, xaqiijiyaan nidaam kale oo lagu daryeelayo ilmahan.

3- Daryeelkan waxaa ka mid noqon kara, la wareegid korsasho am xarunta ku hayn ee lagu koriyo caruurta ama machadyada daryeelkooda qaabilsan. Marka xal loo raadimayo, waa in hab taxadar ah laga yeesho, rabitaanka jootada ah ee barbaarint ilmaha iyo sooyaalka qowmiyadeed, diimeed, dhaqameed iyo luqadeed ee ilmaha.

Qodobka 21-

Dawladaha ka qeyb galaya ee aqoonsan ama ogolaada nidaamka, korsashada, waa inay xaqiijiyaan in tixgelinta ugu muhiimsan la siinayo danaha ilmaha, waana inay:-

b) Xaqiijiyaan in korsashada ilmaha ay ogolaan karto oo keliyo hay'ada awooda u leh taasoo ku go'aan qaadata iyadoo raacaysa sharciyada iyo hababka khuseeya iyadoo laga duulayo xogta dhabta ah ee la isku halayn karo in korsashada la ogolaan karo marka la eego xaalada ilmaha ee dhinaca waalidka, qaraabada iyo ilaaliyeyaasha sharciyeed, iyo hadii loo baahdo in dadka ay khuseyso ay ogolaanshahooda ka dhiibtaan korsashada, wada tashiga lagama maarmaanka ah ka dib.

e) Aqoonsadaan in korsashada dalka ka baxsan loo fixgehiyo inay tahay hanaan kale ee daryeelka ilmaha ah, hadii

llmaha aan la geyn karin xaruu daryeel, ama qoys korsada la waayo ama, aan xaalad ku haboon loogu daryeeli karin ilmaha wadanka uu asal ahasu kazoo jeedo.

j) Xaqiijiyaan in ilmaha dalka dibadiisa lagu korinayo uu helo damaanad qaadyo iyo dara jooyin u dhigma kuwa ka jira korsashada dalkiisa.

x) Qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xaqiijinayo in korsashada dalka dibadiisa ah aysan ka dhalan inay maaliyad aan sax ahayn ay ka helaen dadka ku lugta lehi korsashada.

kh) kobciyaan ujeedooyinka qodobkan iyagoo siday ugu haboon tahay u galaya heshiisyo laba dhinac ah ama dhinacyo badan leh si ay u xaqiijiyaan in geynta ilmaha wada kale ay fulisay hay'ada ama laanta awooda u leh.

Qodobka 22-

1. Dawladaha ka qeyb galaya, waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon ee lagu xagiijinayo in ilmaha qaxootinimo raadinaya ama loo arkay inuu qaxooti yahay hab waafaqsan sharciyada caalamiga ah iyo kuwa wadanka iyo hababka ku haboon, hadii uu weheliyo waalidkii ama qof kale ama ayna cidna wehelinin, waa

inuu helo ilaalinta ku haboon iyo taakuleynta bini'aadanimo ee ay siinayaan xuquuqaha lagu xusay axdigan iyo xuquuqaha bini'aadanka ee caalamiga ah ama heshiisyada bini'aadanka, ee ay dawladaha laga hadlayo dhinac ka yihiin..

2. Si ujeedadan loo gaadho, dawladaha ka qeyb galaya waa inay sida iyaga ula haboon uga geystaan iskaashi dadaalada Qaramada Midoobay iyo ururada kale ee caalamiga ah ama kuwa aan dawliga ahayn ee kaashanaya Qaramada Midoobay si loo ilaaliyo loona caawiyo ilmaha noocan ah loona baadi doono waalidkii dhalay ama xubno kale oo qoyskiisa ah siloo helo xog wax ka taraysa sidii uu ilmaha qaxootiga ah dib ula midoobi lahaa qoyskiisa. Xaaladaha aan waalidka ama xubnaha kale ee qoyska la heli karin, ilmaha waa in loo fidiyo ilaalin la mid ah tan ilmaha kale ee si joogta ah ama si ku meel-gaadh ah looga kaxeeyay deegaanka uu waalidkii ku sugan yahay, sabab kasta haka timaadee sida lagu xusay axdigan.

Qodobka 23-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin in ilmaha maskax ahaan ama jidh ahaan naafada ah uu xaq u leeyahay nolol dhameystiran oo haboon lana sameeyo xaalado lagu xaqiijinayo sharafta kor uqaadista isku kalsoonaanta iyo suurta gelinta ka qeyb galka firfircoon ee arimaha bulshada.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiiy xaqa uu ilmaha naafada ah u leeyahay dayeel gaar ah waana in la dhiirigeliyo lana xaqiiyiyo fidinta kheyraadka la heli karo lana gaadhsiiyo caruurta mudan inay helaan iyo dadka ka masuulka ah daryeelka llmaha, iyadoo taakuleynta ay soo codsadeen ee ku haboon xaaladaha iyo duruufaha ilmaha; waalidka iyo dadka kele ee daryeelaya ilmaha.

3- Iyagoo aqoonsan baahiyaha gaarka ah ee ilmaha naafada ah, taakuleynta la fidiyay iyadoo la tixraacayo. Qodob hoosaadka 2aad ee qodobkan waa in la siiyo waxbarasho, tababar, adeegyada caafimaadka, adeegyada diba u dejinta, u diyaar garowga shaqaaleynta iyo fursadaha nasashada oo bilaash ah iyadoo la eegayo xaaladaha maaliyideed ee waalidka

ama cida masuul ka ah daryeelka ilmaha, isla markana wax ka taraya sidii uu ilmuhu u gaadhi lahaa la qabsiga bulshada iyo horumarka dhaqan iyo damir ahaanba.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay kobciyaan iskaashiga caalamiga ah, is-weydaarsiga xogta ku haboon ka hortaga daryeelka caafimaad iyo daaweyn, cilmi-nafsiyeed iyo daaweyn ee ilmaha naafada ah, xogtaas oo ay ka mid yihiin ugudbinta iyo helida xogta la xidhiidha qaababka dib u-dejinta, waxbarashada, iyo adeeg yada xirfada, si ay wadamadan u hagaajiyaan kartida iyo xirfadaha iyadoo fiiro gaar ah lasiinayo wadamada soo koraya.

Qodobka 24-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xaqa uu ilmuha u leeyahay inuu ku noolaado heerka ugu sereeya ee uu heli karo ee caafimaad iyo adeegyada daaweynta ee xanuunka iyo dib u-dejinta caafimaad. Dawladaha ka qeyb galaya waa in ay dadaal ugalaan xaqiijinta in aan ilmana laga xayuubin karin xuquuqda uu u leeyahay helitaanka daryeelka caafimaad ee lagu xusay axdigan iyo xuquuqaha

aadamaha ee caalamiga ah iyo kuwa bini'aadanimada ee ay dawladuhu dhinaca ka yihiin.

2- Si ujeedadan loo gaadho, dawladaha ka qeyb galaya waa inay sida iyaga ula haboon oga geystaan iskaashi dadaalada Qarmada Midoobay iyo ururada kale ee caalamiga ah ama kuwa aan dawliga ahayn ee kaashanaya Qaramada Midoobay si loo ilaaliyo loona caawiyo ilmaha noocan ah loona baadi doono waalidka dhalay ama xubnaha kale ee qoyskiisa, xaaladaha aan waalidka ama xubnaha kale ee qoyska la heli karin ilmaha waa in loo fidiyo ilaalin la mid ah tan ilmaha kale ee si joogta ah ama si ku meel gaadh ah looga kaxeeyay deegaanka uu waalidku ku sugan yahay sabab kasta ha ka timaadee sida lagu xusay axdigan.

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay meel mariyaan hirgelinta buuxda ee xuquuqdan, gaar ahaan, waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon:-

b) Inay yareeyaan dhimashada ilmaha iyo caruurta.

e) Inay xaqiijiyaan xaalada taakuleynta caafimaadka lagama magrmaanka ah iyo daryeelka caafimaad oo la gaadhsiinayo dhamaan caruurta iyadoo mudnaan

gaar ah la siinayo horumarinta daryeelka caafimaadka aasassiga ah.

j) Inay dabar gooyaan xanuunada nafaqo darada ay ka mid tahay iyadoo laga amba qaadayo qorshaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, adeegsiga tiknoolajiyada la heli karo, iyo cuntooyinka nafaqada leh iyo biyaha la cabo ee nadiifta ah iyadoo lagu xisaabtamayo khataraha iyo dhibaatooyinka ka dhasha wasakhaynta deegaanka.

x) Inay xaqiijiyaan daryeelka caafimaadka hooyooyinka dhalmada ka hor iyo ka dib.

kh) Inay xaqiijiyaan in dhamaan qeybaha bulshada, gaar ahaan waalidka iyo caruurta lagu wargeliyay inay helayaan waxbarasho lagana caawinayo isticmaalka aqoonta aasaasiga ah ee caafimaadka caruurta iyo nafaqada, faaiidooyinka nuujinta naaska hooyada, nadaafada iyo deegaanka iyo ka hortaga shilalka.

d) Inay hormariyaan daryeelka caafimaad ee ka hortaga ah, tilmaanta waalidiinta ee waxbarashada qorsheynta qoyska iyo adeegyada wacyi-gelinta.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka haboon ee waxtarka ah ee

lagu tirtirayo caadooyinka waxyeelada ku ah caafimaadka caruurta.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay kobciyaan oo ay dhirigeliyaan iskaashiga caalamiga ah ee lagu gaadhayo xaqiijinta dhamaystiran ee horumarka leh ee xuquuqda lagu aqoonsaday qodobkan. Fiiro gaar ah waa in loo yeesho baahiyaha wadamada soo koraya.

Qodobka 25-

Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmaha ay hay'adaha u awooda leh u gudbiyaan goob si loo daryeelo, ilaalin ama daaweynta caafimaadka jidheed ama maskaxeed, daaweyn xilli le ah in la siiyay ilmaha adeegyadii goobta loogu gudbiyay iyo duruufaha kale ee la xidhiidha u gudbintiisa.

Qodobka 26-

1- Dawladaha ka qeyb galay waa inay aqoonsadaan xaqa uu ilmo kasta u leeyahay inuu ka faa'iideysto damaanad qaadyada bulshada oo ay ku jirto caymiska bulshada waana inay qaado talaabooyinka lagama maarmaanka ah gaadhista xaqiijinta buuxda

ee xuquuqdan iyagoo ka duulaya sharcigooda wadanka u degsan.

2- Faa'iidooyinka waxaa loo fidinayaa hadba sida ugu haboon iyadoo, lagu xisaabtamayo dhaqaalaha iyo duruufaha ilmaha iyo dadka masuulka ka ah masruufka ilmaha iyo weliba tixgelin kasta oo ku aadan codsiga faa'iidooyinka ee uu ilmaha ama cid matalaysa ay soo gudbisay.

Qodobka 27-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xaqa uu ilmo kasta u leeyahay heer nololeed oo ku filan koritaanka jidheed, maskaxeed, damiir ahaan iyo horumarka bulshadeed.

2- Waalidiinta ama dadka kale ee masuulka ka ah ilmaha, waxay masuuliyada ugu horeysa ka saaran tahay suurta gelinta xaaladaha nololeed ee lagama maarmaanka u ah koritaanka ilmaha, ilaa intaay kartidooda iyo dhaqaalahoodu u saamaxayso.

3- Dawladaha ka qeyb galay waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon iyagoo ka duulaya xaaladaha wadankooda iyo awoodooda, si ay u gargaaraan waalidka iyo dadka kale ee masuulka ka

ah ilmaha si loo hiregeliyo xuquuqdooda iyadoo marka loo badsho ay tahay in ay siiyaan taageero muuqata iyo barnaamijyo gargaar, gaar ahaan kuwa ku saabsan nafaqeynta, dharka iyo hoyga.

4- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyinka ku haboon ee lagu sugayo in uu ilmuhu masaariif ka helo waalidka ama dadka kale ee dhaqaale ahaan masuulka ka ah, haday ku sugan yihiin dalka gudihisa ama dibadiisaba. Gaar ahaan, marka qofka dhaqaale ahaan masuulka ka ah ilmaha uu ku nool yahay dal aan ahayn midka uu ilmuhu ku sugan yahay. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay kobciyaan gelitaanka heshiisyo caalami ah ama qaadashada kuwii sii jiray, iyo weliba sameynta nidaamyo kale oo ku haboon

Qodobka 28-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xuquuqda ilmuhu u leeyahay waxbarasho. Si looga midho dhaliyo xuquuqdan iyo fursad loo siman yahay, gaar ahaan, waa inay:-

b) Ka dhigaan waxbarashada aasaasiga ah mid qasab ah oo cid walba ay bilaash ku helli karto.

t) Dhiiri geliyaan horumarinta noocyada kala gedisan ee waxbarashada dugsiyada sare oo isugu jira waxbarashada guud iyo mida farsamada, kana dhigayaan mid ay suurta gal u tahay ilmo kasta waana inay qaadaan talaaboyinka ku haboon sida soo bandhigida waxbarasho bilaash ah iyo inay u fidiyaan taageero dhaqaale marka loo baahdo.

j) Ka dhigaan waxbarashada sare mid ay dhamaan heli karaan oo ku saleysan awooda.

x) Ka dhigaan xogta waxbarashada iyo farsamada mid ay heli karaan oo suurtagal u ah caruurta oo dhan.

kh) Qaadaan talaabooyin lagu dhiiri gelinayo tegitaanka joogtada ah ee dugsiyada iyo hoos udhigida ka tegitaanka waxbarashada.

2. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon xaqiijinta in anshax marinta dugsiga loo maamulo hab waafaqsan axdigan.

3. Dawladaha ka qeyb galaya waa inay kobciyaan oo ay dhiiri geliyaan iskaashiga caalamiga ah ee arimaha la xidhiidha waxbarashada iyadoo fiiro gaar ah la siinayo dabar-goynta jahliga iyo aqoon darada aduunka oo dhan lana

fududeynayo heelitaanka aqoonta, cilmiga iyo tiknoolajiyada iyo qaababka barista casriga ah. Gaar ahaan waa in lagu xisaabtamo baahiyaha wadamada soo koraya.

Qodobka 29-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay ku heshiiyeen in waxbarashada ilmaha ay ku wajahnaato:-

b) Horumariuta shaqsiyada ilmaha, hibada, maskaxda iyo jidhka awood ahaahtooda si ay kor ugu qaado.

e) Horumarinta xushmeynta xuquuqaha aadamaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah, iyo mabaadii da logu xusay axdiga Qaramada Midoobay.

j) Horumrinta xurmada ilmuhu waalidka u hayo, dhaqankiisa, luuqadiisa iyo qiimaha wadankiisa uu ku nool yahay, wadanka uu kasoo jeedo asal ahaan, iyo, ilbaxnimooyinka ka duwan mida uu haysto.

x) U diyaarinta ilmaha masuuliyada nololeed ee bulshada dhexdeeda, isfahamka, nabada, dulqaadka, sinaanshaha jinjiga iyo saaxiibtinimada dadka oo dhan, qolo kasta,

qoowmiyadaha iyo kooxaha diimeed iyo dadka asal ahaan isku midka ah.

kh) Hornomrinta xurmeynta ilaalinta deeganka dabiiciga ah.

2- Qeyb ahaan qodobkan ama qodobka 28 looma qaadan karo in lagu farageliyo xoriyada shaqsiyaadka ama hay'adaha u aas aasan ee hagaya machadyada waxbarashada, balse waxaa had iyo jeer lagu ilaalinayaa mabaadiida lagu xusay faqrada 1aad ee qodobkan iyo shuraadaha in waxbarashada ay bixiyaan machadyadu waafaqsan tahay heerarka ugu hooseeya ee ay dawladu u dhigtay.

Qodobka 30-

Dawladaha ay ka dhex jiraan kooxaha qolo ahaan, diin ahaan, luuqad ahaan ama shaqsiyaaska laga tirada badan yahay, ilmaha kasoo jeeda kooxahaas waa inaan laga hor istaagin xuquuqda, bulshada uu kasoo jeedo inuu insticmaali karo dhaqankiisa, uu ku dhaqmo diintiisa ama uu adeegsado luuqadiisa.

Qodobka 31-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay aqoonsan yihiin xaqa uu ilmuhu u leeyahay nasashada iyo raaxada,

inuu sameeyo ciyaar iyo tamashleyn ku haboon da'da ilmaha iyo inuu ka qeyb qaato dhaqanka iyo farshaxanka si xor ah.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xushmeeyaan oo ay kobciyaan xuquuqda ilmaha uu si dhameystiran oga qeyb qaadan karo dhaqanka iyo farshaxanka waana inay dhiiri-geliyaan hawsha ku haboon iyo fursado loo siman yahay ee dhaqanka iyo farshaxanka.

Qodobka 32-

1- Dawladaha ka qeyb galay waxay aqoonsan yihiin xaqa uu ilmahu u leeyahay in laga ilaaliyo ku shaqeysiga dhaqaale iyo fulinta shaqo kasta oo khatar ah ama fara gelinku ah waxbarashada ilmaha ama dhibaato ku keenaysa caafimaadka ama horumarka jidheed, maskaxeed, damiir ahaan ama bulsha ahaanba.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyin sharciyeed, maamul, bulshadeed ama waxbarasho oo lagu xaqiijinayo hirgelinta qodobkan; iyadoo la tixgelinayo shuruudaha xeerarka caalamiga

ah ee kale, dawladaha ka qeyb galaya waa inay gaar ahaan:-

b) Dejiyaan da'da ugu yar ama da'ada shaqaaleynta loo ogolyahay.

e) Dejiyaan xeer ku haboon saacadaha iyo xaaladaha shaqada.

j) Dejiyaan ciqaabaha iyo xayiraadaha ku haboon xaqiijinta dhaqan gelinta haboon ee qodobkan.

Qodobka 33-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay, qaadaan Talaabooyin haboon, oo ay ka mid yihiin talaabooyin sharciyeed, maamul, bulshadeed iyo waxbarasho oo caruurta lagaga ilaalinayo isticmaalka daroogada maan dooriyaha ah iyo walxaha maskaxda bedela sida lagu xusay heshiisyada caalamiga ah ee khuseeya arintan iyo in laga ilaaliyo caruurta soo saarista iyo safrinta sharci darada ah ee walxahan maandooriyeyaasha ah.

Qodobka 34-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ka ilaaliyaan caruurta nooc kasta oo in jidhkooda laga ganacsado iyo faraxumaynta galmada ah. Si ujeedooyinkan loo gaadho, dawladaha ka qeyb galaya waa inay si gaar ah u qaadaan talaabooyin heer

qaran, laba dhinac iyo dhinacyo badan ay weheliyaan oo lagaga hortagayo:-

b) Ku qalqaalinta ama ku qasbitaanka ilmuhu inuu sameeyo ficil kasta oo galmo sharci daro ah,

e) Ku shaqeysiga caruurta ee dhileysiga iyo sameynta nooc kasta oo galmo sharci daro ah;

j) Ku shaqeysiga caruurta ee muuqaalada galmada ah;

Qodobka 35-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyin heer qaran, laba dhinac ama wadano badan weheliyaan oo lagaga hortagayo afduubka, iibsiga ama safrinta sharci darada ah ee caruurta ujeedo kasta ama qaab kasta hala haatee.

Qodobka 36-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ka ilaaliyaan ilmaha nooc kasta oo kale oo ku shaqeysi ah kaasoo wax u dhimaya wanaaga ilmaha.

Qodobka 37-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay xaqujiyaan:-

b) Inaan ilmaha lagu sameyn karin jidh-dil, ama cadowtinimo kale loola dhaqmo ama la dhaqan quudhsi ah ama ciqaab. Sidoo kale waa inaan lagu soo rogin ciqaab dil ah ama xadhig madaxaa haku furto ah oo aysan suurtagal ahayn in lasii daayo, iyadoo loo cuskanayo danbiyada ay galaan dadka da'doodu ka yar tahay sideed iyo toban sano.

e) Inaan ilmaha laga xayuubin karin xoriyadiisa si sharciga ka baxsan ama xadka ka baxsan. Qabashada, haynta ama xadhiga ilmuhu waa inay sharciga waafaqsan tahay loona adeegsado oo kaliya talaabo kama danbays ah iyo wakhtiga ugu gaaban ee ku haboon;

j) Ilmo kasta oo laga xayuubiyay xoriyada waa in loola dhaqmay si bani'aadanimo ah lana xushmeynayo sharafta qofka bani'aadamka ah, iyadoo lagu xisaabtamayo baahiyaha dadka da'diisa ah. Gaar ahaan, ilmo kasta ooo laga xayuubiyay xoriyada waa in la kala sooco dadka waaweyn oo aan meel lagu wada xidhin, hadii aan loo arkim inay danta ilmuhu kujirto wuxuuna xaq u leeyahay in uu xidhiidh la sameeyo qoyskiisa isagoo adeegsanaya isgaadhsiin iyo booqashooyin, hadayna jirin duruufo gaar ah oo aan loo ogolaan karin.

x) Ilmo kasta oo laga xayuubiyay xoriyada uu xaqa u leeyahay in sida ugu dhakhsaha badan uu u helo taageero sharciyeed iyo kuwo kale ee ku haboon iyo sidoo kale inuu xaq leeyahay ka doodista sharciyada xoriyad ka qaadistiisa maxkamada, ama hay' ada kale ee, awooda u leh, madaxa banaan iyo dhex-dhexaadka ah horteeda, iyo go'aan deg-deg ah oo arintan ookale la xidhiidha.

Qodobka 38-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay masuuliyad ka saaran tahay inay xurmeeyaan ayna xaqiijiyaan xurmeynta xeerarka caalamiga ah ee ban'iaadanimada ee caruurta khuseeya xilli yada iskahorimaadyada hubeysan.
2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka suurta galka ah ee lagu xaqii jinayo in dadka aan gaadhin da'da shan iyo toban jirka ah aysan si toos ah uga qeyb gelin colaadaha.
3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ka baaqsadaan inay ciidankooda u tababaraan dadka aan gaadhin da'da shan iyo toban jirka ah. Tababarista dadka gaadhay shan iyo toban jirka balse aan gaadhin

sideed iyo toban jirka, waa inay dawladuhu ku dadaalaan inay mudaanta siiyaan kuwa ugu da'da weyn.

4- Iyagoo ka duulaya waajibaadyadooda ku xusan xeerarka caalamiga ah ee bini'aadanimada, ilaalinta dadka rayidka ah xilliga dagaalada, dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka suurta galka ah ee lagu xaqiijinayo ilaalinta iyo daryeelka caruurta uu saameeyay dagaalku.

Qodobka 39-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan dhamaan talaabooyinka ku haboon kor uqaadista kasoo kabashada jidheed iyo maskaxeed iyo dhexgalka bulshadeed ee ilmaha dhibanaha u ah nooc kasta oo xaqiraad ah, ku shaqeysi, ama fara xumayn, jidh-dil, ama nooc kasta oo si xun ula dhaqan ah, cadowtinimo, quudhsi iyo ciqaab ah ama dagaalada waxyeelo kasoo gaadhay. Kasoo kabashadan iyo dib u dhexgalkani waa inay ka dhacdo deegaan u suuban caafimaadka, xurmeynta shaqsiyeed iyo sharafta ilmaha.

Qodobka 40-

1- Dawladaha ka qeyb galay waxay aqoonsan yihiin xaqa uu leeyahay ilmo kasta oo loo arko eedaysane ama loo aqoonsaday inuu ku xad gudbay xeerka ciqaabta in loola dhaqmo hab waafaqsan kor uqaadista dareenka ilmaha ee sharfta iyo qiimaha, taasoo xoojinaysa xurmada ilmuhu u hayo xuquuqda aadamaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee dadka kale iyo hab ku xisaabtamaya da'da ilmaha iyo rabitaanka kor uqaadista dib u dhexgalka bulshada ee ilmaha iyo inuu ilmuhu door waxku ool ah ku yeesho bulshada dhexdeeda.

2- Si ay oga dhabeeyaan ujeedadan iyo weliba iyagoo tixgelinaya shuruudaha caalamiga ah, dawladaha ka qeyb galaya waa inay si gaar ah u xaqiijiyaan in:-

   b) Ilmaha aan loo arkin, lagu eedeeyo, ama loo aqoonsanin inuu ku xad-gudbay xeerka ciqaabta iyadoo sababtu tahay falal ama ka baaqsiyo aan lagu mamnuucin sharciga dalka ama kan caalamiga ah wakhtiga la galay.

e) Ilmo kasta oo loo arkay ama lagu soo eedeeyay inuu ku xad-gudbay xeerka ciqaabta, ugu yaraan waa inuu helo damaanad qaad yadan soo socda:-

i) In loo arko danbi la'aan inuu yahay ilaa inta lagu cadeynayo inuu danbiile yahay iyadoo sharciga la raacayo;

ii) In sida uga dhakhsaha badan loogu wargeliyo eedaha ka dhanka ah isaga iyo hadii ay haboon tahay iyadoo la sii marinayo waalidkiisa ama, ilaaliyayaashiisa sharciyeed uuna helo taageero sharciyeed iyo kuwa kale ee ku haboon diyaarinta iyo soo gudbinta is-difaaciisa;

iii) In ay arinta si aan dibu-dhac lahayn u go'aamiso hay'ada awood u leh, madax banana oo dhex-dhexaad ah ama hay'ad garsoor u dhegaysato si cadaalad ah oo sharciga waafaqsan, iyadoo loo fidiyay taageerada sharciyeed ama kuwa kale ee ku haboon, hadii loo arko in ayna ilmaha dan u ahayn mooyee, gaar ahaan, iyadoo

lagu xisaabtamayo da'da ama xaalada ilmaha, waalidkiisa ama ilaaliyeyaasha sharciyeed.

iv) Inaan lagu qasbin in uu cadeyn bixiyo ama isku marag furo, inuu su'aalo weydiyo maragyada dadka ku ah iyo inuu helo kasoo qeyb galka iyo su'aalo weydiinta maragyada dhankiisa ah iyadoo sinaanta la eegayo.

v) Hadii loo arko inuu ku xad-gudbay xeerka ciqaabta, inuu helo go'aankan iyo talaabooyinka lagusoo rogay ee ka dhashayba, dibu-eegis ay sameyso hay'ad ka sareysa, oo a wood u leh, madax banana oo dhex-dhexaad ah ama hay'ad garsoor oo sharciga waafaqsan.

vi) Inuu helo taageerada turjumaan oo bilaash ah hadii uusan ilmuha fahmi karin ama ku hadli karin luuqada la adeegsanayo.

vii) In arimihiisa gaarka u ah si buuxda loogu xurmeeyo dhamaan heerarka geedi-socodka dacwada.

3- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay ku dadaalaan meel marinta sharciyada, hababka, hay'adaha iyo machadyada sida gaarka ah loogu talagalay caruurta loo arko in lagu soo eedeeyay ama loo aqoonsaday inay ku xad-gudbeen xeerka ciqaabta, iyo gaar ahaan:-

b) Sameynta dejinta da'da ugu hooseysa ee caruurta ay tahay in laga soo qaado inayna lahayn awood ay ku xad gudbaan sharciga ciqaabta.

e) Markasta oo ay haboon tahay lana doorbido talaabooyin lagula macaamilo caruurtan iyadoo aan la adeegsanin geedi-socodyo dacwadeed, islamarkaana xuquuqaha bani'aadamka iyo xeyn-daabyada sharciyeedba si buuxda loo xurmeynayo.

4- Kala duwanaanshaha go'aanda sida daryeelida, tilmaanta, iyo amarada dabagalka ah, la tallinta, tijaabada, waxbarashada iyo barnaamijyada tababarka farsamada iyo qaababka kale ee machadyada daryeelka waa inay

jiraan si loo xaqiijiyo in caruurta loola dhaqmay xaalad ku haboon wanaagooda una dhiganta duruufahooda iyo danbigaba.

Qodobka 41-

Arimaha ku xusan axdigan dhexdiisa sinaba waa inayna wax ugu dhimin wixii shuruudo ah ee kaga wanaagsan xaqiijinta xuquuqaha caruurta ee ku jiri kara:-

b) Sharciga dawlad qeybka ah axdigan; ama,

e) Sharci caalami ah oo dhaqan gal ka ah dawladahaas.

Qaybta – II

Qodobka 42-

Dawladaha ka qeyb galaya waxaa masuuliyad ka saaran tahay inay mabaadiida iyo qodobada axdiga si balaadhan ugu wacyi geliyaan dadka waaweyn iyo caruurtaba si isku mid ah iyagoo adeegsanaya aalad fir-fircoon oo ku haboon.

Qodobka 43-

1- Si loo hubiyo horumarka ay dawladaha ka qeyb galaya ay ka sameeyeen xaqiijinta waajibaadyada lagu xusay axdigan, waxaa la aasaasayaa guddiga

xuquuqda caruurta oo fulinaya shaqooyinka lagu xusay axdigan.

2- Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa toban khabiir oo lagu yaqaan damiir sare caana ku ah awooda ay u leeyihiin arimaha axdigan ku xusan. Xubnaha guddiga waxaa dooranaya kana soo xulaya muwaadinimtooda dawladaha ka qeyb galaya, waxayna ku shaqeynayaan kartidooda shaqsiyadeed waxaa tixgelin la siinayaa in joquraafi ahaan si siman loo qeybiyo iyo weliba nidaamyada sharciyeed.

3- Xubnaha guddiga waxaa lagu dooranayaa cod qarsoodi ah iyadoo laga duulayo liiska shaqsiyaadka ay soo xuleen dawladaha ka qeyb galaya. Dawlad kasta waxay soo xuleysaa hal qof oo muwaadin u ah.

4- Doorashada ugu horeysa ee guddiga waa in la qabto mudo aan ka danbayn lix bilood ka dib dhaqan galka axdigan iyo markaa kadib sanadka labaad ee kasta, ugu yaraan afar bilood ka hor doorasho kasta waa inuu xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay qoraal ku marti qaado dawladaha ka qeyb galaya inay soo gudbiyaan mudo labo bilood gudahood

xulashooyinkooda dadka uga qeyb galaya doorashada. Xoghayaha guud waa inuu isla markaba diyaariyo liiska dhamaan dadka lasoo xulay sida ay xaraf ahaan u kala horeeyaan iyadoo la muujinayo dawladaha soo xulay lana hordhigo dawladaha ka qeyb galaya axdigan.

5- Doorashooyinka waxaa la qabanayaa kulanka dawladaha ka qeyb galaya axdigan oo uu furayo xoghayaha guud laguna qabanayo xarunta Qaramada Midoobay. Kulamadaas sadex meelood laba ee dawladaha ka qeyb galaya ayuu kulanka doorashada ku qabsoomi karayaa, shaqsiyaadka loo doortay guddiga waxay noqonayaan kuwa helay tirada ugu badan ee codadka iyo aqlabiyada codadka wakiilada dawladaha ka soo qeyb galay ee codka ka dhiibtay.

6- Xubnaha guddiga waxaa loo dooranayaa mudo afar sano ah waxayna yeelan karaan in mar labaad la dooran karo hadii loo soo xulo doorashada. Mudada shaqo ee shan xubnood oo ka mid ah kuwa lasoo doortay doorashada ugu horeysa waxay ku egtahay dhamaadka labo sano; kadib isla marka doorashada

ugu horeysa ay dhacdo magacyada shantan xubnood waxaa go'aaminaya shir gudoonka kulanka.

7- Hadii xubin ka mid ah guddiga uu dhinto ama is casilo ama lagu dhawaaqo ii uusan gudan karin waajibaadyada guddiga sabab kasta ha keentee, dawlada soo xulatay xubinkaas waa in ay soo magacowdo khabiir kale oo muwaadininta ka mid ah si uu shaqada usii fuliyo inta ka hadhay mudada; iyadoo loo baahan yahay ansixinta guddiga.

8- Guddigu wuxuu sameysanayaa xeerasha qaab socodka shaqooyinkiisa.

9- Guddigu waa inuu doorto saraakiishiisa mudo labo sano ah.

10- kulamada guddiga caadi, ahaan waxaa lagu qabanayaa xarumaha Qaramada Midoobay ama meesha kale ee ku haboon ee uu go'aamiyo guddigu. Guddigu caadi ahaan wuxuu shirayaa sanadkiiba hal mar. Mudada ay soconayaan shirarka guddiga waa inay go'aamiyaan, dibana isula eegaan, hadii loo bashdo, dawladaha ka qeyb galaya axdigan, isla

markaana uu ansixinayo kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay.

11- Xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay waa inuu u fidiyo guddiga shaqaalaha iyo agabka lagama maarmaanka u ah gudashada haboon ee shaqooyinka guddiga lagu xushay axdigan.

12- Xubnaha guddiga lagu aasaasay axdigan waxay helayaan gunno ay bixinayso Qaramada Midoobay mudada iyo xaaladaha ay ansixiyaan kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 44-

1- dawladaha ka qeyb galaya waxay masuuliyad ka saran tahay inay guddiga usoo gudbiyaan iyagoo usoo marinaya xoghayaha guud, warbixinada talaabooyinka ay qaadeen ee laga meel marinayo xuquuqaha axidgan lagu aqoonsaday iyo horumarka laga gaadhay, isticmaalka xuquuqahani:-

b) labo sano gudahood ka dhaqan galka axdigan ee wadanka ay khuseyso.

e) wixii markaa hore ka daybeeyana shantii sanoba mar.

2- Warbixinada lagu xusay qodobkan waa in lagu muujiyo arimaha saacidaya iyo dhibaatooyinka, haday jiraan, saameynta ku leh heerka fulinta waajibaadyada lagu xusay axdigan. sidoo kale, warbixinada waa in ayku jirto xog dhameystiran oo guddiga laga siinayo faham balaadhan siduu wadanka ay khuseyso uu u fuliyay axidgan.

3- Dawlada usoo gudbisay guddiga warbixinta faah faahsan ee u horeysa, loogama baahna inay warbixinadeeda danbe ee ay soo qudbinayso hab waqfaqsan qodobka sare kusoo celiso xogta aasaasiga ah ee ay horey usoo gudbisay.

4- Guddigu wuxuu ka codsan karaa dawladaha warbixin dheeraad ah oo ku saabsan hirgelinta axdiga.

5- Guddigu waa innu isagoo sii marinaya golaha dhaqaalaha iyo bulshada, u gudbiyo warbixinada, kulanka loo dhan yahay, labadii sano ee kasta, shaqooyinkiisa.

6- Dawladaha ka qeyb galay waa inay si balaadhen warbixinadooda ugu shaaciyaan shacabka dalalkooda.

Qodobka 45-

Si loo meel mariyo hirgelinta wax ku oolka ah ee axdiga loona dhiiri geliyo iskaashiga caalamiga ah ee la iska kaashanayo arimaha lagaga hadlay axdigan:-

b) Wakaaladaha gaarka ah, sanduuqa caruurta ee Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay waa inay cid u wakiishaan fulinta shuruudaha axdiga inta ka khuseysa awooda loo idmaday. Guddigu waxuu ku marti qaadi karaa wakadadaha gaarka ah, sanduuqa caruurta, iyo hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay, inay talo khibrad yaqaan ka bixiyaan fulinta axdiga meelaha ay iyaga ka khuseyso waajibaadyadooda. Guddiga wuxuu ka codsan karaa hay'adahan in ay warbixino kasoo gudbiyaan hirgelinta axdiga meelaha ay ka khuseyso shaqadooda.

e) Guddigu waa inuu gaadhsiiyo, hadba sida ugu haboon, wakaaladaha gaarka ah, sanduuqa caruurta Qaramada Midoobay iyo hay'adaha kale ee awooda u leh, codsiyada kasta ee dawladaha ka yimaada ee ku saabsan, codsi, ama muujinaya baahi loo qabo taageero ama talo farsamo, iyadoo uu guddigu dusha kala soconayo uuna tilmaamo ka bixinayo.

j) Guddigu wuxuu usoojeedin karaa kulanka loo dhan yahay inuu ka codsado xoghayaha guud inuu isagoo guddiga matalaya meel mariyo daraasaadyo ku wajahan arimo gaar ah oo la xidhidha xuquuqaha caruurta.

x) Guddiga wuxuu sameyn karaa soo jeedin iyo talooyin guud oo ku saleysan warbixinada uu ku helay hab waafaqsan qodobada,44 iyo 45 ee axdigan. Soo jeedinta iyo talooyinkan waa in la gaadhsiiyo wadan ka ay khuseyso, loona gudbiyo kulanka loo dhan yahay, iyadoo ay weheliso fikirka dawladaha ka qeyb galaya hadii uu jiro.

Qaybta III

Qodobka 46-

Axdigani waa inuu noqdo mid u furan inay saxiixaan dhamaan dawladaha.

Qodobka 47-

Axdigan waa in la ansixiyo. Qoraslada ansixinta waa in la dhigo oo uu hayo xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 48-

Axdigan waa in uu u furnaada qaadashada dawlad kasta. Qoraalka ay ku qaadanayso waa in la dhigo oo uu hayo xoghayah guud ee Qaramada Midoobay.

Qodobka 49-

1- Axdigani wuxuu dhaqan galayaa maalinta sadex iyo tobnaad laga bilaabo taariikhda la dhigay xafiiska xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay maalinta labaatanad ee ansixinta ama qaadashada.
2- Wadan kasta oo ansixineya ama qaadanaya axdiga ka dib marka la dhigo xafiiska xoghayaha guud, axdigan wuxuu dhaqan gal noqonayaa maalinta sodonaad ee uu wadanka dhigay ansixintiisa.

Qodobka 50-

1- Wadan kasta wuxuu soo jeedin karaa in wax ka bedel lagu sameeyo axdiga isagoo a soo gudbinaya xoghayaha guud. Xogheyaha guud waa inuu kala xidhiidho wadamada waxkabedelka lasoo jeediyay, isagoo ka codsanaya inay soo sheegaan hadii ay door bidayaan in shir la isugu yimaado oo loo codeeyo ajandaha. Xaalada marka ay afar bilood gudahood ay

sadex meelood hal meel ah wadamadu ay door bidaan in shir la isugu yimaado, xoghayaha guud waa inuu isugu yeedoa shir lagu qabto Qaramada midoobay. Wax kabedel kasta oo ay qaataan tirada badan ee dawladaha kasoo qeybgalay codkoodana dhiibtay shirka waa in loo gudbiyo kulanka loo dhan yahay si loo ansixiyo.

2- Wax ka bedelka lagu sameeyay hab waafaqsan qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu ansixiyo kulanka loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay ayna ogolaadaan sadex meelood laba kamid ah dawladaha ka qeyb galaya.

3- Marka wax ka bedelku uu dhaqan galo, waxaa uu qabanayaa oo uu saameyn sharciyeed ku yeelanayaa dawladaha ogolaaday, dawladaha kale waxay weli u hogaansamayaan shruudaha axdiga iyo wax ka bedeladii hore ee ay iyagu ogolaadeen.

Qodobka 51-

1- Xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay waa inuu helo una qeybiyo dhamaan dawladaha qoraalka afeefta dib u dhigashada ah ee ay dawladuhu sameayaan markay ansixinayaan ama qaadanayaan axdiga.
2- Afeefta dibu-dhigashada ah ee aan la jaan qaadi karin nuxurka iyo ujeedada axdigan lama ogolaan karayo.
3- Afeefaha dibu dhigashada ah waa laga noqon karaa wakhti kasta iyadoo sidaas lagu wargelinayo xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay oo isaguna ku wargelin doona dhamaan dawladaha. Wargelintani waxay dhaqan gelaysaa taariikhda la gaadhsiiyay xoghayaha guud.

Qodobka 52-

Dawlada way ka bixi kartaa axdigan iyadoo qoral ku wargelinaysa xoghayaha guud. kabixidu waxay dhaqan gal noqonaysaa sanad ka dib marka lagu wargeliyay xoghayaha guud.

Qodobka 53-

Xoghayaha guud wuxuu ahaanayaa halka la dhigayo axdigan.

Qodobka 54-

Nuqulka asalka ah ee axdigan oo qoraalada carabiga, shiinaha, ingiriiska, faransiiska, ruushka iyo isbaanishka ay simanyihiin, waa in la dhigo xoghayaha guud xafiiskiisa.

Goob joogayaasha hoosta ku taxan, iyagoo awood rasmi ah ka haysta dawladahooda, ayay saxiixeen axdigan.

AXDIGA CAALAMIGA AH EE CIDHIBTIRKA DHAMAAN NOOCYADA MIDAB-TA KOORKA

Golaha Loo Dhan Yahay Wuxuu Iskula Qaatay Bayaan 2106 (XX) Ee 21-Ka

December, 1965

Wuxuu Dhaqan Galay 4-Ta Janaayo, 1969, Hab Waafaqsan Qodobka 19

Dawladaha Ka Qeyb Galaya Axdigan

Iyagoo tixgelinaya inuu Axdiga Qaramada Midoobay ku saleysan yahay Mabaadiida Karaamada iyo sinaanta lama taabtaanka ah ee dhamaan bini'aadamka, iyo inay dhamaan Dawladaha xubnaha ka ah balan ku qaadeen qaadista talaabooyin wadajir iyo gooni-gooniba ah ee dhinaca iskaashiga ururka, si looga midha dhaliyo mid ka mid ah ujeedooyinka Qaramada midoobay taasoo ah kor u qaadista iyo dhiiri gelinta tixgelin iyo dhowrista caalamiga ah ee xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee dadka oo dhan, iyadoo aan lagu kala soocin midab, jinsi, luuqad diin, ama qollo.

Iyagoo tixgelinaaya in Baaqa caalamiga ah ee xuquuqaha Bini'aadamka uu bayaaminaayo in dhamaan bini'aadamku uu xornimo ku dhashay una siman yahay karaamada iyo

xuquuqaha uuna qofkasta xaq u leeyahay dhamaan xuquuqaha iyo xoriyaadka lagu xusay baaqa dhexdiisa, iyadoo aan lagu kala soocin nooc kasta oo takoor ah, gaar ahaan, qollo, midab ama asal ahaan dhalashada.

Iyagoo tixgelinaaya in dhamaan bini'aadamku uu u siman yahay sharciga hortiisa, uuna xaq u leeyahay inuu helo ilaalin sharciyeed isku mid ah oo ka dhan ah midab-takoor kasta iyo abaabulista midab-takoorka nooc kasta oo uu yahay.

Iyagoo tixgelinaya in Qaramada midoobay ay cambaaraysay gumeysiga iyo dhamaan hab dhaqanada quudhsiga iyo midab-takoorka ku lamaanba. Nooc kasta oo uu yahay iyo meelkasta oo uu ka jiro iyo in Baaqa Madax-banaanida lagu siinaayo dalalka iyo dadka lagumeysto ee 14-ka December 1960 (Bayaanka Golaha loo dhan yahay 1514 (XV) ay ku xaqiijiyeen si gaar ahna ugu bayaamiyeenlama huraanimada lagu dar-dar gelinaayo soo af jarida aan shuruud ku xidhanayn.

Iyagoo tixgelinaaya in Baaqa Caalamiga ah ee cidhib-tirka Dhamaan Noocyada Midab-takoorka ee Qaramada Midoobay 20-ka November, 1963 (Bayaanka Golaha loo dhan yahay 1904 (XVIII) ay si gaar ah ugu xaqiijinayaan lama huraanimada deg-dega ah ee cidhib-tirka midab takoorka guud ahaan.

Aduunka ka jira noocyadiisa oo dhan iyo muuqaaladiisa oo dhan iyo abuurista isfaham iyo xushmeynta karaamada qofka bini'aadamka ah.

Iyagoo ku qanacsan in aragti kasta oo isla weyni ah ee ku saleysan kala duwanaanta midabka ay cilmi ahaan been tahay, damiir ahaan ay dhaleecayn mudan tahay, bulsho ahaan aan la aqbali Karin, khatarna ah, iyo in aysan jirin wax loo daliishan karo oo banaaynaya midab-takoorka, aragti ahaan iyo ficil ahaanba meel kasta oo uu ka jiraba.

Iyagoo mar labaad xaqiijinaya in kala soocida bini'aadamka lagu kala soocaayo qollada, Midabka ama qowmiyada uu asal ahaan kasoo jeedo ay caqabad ku tahay is-dhexgalka saaxiibtinimo iyo nabad geliyada dawladaha ayna khal-khal gelin karto nabada iyo amnigaa dadweynaha iyo wada noolaanshaha haboon ee dadka ee xitaa kuwada nool dal keliya.

Iagoo ku qanacsan in jiritaanka kala qoqobnaanshaha midabka ku saleysan ay dhabar jab ku tahay aaminaadaha bulsho kasta.

Iyagoo ka dhawaaqaya hab-dhaqamada Midab-takoorka oo weli ka jira goobo Aduunka ka mid ah iyo siyaasado Dawladeed oo ku saleysan isla weynaan dhanka midabka ah

ama naceyb sida siyaasadaha midab takoorka, quudhsiga iyo kala qeybinta.

Iyagoo isku af-gartay inay qaadaan dhamaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah in si dhakhso leh loo dabar gooyo dhamaan qaababka iyo hab-dhaqanada midab-takoorka, lagana hortago isla markaana lala dagaalamo aragtiyada iyo dhaqamada midab-takoorka si kor loogu qaado is faham dhex mara bulshooyinka loona dhiso bulsho caalami ah oo xor ka ah dhamaan noocyada midab-takoorka, quudhsiga iyo fuquuqida.

Iyagoo maskaxda ku haya Axdiga ku saabsan midab-takoorka dhinaca shaqaaleynta iyo shaqada la xidhiidha ee uu dejiyay ururka shaqaalaha Aduunka 1958 iyo Axdiga ka dhanka ah midab-takoorka waxbarashada ee uu soo saaray ururka waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka u qaabilsan Qaramada Midoobay 1960.

Iyagoo doonaya inay hirgeliyaan mabaadiida ku xusan Baaqa Qaramada Midoobay ee Cidhib-tirka dhamaan noocyada Midab-takoorka isla markaana sida ugu dhakhsaha badan a qaadaya talaabooyin ficil ah oo lagusoo afjaraayo midab-takoorka;

Waxay Ku Heshiiyeen Sidan Soo Socota:-

QEYBTA - I

Qodobka 1:-

1- Axdigan dhexdiisa, erayga "Midab-takoor" waxaa loola jeedaa kala soocid, ka reebid, ka xayirid ama door bidid kasta oo ku saleysan qollo, midab, farac, dhalasho ama asal ah aan qowmiyada uu kasoo jeedo kaasoo leh ujeedo ama saameyn tirtiraysa ama waxyeelaynaysa aqoonsiga, ku raaxaysiga ama adeegsiga loo siman yahay ee xuquuqaha bini,aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee arimaha siyaasada, dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka iyo arimaha kale ee nolosha dadweynaha la halmaala.

2- Axdigan waa inaan lagu dabakhin kala soocila, xayiraadaha, ka reebitaanada ama kala doorbidida ay dawladaha ka qeyb galaya Axdigan u dejiyeen muwaadiniinta iyo ajnabiga, duraafaha iyo xaaladaha dalaklooda kajira.

3- Axdigan arimaha ku xusan looma turjuman karo qaab wax u dhimaya shuruudaha sharciyeed ee Dawladaha ka qeyb galaya ee ku saabsan dhalashada, Muwaadinimada ama qaramaynta iyadoo loo baahan

yahay in shuruudahani ayna takoorid ku noqonin qollo ama qowmiyad gaar ah.

4- Talaabooyoonka gaarka ah ee loo qaadaya si loo hor-Mariyo Midab ama qolooyin gaar ah ama koox ama shaqsiyaad u baahan ilaalintan, hadba siday lagama Maarmaan u tahay si loo xaqiijiyo in kooxahan ama shaqsiyaadkan ay si la siman ugu raaxeystaan ama u adeegsadaan xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah, waa in aan loo qaadanin inay yihiin midab-takoor, hase yeesh; waa in aanay talaabooyinkan ka dhalanin ama ayna horseedin in kooxaha kala midabka ay helaan xuquuqo aan isku mid ahayn oo kala gedisan; waana inaysan sii soconin talaabooyinkani ka dib marka ujeedooyinkii laga lahaa la gaadho.

Qodobka 2:-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waxay canbaaraynayaan Midab-takoorka waxayna masuuliyad ka saaran tahay, iyagoo adeegsaneya aalad kasta oo ku haboon iyo hab aan dib u dhac lahayn, inay meel mariyaan siyaasad cidhib tiraysa midab takoorka dhamaan

noocyadiisa iyo kor u qaadista Isfahan ka dhexeeya dhameen bulshooyinka, si arintan loo fuliyana :-

(B) Dawlad kasta waxay Masuulka tahay inayna ku lug yeelanin ficil ama hab, dhaqan Midab-takoor ka dhan ah dad, kooxo ama machadyo waana inay xaqiijiso in dhamaan hay'adaha dawlada iyo machadyaala dadweynaha ee heer wadan iyo deegaanba ay u dhaqmaan hab waafaqsan waajibaadkan.

(T) Dawlada kasta waxay masuul ka tahay inayna kharash ku bixinin, difaacin ama taageerin midab-takoorka ay sameeyaan dadka ama ururadu.

(J) Dawlad kasta waa inay qaado talaabooyin waxtar leh oo dib loogu eegayo siyaasadaha dawladeed, wadan iyo deegaan ahaan, iyo dib u habeynta, ama tirtirida sharciyada iyo xeerarka abuuri kara ama horseedi kara midab-takoorka meel kasta oo uu ka jiro.

(X) Dawlad kasta waa inay mamnuucdo ayna soo afjarto midab-takoor ku wajahan dadka, koox ama urur, iyadoo adeegsanaysa aalad kasta oo

ku haboon oo ay ku jirto sharci ka soo saarid hadba sida loogu baahdo duruufaha jira.

(KH) Dawlad kasta waxay masuul ka tahay dhiiri gelinta ururada ka shaqeeya isdhexgalka qowmiyadaha kala midabka ah, dhaq-dhaqaaqpda iyo aaladaha kale ee cidhibtirka caqabadaha dhex yaala dadka kala midabka ah isla markaaha aysan dhiirigelinin wax kasta oo xoojinaya kala qeyb sanaanta midabada.

2- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay, Markay duruufuhu saamaxayaan qaadaan talaabooyin gaar ah oo adag ee dhinacyada bulshada, dhaqaalaha, dhaqanka iy dhinacyada kale si loo xaqiijiyo horumar ku filan iyo itaalinta kooxaha midabka gaarka ah ama shaqsiyaadka ka tirsan, iyadoo ujeedadu tahay in loo damaanad qaado iyaga ku raaxeysiga buuxa ee la siman kuwa kale ee xuquuqaha bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah. Tallaabooyinkani waa inaysan sinaba u keenin natiijo keenta in kooxaha kala midabka duwan ay helaan xuquuqo kala duwan oo aan sinayn kadib marka ujeedooyinkii laga lahaa laga gaadho.

Qodobka 3:-

Dawladaha ka qeyb galaya waxay si gaar ah u canbaaraynayaan quudhsiga midabka iyo Midab-takoorka waxayna masuuliyad ka saarantahay ka hortagida mamnuucida iyo baabi'inta dhamaan hab-dhaqanada dabcigan leh ee ka jira deegaanada ay ka taliyaan.

Qodobka 4:-

Dawladaha ka qeyb galaya waxay canbaaraynayaan dhamaan dacaayada iyo ururada ku saleysan aragtiyaha ama fikradaha islaweynida hal qollo ama kooxo hal midab ah ama isku qowmiyad kasoo jeedaa ama kuwaasoo isku dayaya inay qiil u sameystaan ama kor u qaadaan jinsi naceyb iyo midab-takoor nooc kasta oo uu yahay, waana inay qaadaan talaabooyin deg-deg ah oo wanaagsan looguna talagalay dabargoynta dhamaan kicinta ama falalka midabtakoorka.

Si arintan looga midho dhaliyo, iyadoo laga duulayo mabaadiida lagu xusay Baaqa caalamiga ah ee xuquuqaha Bini'iaadamka iyo xuquuqaha si cad loogu qeexay

Qodobka 5 ee Axdigan:-

(B) Waa inay ku dhawaaqaan inay danbi ciqaab lagu mutaysaanayo sharciga yihiin dhamaan isu gudbinta fikradaha ku saleysan isla weynida qollo ama naceybka. Kicinta midab-takoorka nooc kasta oo uu yahay iyo weliba dhamaan falalka rabshada ah ama kicinta falal noocan ah oo ka dhan ah qollo ama koox midab ama qowmiyad kale kasoo jeeda iyo sidoo kale xaalad taageero u ah hawlaha midab-takoorka oo ay ku jirto maaliyad ku bixinta arintaas.

(T) Waa inay ku dhawaaqaan inay sharci daro yihiin ayna mamnuucaan ururada iyo sidoo kale hawlaha loo abaabulay iyo dhamaan dacaayadaha kale ee kor u qaadaya isla markaana kicinaya midab-takoorka, waana in loo aqoonsado ka qeyb galka ururada ama hawlaha noocan ah inay yihiin danbi ciqaab lagu mutaysanayo sharciga.

(J) Waa inaan loo ogolaanin hay'adaha dawlada ama machadyada dadweynaha, wadan ahaan ama

deegaan ahaan, inay kor u qaadaan ama kiciyaan Midab-takoorka.

Qodobka 6:-

Hab waafaqsan waajibaadyada aasaasiga ah ee ku xusan Qodobka 2 ee Axdigan, Dawladaha ka qeyb galaya waxaa saaran inay mamnuucaan ayna dabar gooyaan midab-takoorka noocyadiisa oo dhan islamarkaana ay damaanad qaadaan xuquuqda qof kasta iyadoo aan lagu kala soocaynin qollo, midab ama halka uu dhalasho ahaan kasoo jeedo, in loo sinaado sharciga hortiisa, gaar ahaan ku raaxaysiga xuquuqahan soo socda:-

(B) Xuquuqda in si isku mid ah oo siman loola dhaqmo maxkamadaha hortooda iyo dhamaan laamaha kale ee cadaalada maamulaya.

(T) Xuquuqda amaanka qofka iyo ilaalinta Dawladu ee ka dhanka ah rabshada ama dhaawaca jidheed ama ha u geystaan saraakiisha dawladu ama kooxo shaqsiyaad ah ama ururo.

(J) Xuquuqaha siyaasadeed, gaar ahaan xuquuqda ka qeyb qaadashada doorashooyinka, wax doorashada iyo in la doorto oo ku saleysan darajad caalamiga ah oo loo siman yahay, ka

qeyb galka Dawlada iyo weliba fulinta arimaha Dawlada heer kasta oo ay hihiin iyo helitaanka loo siman yahay ee adeegyada Dawlada.

(X) Xuquuqaha kale ee Madaniga ah gaar ahaan:-

i. Xuquuqda xoriyada dhaq-dhaqaaqa iyo deganaanta gudaha xuduudka dalka;
ii. Xuquuqada ka tegidalka bixida wadanka oo uu ku jiro qofka dalkiisu iyo kusoo noqashada dalka uu u dhashay;
iii. Xuquuqda dhalashada.
iv. Xuquuqda guurka iyo xulashada lamaanaha.
v. Xuquuqda yeelashada hanti gaar ah iyo weliba hanti kala dhaxeysa dadka kale.
vi. Xuquuqda dhaxalka
vii. Xuquuqda xoriyada fikirka, aragtida iyo diinta.
viii. Xuquuqda xoriyada mabda'a iyo hadalka.
ix. Xuquuqda xoriyada isu soo baxyada iyo ururada nabadgeliyada ah.

(KH) Xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqan, qaar ahaan:-

i. Xuquuqaha shaqada, Xulashada xorta ah ee shaqaaleynta xaaladaha iyo jawiga ku haboon shaqada, ilaalin ka dhan ah shaqo la'aanta, ajuuro u

dhiganta shaqada isku midka ah, mushaar ku haboon oo sax ah.

ii. Xaquuqda dhisida iyo ku biirida ururada ganacsi.

iii. Xuquuqda Hoyga.

iv. Xuquuqda caafimaadka dawlada, Daryeelka caafimaadka damaanad qaadka bulshada iyo adeegyada bulshada.

v. Xuquuqda waxbarashada iyo tababarka.

vi. Xuquuqda ka qeyb qaadashada siman ee hawlaha dhaqanka.

(B) Xuquuqda gelida goob kasta iyo helida adeeg kasta oo loogu tala galay isticmaalka dadweynaha guud ahaan sida gaadiidka, Huteelada, makhaayadaha, caweysyada iyo goobaha dalxiiska iwm.

Qodobka 7:-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u xaqiiiyaan qof kasta oo ku sugan gudaha dalka ay ka taliyaan, ilaalin haboon iyo Mag-dhowyo loo sii maraayo Maxkamadaha awooda u leh ee dalka iyo machadyaoa kale ee dawlada, kuwaasoo ka dhalanaya, falal ama midab-takoor xad-gudub ku ah xuquuqihiisa bini'aadamka iyo xoriyaadka aasaasiga ah oo ka hor imanaaya Axdigan iyo sidoo kale, xuquuqda inuu

maxkamadahan ka raadsado bogsiin xaq ah oo ku filan ama uu ku qanacsan yahay kuna ilaawi karo khasaaraha soo gaadhay ee ka dhashay midab takoorkan.

Qodobka 8:-

Dawladaha ka qeyb galaya waa inay qaadaan talaabooyin deg-deg ah oo waxtar leh, gaar ahaan dhinacyada barista, wax-barashada, dhaqanka iyo xogta si loola dagaalaamo waxyeelooyinka horseedi kara Midab takoorka iyo kor u qaadista isfahamka, dulqaadka iyo saaxiibtinimada ka dhexeysa dalalka iyo qowmiyadaha ama kooxaha jinsiga kala duwan iyo sidoo kale meel marinta ujeedooyinka iyo mabaadiida Axdiga Qaramada Midoobay, Baaqa Caalamiga ee Xuquuqaha Biniaadamka, Baaqa cidhibtirka Dhamaan Noocyada Midab-takoorka iyo Axdigan.

QEYBTA – II

Qodobka 9:-

1- Waa in la aasaaso Guddiga cidhibtirka Midab-takoorka (oo wixii hada ka dambeeya loogu yeedhi doono guddiga) oo ka kooban sideed iyo toban khabiir oo damiir sare leh laguna yaqaano dhex-dhexaadnimo oo ay doortaan Dawladaha ka qeyb galaya kana soo xuleen muwaadhiniintooda,

kuwaasoo ku shaqeynaya awoodooda shaqsiyeed, waxaana tixgelin la siinayaa qeybsiga siman ee deegaanada iyo ilbaxnimooyinka kala duwan iyo weliba nidaamyada sharciga ee waaweyn.

2- Xubnaha Guddiga waa in lagu doorto cod qarsoodi ah, iyadoo laga duulayo liiska dadka ay Dawladaha soo Magacaabeen. Dawlad kasta waxay soo magacaabi kartaa hal qof oo ka mid ah muwaadiniinteeda.

3- Doorashada ugu horeysa waa in la qabto lix bilood kadib taariikhda dhaqan galka Axdigan.

   Ugu yaraan sadex bilood ka hor xilliga doorasho kasta, waa inuu xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu warqad ku wargeliyo Dawladaha ka qeyb galaya isagoo ku marti qaadaya inay soo gudbiyaan magacaabistooda labba bilood gudahood. Xoghayaha Guud waa innu diyaariyo liiska dadka lasoo magacaabay oo xaraf ahaan kala horeeya, muujinayana Dawladaha soo magacaabay, una gudbiyo Dawladaha ka qeyb galaya.

4- Doorashooyinka xubnaha guddiga waxaa lagu qabanayaa shirka Dawladaha ka qeyb galaya oo uu

faraayo xoghayaha Guud kana dhacaya xarumaha Qaramada midoobay. Shirkaas oo ay sadex meelood labba dalool ku qabsoomayo xubnaha loo doorta Guddigu waa inay noqdaan kuwa ku guuleysta ama hela codadka ugu badani iyo aqlabiyada cadadka wakiilada Dawladaha ka qeyb galay ee codeeyay.

5- (B) Xubnaha guddiga waa in loo doorto mudo afar sano ah. Haseyeeshee, mudada shaqo ee sagaal xubnood oo la doortay doorashada ugu horeysa waxay ku egtahay dhamaadka labba sanadood; shir gudoonka guddiga ayaa xulanaya magacyada sagaalkaas xubnood waxyar kadib doorashada ugu horeysa markay qabsoonta.

(T) Marka uu xubin Guddiga ka tirsan oo booska baneeyo. Dawlada oo khabiirkeedu shaqada baneeyay waa inay soo magacowdo khabiir kale oo muwaadiniinteeda ka mid ah waana inuu Guddiga ansixiyo xubinkan.

6- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay masuul ka noqdaan kharashyada xubnaha Guddiga markay ku guda jiraan gudashada waajibaadyada Guddiga.

Qodobka 10:-

1- Dawladaha ka qeyb galaya waa inay u soo gudbiyaan xoghayaha Guud, si uu Guudigu u qiimeeyo, warbixin ku saabsan talaabooyinka sharciyeed, garsoor, maamul ama kuwa kale ee la qaaday ee saameynta ku leh qodobada Axdigan :-

(B) Mudo hal sano gudaheed ah kadib marka uu Axdigani ka dhaqan galo wadanka ay khuseyso.

(T) Intaas kadib labbadii sanaba hal mar iyo mar kasta oo uu Guddigu ka codsado. Guddigu wuxuu ka codsan karaa Dawladaha xog dheeri ah.

2- Guddigu waa inuu warbixin sandle ah u gudiyo Golaha loo dhan yahay isagoo u sii marinaaya xoghayaha Guud, taasoo ku aadan shaqooyinkiisa, sameynayana soo jeedino iyo tallooyin guud oo ku saleysan baadhitaanka warbixinada iyo xogta laga helay Dawladaha. Soo jeedinada iyo tallo bixinada guud, waa in loo tebiyo golaha loo dhan yahay iyadoo la raacinaayo fikirada Dawladaha haddii ay ka dhiibteen.

Qodobka 11:-

1- Guddigu waa inuu diyaarsado xeerarkiisa shaqo.

2- Guddigu waa inuu u doorto saraakiishiisa muddo labba sanno ah.
3- Xoghaynta Guddiga waa inuu keeno xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.
4- Shirarka Guddigu waa inay caadi ahaan ka dhacaan xarumaha Qaramada Midoobay.

Qodobka 12 :-

1- Haddii Dawlad qeyb ka ah Axdigan ay u aragto inay jirto Dawlad aan dhaqan gelinin Qodobada Axdigan, waxay arinta la socodsiinaysaa Guddiga. Guddigu waa inuu u gudbiyo arinta Dawlada ay khuseyso. Dawlada arinta loo gudbiyay, waa inay mudo sadex bilood gudahood ah guddiga ugu soo gudbiyaan sharaxaad qoraal ah ama odhaahyo cadeyn ka bixinaya arinta iyo xal laga gaadhay haddii uu jiro, oo ay ka gaadhay Dawladaasi.
2- Haddii arinta aan loo maareynin hab ay ku qanacsan yihiin labada dhinacba, wada xaajood laba dhinac ah oo ay yeeshaan kadib ama hab kale oo iyaga u furan, mudo lix bilood gudahood ah kadib marka Dawlada loo gudbiyo arinta, mid kasta oo Dawladahan, ka mid ah wuxuu xaq u leeyahay inuu mar labaad guddiga

arinta kusoo celiyo kuna wargeliyo Guddiga iyo Dawlada Kaleba.

3- Guddigu waa inuu u maareeyo arinta loogu soo gudbiyay hab waafaqsan Qodob-hoosaadka (2) ee Qodobkan, kadib markuu hubiyo in xalkii gudaha Dawladaas laga quustay, qaab waafaqsan mabaadida la aqoonsan yahay ee xeerka caalamiga ah. Tanina ma noqonayso mabda'a xeerka, marka xalka arintan sabab la'aan uu sii jiitamo.

4- Arin kasta oo loo soo gudbiyo Guddigu wuxau ugu baaqi karaa Dawladaha ay khuseyso inay keenaan xog kale oo xidhiidh dheeri ah la leh arinta.

5- Marka uu Guddigu baadhayo ama qiimaynayo arinta qodobkani ka hadlayo, Dawladaha ay khuseyso waa inay u soo dirsadaan wakiil uga qeyb gala geedi-socodka Guddiga, isagoo aan lahayn xuquuqda codeynta, marka arinta laga go'aan qaadanayo.

Qodobka 13:-

1- (B) Kadib marka uu Guddigu helo uuna uruursado dhamaan xogta uu u arko inay lagama maarmaan tahay, shir-gudoonku waa inuu magacaabo komishin heshiisiin oo ku meel gaadh ah (oo wixii hada ka

danbeeya loogu yeedhi doono komishinka) oo ka kooban shan qof oo ka mid ah ama ka baxsan xubnaha Guddiga. Xubnaha komishinka waxaa lagu magacaabaya ogolaanshaha dhinacyada moranku ka dhexeeyo, iyadoo xafiisyada komishinka laga furayo Dawladaha ay khuseyso, si ay xal haboon uga gaadhaan arinta iyadoo laga duulayo xushmeynta Axdigan.

(T) Hadii Dawladaha Moranku ka dhaxeeyo ay ku guul dareystaan inay heshiis ka gaadhaan sadex bilood gudahood ee dhamaan ama qeyb ahaan xubnaha uu ka koobnaanayo komishinku, waa inuu Guddigu cod qarsoodi ah ku doorto sadex dalool laba meelood oo xubnahiisa ah xubnaha komishinka ee ay Dawladuhu ku heshiin waayeen.

2- Xubnaha Komishinka waa inay ku shaqeeyaan awoodooda shaqsiyeed. Waana inayna noqonin muwaadiniin u dhashay Dawladaha moranku ka dhaxeeyo ama Dawlad aan qeyb ka ahayn Axdigan.

3- Komishinku waa inuu doorto shir-gadoonkiisa uuna diyaarsado xeerarka habka shaqadiisa.

4- Shirarka Komishinku waa inay, caadi ahaan ka qabsoomaan xarumaha Qaramada midoobay ama goobta kale ee ku haboon ee uu u doorto Komishinku.

5- Xoghaynta lagu xusay Qodobka 10-Qodob-hoosaadkiisa (3) ee Axdigan waa inay sidoo kale u adeegto komishinka markasta oo moran ka dhexeeya Dawladaha ka qeyb galaya lana horkeeno Komishinka.

6- Dawladaha uu moranku ka dhexeeyo waa inay si siman u wadaagaan dhamaan kharashyada ku baxaya xubnaha komishinka iyagoo raacaya qiyaasta uu bixiyo xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

7- Xoghayaha Guud waa in awood loo siiyo inuu bixiyo kharashyada xubnaha komishinka, haddii ay lagama maarmaan noqoto, ka hor intayna dib uu magdhabin Dawladaha moranku ka dhaxeeyo hab waafaqsan Qodab-hoosaadka (6) ee Qodobkan.

8- Xogta uu helay Guddigu waa in la gaadhsiiyo komishinka, iyadoo uu komishinku ka codsan karo Dawladaha ay khuseyso in ay keenaan xog kale oo xidhiidh dheeraad ah la leh arinta.

Qodobka 14:-

1- Marka uu komishinku si buuxda u falanqeeyo arintas waa in uu warbixin ka diyaariyo una qudbiyo shirgudoonka Guddiga, taasoo ay ka muuqato xaqiiqooyinka ee dhamaan suaalaha dhab ahaan ula xidhiidha nuxurka ay isku maan dhaafsan yihiin dhinacyadu ayna ku jiraan tallooyinka ay isleeyihiin way ku haboon yihiin inay xalku haboou u no qdaan muranka.

2- Shir-gudoonka Guddigu waa inuu la socodsiiyo war-bixinta komishinka mid kasta oo Dawladaha dhinaca ka ah moranka. Dawladahani, waa inay mudo sadex bilood gudahood ah, ku wargeliyaan shir-gudoonka Guddiga inay ogol yihiin iyo in kale tallooyinka ku xusan warbixinta komishinka.

3- Kadib mudada ku xusan Qodob-hoosaadka (2) ee Qodobkan shir-gudoonka Guddigu waa inuu gaadhsiiyo warbixinta komishinka iyo go'aanada Dawladaha ay arintu khuseyso, Dawladaha kale ee ka qeyb galaya Axdigan.

Qodobka 15:-

1- Dawladah ka qeyb galaya wakhti kasta way ku dhawaaqi kartaa inay aqoonsan yihiin awooda Guddigu u leeyahay qabashada iyo baadhista xogaha ay u soo gudbiyaan shaqsiyaad ama kooxo ku sugan dhulka ay ka taliso, kuwaasoo ka cabanaya xad-gudub kaga yimid Dawlada oo ka dhan xuquuqaha lagu xusay axdigan. Guddigu waa inuusan qabanin cabshadan hadii ay ku saabsan tahay Dawlad aan sameynin baaqa noocan ah.

2- Dawlad kasta oo sameysa baaqa ku xusan Qodob-hoosaadka (1) ee Qodobkan waxay sameyn kartaa hay'ad ka tirsan nidaamka sharciyeed ee dalkeeda oo awood u leh qabashada iyo baadhista cabashooyinka shaqsiyaadka ama kooxaha ku sugan dhulka ay xukunto ee ka cabanaya in ay dhibane u yihiin xad-gudub ka dhan ah xuquuqaha lagu xusay Axdigan, kana quustay inay bogsiino ka helaan gudaha dalka.

3- Baaqa loo sameeyay hab waafaqsan Qodob-hoosaadka(1) ee Qodobkan iyo magaca hay'ada lagu aasaasay ama loo xusay hab-waafaqsan Qodob-hoosaadka (2) ee Qodobkan-waa inay Dawlada ay khuseyso ay dhigtaa xafiiska xoghayaha guud oo

isaguna ay tahay inuu u gudbiyo nuqullada Dawladaha kale ee ka qeyb galaya. Baaqa waa laga noqon karaa wakhti kasta oo la doono iyadoo lagu wargelinayo xoghayaha guud, laakiin ka noqoshadani waxba uma dhimayaan cabashooyinka Guddigu gacanta ku hayo.

4- Diiwaan cabashooyinka la geliyo waa inay sameyso hay'ada lagu aasaasay ama lagu xusay hab waafaqsan qodob-hoosaadka (2) ee Qodobkan iyadoo nuqullo la xaqiijiyay oo diiwaanka ah sanad walba lagu soo gaadhsiinayo qaababka ku haboon xoghayaha guud, iyadoo loo baahan yahay in waxyaabaha ku qoran aan la shaacinin.

5- Marka lagu guul dareysto in qancin laga helo hay'ada lagu aasaasay ama lagu xusay hab waafaqsan qodob-hoosaadka (2) ee Qodobkan, qofka cabanaya wuxuu xaq u leeyahay inuu arinta kusoo gaadhsiiyo Guddiga mudo lix bilood gudahood ah.

6- (B) Guddigu waa inuu si asturan ula socodsiiyo cabashada loo soo gudbiyay Dawlada lagu eedaynayo ku xad-gudubka Qodobada Axdigan, laakiin hayb-sooca shaqsiga ama kooxaha ay

khuseyso waa inaan shaaca laga qaadin iyadoo aan lahaynin ogolaansho cad oo ay bixiyeen. Guddigu waa inuusan aqbalin cabashooyin maldahan oo mad-madow ku jiro.

(T) Sadex billod gudahood, Dawlada la soo gaadhsiiyay waa inay Guddiga u soo gudbiso sharaxaado qoraal ah ama odhaahyo cadeynaya arinta iyo mag-dhowga, haddii ay jirto wax talaabo ah oo ay Dawladu qaaday.

7- (B) Guddigu waa inuu u falanqeeyo cabashooyinka isagoo ka duulaya dhamaan xogta ay ka heli karaan dawlada ay khuseyso iyo cidda cabanaysa. Guddigu waa inuusan cabashada ka qabanin ilaa uu xaqiijiyo in cidda cabanaysa ay ka quusatay dhamaah meelaha ay ka heli karto mag-dhowga ee gudaha dalka ah. Haseyeeshee, tani ma noqenayso mabda'a xeerka, marka mag-dhowyada la filaayo si aan macquulahayn u sii jiitamaan.

(T) Guddigu waa inuu gaadhsiiyo soo jeedintiisa iyo tallo-bixintiisa, haddii ay jirto, Dawlada ay khuseyso iyo cidda cabanaysaba.

8- Guddigu waa inuu ku daro warbixintiisa sanadlaha ah cabashooyinkan oo kooban iyo marka ay ku haboon tahay

sharaxaadaha iyo odhaahyada Dawladaha oo kooban iyo soo jeedinta iyo tallooyin kiisa.

9- Guudigu wuxuu awood u leeyahay fullinta shaqooyinka ku xusan Qodobkan, marka ugu yaraan Toban Dawladood oo ka qeyb galaya Axdigan ay baaq ku muujiyaan u hogaansanka Guddiga hab waafaqsan Qodob-haasaadka (1) ee Qodobkan.

Qodobka 16:-

1- Ka midho dhalinta ujeedooyinka Baaqa madax-banaamida lagu gaadhsiinaayo dalalka iyo dadyowga la gumeysto ee lagu xusay Bayaanka Golaha loo dhan yahay 1514 (XV) ee 14-ka December, 1960 ee aan weli go'aan laga gaadhin. Qodobada Axdigani sinaba uma xadidayaan xuquuqda cidda cabanaysa ee lagu siiyay dadkaas sharciyada caalamiga ah ama Qaramada midoobay iyo Hay'adaheeda ku shaqada leh.

2- (B) Guddiga lagu aasaasay Qodobka 8, Qodob-hoosaadkisa (1) ee Axdigan waa inuu qabtaa noqollada cabashooyinka uuna u gudbiyo fikradaha iyo tallooyinka oo ka qabo cabashooyinkan, hay'adaha Qaramada Midoobay ee u xilsaaran arimahan sida tooska ah ula xidhiidha Mabaadiida

iyo ujeedooyinka Axdigan si ay u falanqeeyaan cabashooyinka ka imanaya dadka aan iyagu lahayn xukun iyaga matala iyo dhamaan deegaanada kale ee bayaanka Golaha loo dhan yahay 1514 (XV) uu ka hadlayo, ee la xidhiidha arimaha lagaga hadlay Axdigan ee horyaala hay'adahan.

(T) Guddigu waa inuu ka qabtaa hay'adaha awooda u leh ee Qaramada Midoobay, nuqullada warbixinada ku saabsan talaabooyinka sharciyeed, garsoor, maamul ama kuwa kale ee sida tooska ah ula xidhiidha mabaadiida iyo ujeedooyinka Axdigan ee ay qaaday cidda awood maamul leh ee ka talisa deegaanada lagu sheegay Qodob-hoosaadka (b) ee Qodobkan, waana in muujiyo fikradaha bixiyana talloyin uu siinayo hay'adahan.

3- Guddigu waa in uu ku daro warbixintiisa uu u gudbinayo Golaha loo dhan yahay, cabashooyinka iyo warbixiino kooban ee kasoo gaadhay hay'adaha Qaramada Midoobay, iyo fikirada iyo tallooyinka Guddiga ee ku saabsan cabashada iyo warbixinada.

4- Guddigu waa inuu ka codsado xoghayaha guud dhamaan xogta la xidhiidha ujeedooyinka Axdigan ee uuu heli

karo ee ku saabsan deegaanada lagu sheegay Qodob-hoosaadka 2 (b) ee Qodobka.

Qodobka 17:-

Qodobka Axdigan ee ku saabsan xalinta khilaafaadka ama cabashooyinka waa in loo dabakho iyadoo aan waxba loo dhimaynin hababka kale ee xalinta khilaafaadka ama cabashooyinka ee dhinaca midab-takoorka lagu xusay qoraalada ama Axdiyada ay dejisay Qaramada Midoobay iyo hay'adaheeda ku shaqada leh, waana inayna ka hor joogsan Dawladaha inay habab kale u adeegsadaan xalinta khilaafka iyagoo raacaya heshiisyadu caalamiga ah ee guud ama gaarka ah ee dhaqan galka ku ah iyaga.

QEYBTA – III

Qodobka 18:-

1- Axdigani wuxuu u furan yahay inay saxiixaan Dawladaha xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ama xubinka ah hay'adeeda gaarka ah, Dawlad kasta oo xubin ka ah Maxkamada cadaalada ee caalamiga ah xeerka u yaala, iyo Dawlad kasta oo kale oo uu ku marti qaaday Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay inay ka mid noqoto Axdigan.

2- Axdigan waxaa loo baahan yahay in la ansixiyo. Qoraalka ansixinta waa in la dhigo xafiiska xoghayaha Guud.

Qodobka 19:-

1- Axdigan waa inuu uu furnaado qaadashada Dawlada lagu xusay Qodobka 17 Qodob-hoosaadka (1) ee Axdigan.
2- Qaadashadu waxay ku dhaqan galaysaa dhigitaanka qoraalka qaadashada la dhigo xafiiska xoghayaha Guud.

Qodobka 20:-

1- Axdigani wuxuu dhaqan gelayaa maalinka sodonaad kadib marka la dhigo xafiiska xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay qoraalka Todoba iyo labaatanaad ee ansixinta ama qaadashada.
2- Dawlad kasta oo ansixinaysa ama qaadanaysa kadib marka la dhigo qoraalka Todoba iyo labootanaad ee ansixinta ama qaadashada, Axdigu wuxuu dhaqangal ku noqonayaa maalinka sodonaad kadib marka ay dawladaasi dhigto qoraalkeeda ansixinta ama qaadashada.

Qodobka 21:-

1- Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu qabtaa uuna wada gaadhsiiyo dhamaan dawladaha ka mid ah ama ka mid noqonaya Axdigan afeefta ay sameeyaan dawladuhu marka ay ansixinayaan ama qaadanayaan Axdigon. Dawlad kasta oo diidan afeefta waa inay mudo sagaashan maalmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta lala soo xidhiidhay, ku wargeliso xoghayaha guud inaysan ogolayn afeefta loo soo gudbay.

2- Afeefta aan la jaan qaadi Karin ama waafafsanayn ujeedada Axdigan waa midaan la aqbali Karin, sidoo kale afeefta wax u dhimaysa ama xanibaysa hawlaha hay'adaha lagu aasaasay Axdigan waa mid aan la qaadan Karin. Afeefta waxaa loo arkayaa mid aan waafaqsanayn axdigan ugu yaraan hadii sadex dalool laba meelood oo Dawladaha ka qeyb galaya ay diidaan.

3- Afeefaha waa laga noqon karaa wakhti kasta iyadoo wargelin la gaadhsiinaayo xoghayaha guud wargelinta noocan ah waxay dhaqan galaysaa isla taariikhda la soo gaadhsiiyo cidda ay khuseyso.

Qodobka 22:-

Dawlada ka mid ah Axdigan waa ay ka bixi kartaa iyadoo qorael ku wargelinaysa xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay, ka bixitaanku wuxuu dhaqan galayaa hal sano ka dib taariikhda wargelinta la gaadhsiiyay xoghsyaha Guud.

Qodobka 23:-

Khilaaf kasta oo soo kala dhex gala laba Dawladood ama wax ka badan oo ku saabsan macnaynta ama dabakhaada Axdigan kaasoo ay ku xalin kari waayaan wada xaajood ama hababka sida cad loogu xusay Axdigan dhexdiisa, marka uu codsi ka yimaado mid ka mid ah Dawladaha dhinaca ka ah khilaafka, waa in loo gudbiyo maxkamada codaalada ee caalamiga ah si ay go'aan uga gaadho, haddii aysan dhinacyadu ku heshiin in inay hab kale ku dhameystaan.

Qodobka 24:-

1- Codsiga dib u eegista Axdigan waxaa la samayn karaa wakhti kasta iyadoo qoraal arintaas ku saabsan ay dawladu gaadhsiinayso xoghayaha Guud.
2- Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay waa inuu go'aamiyo talaabooyinka laga qaadayo codsigan hadiiba ay jiraan.

Qodobka 25:-

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu wargeliyo dhamaan ciddadaha lagu xusay Qodobka 17 Qodob-hoosaadkiisa (1)ee Axdigan, arimahan gaarka ah ee soo socda:-

(B) Saxiixyada, ansixinada iyo qaadashada lagu xusay Qodobada 17 iyo 18.

(T) Taariikhda dhaqan galka Axdiga ee lagu xusay Qodobka 19.

(J) Wargelinada iyo baaqyada la soo gaadhsiiyay ee ku xusan Qodobada 14,20, iyo 23

(X) Ka bixitaanada ku xusan Qodobka 21.

Qodobka 26:-

1- Axdigan oo luuqadaha shiinaha, ingiriiska, Faransnska Ruushka iyo isbaanishku ay asal ahaan sharciyad isku mid ah leeyihiin, waa in la dhigo xusuus-dhowrka Qaramada Midoobay.
2- Xoghayaha guud ee Qaramada Midoobay waa inuu u gudbiyo nuqullo la xaqiijiyay oo Axdigan ah dhamaan Dawladaha ka mid ah kuwa lagu sheegay Qodobka 17 Qodob-hoosaadkiisa (1) ee Axdigan.